**SHARCI LR.37** **TAARIIKH: 11-DA MAAJO 2025**

**SHARCIGA CANSHUURTA DAKHLIGA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 82aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG. |
| **MARKUU ARKAY:** | Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0723/B11/25**, ku taariikheysan **11/05/2025**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta''Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga. |
| **MARKUU TIXGELIYAY:** | Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan. |

WM

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Canshuurta Dakhliga.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
DIRID / SENT
11 MAY 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sadiq
SAACAD ______ SAXIIX ______

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

**Madaxweynaha J. F.S.**

Jumhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyahaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/0723 /B11/25:الرقم

Mogadishu, May 11, 2025 التاريخ

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR .. 12-5-2025
TIX ... 38
SAXIIX: Abdisalan Bashir
BIXID / EXIT

**Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Ansixinta "Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga"**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee **Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

**Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** waxa uu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd ***Maarso 03, 2025*** waxa uuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka waxa uu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindisahan ***Maarso 10, 2025,*** *isla* markaana u gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare waxa uu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka Abriil 29, 2025.

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxa aan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad **Hindise Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS.**

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare.
Og: Wasaaradda Maaliyadda XFS
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka BJFS.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/222/B-11/25 Taariikh: 29/4/25 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS =Muqdisho=
Og:- Guddiga Maaliyadda Golaha Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Maaliyadda XFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha XFS =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo: Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF6/28 /2025** kuna taariikheysan **28ka Abriil, 2025**, uuna Goluhu ku ansixiyay **Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga:**

- Waxaa soo xaadiray: **28 Senatar.**
- Waxaa codeeyay: **27 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **26 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **1 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare BJFS ee kor ku xusan iyo nuqulka Hindise-sharciyeedka ee uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 30-4-2025
TIX: 242
SAXIIX: Abdikadir Bashir
GELID / ENTRY

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA

| Senatorrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 27 | 26 | 0 | 1 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | Taariikh: 28 Abriil, 2025 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi | Taariikh: 28 Abriil, 2025 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare<br>ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Md. Cabdinaasir Ibrahim Guleed | Taariikh: 28 Abriil, 2025 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA
# “CANSHUURTA DHAKHLIGA”

**Mugadishu,**
**28 Abriil, 2025**

**Tix**: GAS/B-11/KF6/28/25 **Taariikh: 28 Abriil, 2025**
Kalfadhiga **6aad**
Kulankiisa **4aad**

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Hindise-sharciyeedka **"Canshuurta Dakhliga"** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, soona gaaray Golaha Aqalka Sare **08 Abriil, 2025,** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.50aad** iyo **Qod.51aad (4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Sida wanaagsan ee uu Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska ee Golaha Aqalka Sare ee BFS uga soo shaqeeyay **Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga.**

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto meel marinta **Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga**.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **6aad**, kulankiisa **4aad**, oo ay soo xaadireen **28 Senator** (siddeed iyo labaatan Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

### ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay **Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay.

### Qod.2aad

### GUDBINTA QARAARKA GOLAHA AQALKA SARE

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Tix: XGGSH/ 0700/B-11/25 :الرقم

Muqdisho, April 05, 2025: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Guddiga Maaliyadda Golaha Shacabka BJFS.
Og: Wasaaradda Maaliyadda XFS.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR .. 07-21-2025
TIX ... 541
SAXIIX: Abdi Hasan Bashir
BIXID / EXIT

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA**

Mudane Guddoomiye,

Waxaan halkan kugu soo gudbinaynaa Hindise-Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga, kadib markii xildhibaannada Golaha Shacabka kulankoodii 6aad ee kalfadhiga 6aad ay ku ansixiyeen si waafaqsan qodobka 69 farqadiisa (1)(a) ee Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya, taariikhdu markay ahayd 10ka Maarso 2025, codayntuna sidaan hoose ayay u dhacday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | 141 |
| **Oggol:** | 138 |
| **Diiday:** | 2 |
| **Ka aamustay:** | 1 |

Hadaba, Mudane Guddoomiye, waxaan si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG halkan idinku soo gudbinaynaa Hindisihan si waajibaadkiina Dastuuriga ah aad uga gudataan.

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah

M.ne Sheikh Adan Mohamed Nur - Madoobe
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS

Tell: +252 616641550/+252 618123405
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA

| |
|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay: 141<br>Oggol: 138;<br>Diiday: 2;<br>Ka Aamustay: 1; |
| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS |

| | |
|---|---|
| Xil. Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | Tar: 05/04/2025 |

| |
|---|
| Guddoomiye K/Xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka BJFS |

| | |
|---|---|
| Xil. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar | Tar: 05/04/2025 |

| |
|---|
| Ku Simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS |

| | |
|---|---|
| M.ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi "Ciyow" | Tar: 05/04/2025 |

Tixraax:XRW/0506/07/2024 Tariikh : 11/07/2024

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 18 JUL 2024 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**UJEEDDO: SOO GUBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA**

**Mudane Guddoomiye,**

Annaga oo ka anbaqaadeyna Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24 ee 11/07/2024** , kuna saabsan ansixinta **"Hindise-Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga oo muhiim u ah kobcinta dakhliga Dowladda, waxa uu soo maray dhammaan habraacyadii loo asteeyay.

Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah. waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Cashuurta Dakhliga".**

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 3-3-2025
TIX: 174
SAXIIX: Xuseen
GELID / ENTRY

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/298/07/2024

Tariikh: 11/07/2024

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
11 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Wasaaradda Maaliyadda = Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE, ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA CANSHUURTA DAKHLIGA**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay Ref **WM/XWD/1172/2024** ee ku taariikheysan **9/07/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Maaliyadda ee Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24 ee 11/07/2024,** kuna saabsan ansixinta Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga.

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Wuxuu Meelmariyay:

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24** ee **11/07/2024,** kuna saabsan ansixinta Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

In si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka "**Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga**" si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiiru Dowlaha

جمهو رية الصوما ل الفيد را لية
وزارة المالية
مكتب وزير الدولة

The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the State Minister

WM /XWD- 1172/24

9 July, 2024

**Ku: Ra'iisul Wasaaraha XFS**
**Og: Agaasimaha Golaha Wasiirada, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**
**Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda**
**Og: Wasiir Ku-Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda**
**Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

**Ujeeddo: Soo gudbinta Hindise Sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Waxaan halkaan si xushmadleh kugu soo gudbinaynaa Hindise Sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga, kaas oo larabo in loo gudbiyo Golaha Wasiirada XFS, si ay u ansixiyaan.

Hindise Sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga ayaa loogu talagalay in lagu xoojiyo dardargelinta iyo kobcinta Dakhliga Dowladda.

Hindise Sharciyeedkan ayaa marka laga soo tago inuu muhiim u yahay kor u qaadista Dakhliga Guud ee Dowladda, waxa uu sidoo kale kamid yahay shuruudaha muhiimka u ah taageerida Miisaniyadda ee Bankiga Adunka, taas oo la filaayo in Soomaaliya hesho sanadkaan gudihiisa.

Ugu dambeyntii, Wasaaradda Maaliyadda ayadoo ka faa'iidaysaneysa fursadan, ayey uga mahadcelinaysaa Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya hoggaminta iyo garab istaaga joogtada ah.

**Mahadnaq iyo Qadarin,**

**H.E Raho Mohamud Janaqow**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda**
**Ahna K/s Wasiirka Maaliyadda**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA

Maarso 11, 2025

**Tusmo**

CUTUBKA 1-AAD ........ 1
QODOBBO GUUD ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Magaca iyo Baaxadda Sharcigan ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 1
Qeexitaanno ........ 1
Qodobka 3-aad ........ 10
Shakhsiyaadka, Hay'adaha iyo Xubnahooda iyo Maareeya-yaashooda ........ 10
Qodobka 4-aad ........ 13
Shakhsiyaad Xidid ah ........ 13
Qodobka 5-aad ........ 14
Hawlaha Dakhliga Laga Helo ........ 14
Qodobka 6-aad ........ 15
Hanti, Milkiyad iyo Lacag-bixinnada Isticmaalka Hanti ........ 15
Qodobka 7-aad ........ 19
Aaladaha Maaliyadeed iyo Faa'idooyinkooda ........ 19
Qodobka 8-aad ........ 21
Kharashaadka Gaarka ah iyo Kharashaadka aan La-tixgelinayn ........ 21
CUTUBKA II ........ 23
WAAJIBINTA CANSHUURTA DAKHLIGA ........ 23
Qodobka 9-aad ........ 23
Waajibinta Canshuurta Dakhliga ........ 23
CUTUBKA III ........ 24
SALDHIGA CANSHUURTA DAKHLIGA ........ 24
QAYBTA I ........ 24
DAKHLIGA CANSHUURGALKA AH ........ 24
Qodobka 10-aad Dakhliga Canshuurgalka ah ........ 24
QAYBTA II ........ 24
DAKHLIGA QIIMAYNGALKA AH EE LA KASABADO ........ 24
Qodobka 11-aad ........ 24
Dakhliga Qiimayngalka ah ........ 24
Qodobka 12-aad ........ 25
Dakhliga Shaqada ........ 25
Qodobka 13-aad ........ 27
Dakhliga Ganacsiga ........ 27
Qodobka 14-aad ........ 28

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Dakhliga Maalgashiga ........ 28
QAYBTA III ........ 28
DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY ........ 28
Qodobka 15-aad Dakhliga ........ 29
La Canshuur Dhaafay ........ 29
QAYBTA IV ........ 29
LACAGAHA LA GOYNAYO ........ 29
Qodobka 16-aad ........ 29
Mabaadi'da Guud iyo Xadka Lacag Goynta ........ 29
Qodobka 17-aad ........ 30
Xeerka Lacag-goynta ee Ganacsiga ........ 30
Qodobka 18-aad ........ 30
Faa'idada Ka-dhalata Qaamaha Ganacsiga ........ 30
Qodobka 19-aad ........ 31
Badeeco Ganacsi ........ 31
Qodobka 20-aad ........ 32
Hantida Qiimo-dhacda ........ 32
Qodobka 21-aad ........ 33
Hantida Ra'sumaal iyo Qaanta Ganacsiga ........ 33
Qodobka 22-aad ........ 33
Kala Soocidda Lacag-gooynada Marka ay timaado Aaladaha Maaliyadda ........ 33
Qodobka 23-aad ........ 34
Khasaaraha Ganacsiga ........ 34
Qodobka 24-aad ........ 35
Lacag-goynta Loogu Talagalay iyo Khasaaraha Ka-dhasha Maalgashiga ........ 35
CUTUBKA IV ........ 35
XEERARKA KHUSEEYA QADDARTA LACAGEED EE LAGU XISAABINAYO SALKA CANSHUURTA DAKHLIGA ........ 35
QAYBTA I ........ 35
XISAABINTA CANSHUURTA IYO WAKHTIGA ........ 35
Qodobka 25-aad Sannad Canshuureed ........ 36
Qodobka 26-aad ........ 36
Habka Xisaabinta ........ 36
Qodobka 27-aad ........ 37
Hab Xisaabeedka Caddaanka ah ........ 37
Qodobka 28-aad ........ 37
Hab Xisaabeedka Muteysashada ........ 37



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 29-aad ... 38
Sixitaanka Xisaabaadka Oo Ay Ku Jiraan Kuwa Daymaha Laga Quustay ... 38
Qodobka 30-aad ... 39
Qandaraasyada Muddada-dheer ... 39
Qodobka 31-aad ... 40
Aaladaha Maaliyadeed ... 40
QAYBTA II ... 40
QIIMAYNTA, QOONDAYNTA IYO NOOCEYNTA QADDAR LACAGEED ... 40
Qodobka 32-aad ... 40
Qiimaynta Waafaqsan Qiimaha Suuqa ... 40
Qodobka 33-aad ... 41
Lacag Bixinta Dadban iyo Tan Gacanta-dhexe ... 41
Qodobka 34-aad ... 43
Maalgashiga Wadajirka Loo-leeyahay ... 43
Qodobka 35-aad ... 43
Magdhawga iyo Lacagaha Soo Kabashada ... 43
Qodobka 36-aad ... 43
Ijaarka Maaliyadeed, Lacag-bixinnada Qayb-qaybta iyo Lacag-bixinnada Waqtiyeeysan ... 43
Qodobka 37-aad ... 44
Macaamilaadka Eex la'aanta ah ee Shakhsiyaadka Xiddidka ah ... 44
Qodobka 38-aad ... 45
Kala Qaybinta Dakhliga ... 45
CUTUBKA V ... 46
HANTIDA IYO QAAMAHA ... 46
QAYBTA I ... 46
XEERARKA ASAASIGA AH ... 46
Qodobka 39-aad ... 46
Xisaabinta Kororka iyo Khasaaraha ... 46
Qodobka 40-aad ... 46
Kharashka Ku-baxa Hanti ... 46
Qodobka 41-aad ... 48
Qiimaha Badeeco Ganacsi ... 48
Qodobka 42-aad ... 49
Dheefta Laga-helo Hantida ... 49
Qodobka 43-aad ... 49
Gacan-ka-saaridda Hantida ... 49



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 44-aad ..... 50
Habka Ku Dabaqida Cutubkan Qaamaha ..... 50
Qodobka 45-aad ..... 51
Sixitaanka, Qiimaynta iyo Magdhawga Lacagaha ..... 51
QAYBTA II ..... 52
XEERARKA GAARKA AH ..... 52
Qodobka 46-aad ..... 52
U Wareejinta Hanti Shakhsi Xiddid ah ama Hadyad Ahaan ..... 52
Qodobka 47-aad ..... 53
Gacan-ka-saaridda Hanti Iyadoon La Wareejin ..... 53
Qodobka 48-aad ..... 53
Wareejinta Hantida Laga Dhinto ama Midda Lammaanaha Is-fura ..... 53
Qodobka 49-aad ..... 54
Gacan-ka-saarista Hanti Kutimid Ikhtiyaar La'aanta oo Bedelka-leh ..... 54
Qodobka 50-aad ..... 55
Wareejinta Hantida ee loo maro Rahanta, Heshiisyada Ijaarka Maaliyadeed iyo Iibka Lacagta Loo Bixiyo Qayb-Qaybta ..... 55
Qodobka 51-aad ..... 56
Gacan-ka-saaridda Ka Dhalata Wareejinta Hantida ..... 56
Qodobka 52-aad ..... 57
Ukala Qeybinta Kharashaadka iyo Lacagaha Dheefta ah Hantida Gacanta- laga-saaray ..... 57
Qodobka 53-aad ..... 57
Xeerar Gaar ah oo Dheeraadka ah ..... 57
CUTUBKA VI ..... 57
XEERARKA NIDAAMINAAYA NOOCYADA SHAKHSIYAADKA ..... 57
QAYBTA I ..... 57
SHURAAKOOYINKA ..... 57
Qodobka 54-aad ..... 57
Mabaadi'da Canshuurta ..... 57
Qodobka 55-aad ..... 59
Dakhliga iyo Khasaaraha Shuraakada ..... 59
Qodobka 56-aad ..... 59
Canshuurta Xubnaha Shuraakada ah ..... 59
Qodobka 57-aad ..... 60
Isbadalka Xubnaha Shuraakada ah ..... 60
QAYBTA II ..... 61
AMMAANNO ..... 61

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

Qodobka 58-aad ... 61
Canshuurta Amaanooyinka ... 61
Qodobka 59-aad ... 62
Canshuurta Ka-faa'idaystayaasha ... 62
QAYBTA III ... 62
SHIRKADAHA ... 62
Qodobka 60-aad ... 63
Canshuurta Shirkadaha ... 63
Qodobka 61-aad ... 63
Canshuurta Saamilayda ... 63
QAYBTA IV ... 65
QODOBADA GUUD EE KHUSEEYA HAY'ADAHA ... 65
Qodobka 62-aad ... 65
Isku-wareejinta Hantida ee u Dhaxeeysa Hay'adaha iyo Xubnahooda ... 65
Qodobka 63-aad ... 65
Isbeddelka Milkiyadda ... 65
CUTUBKA VII ... 66
HAWLAHA GAARKA AH ... 66
QAYBTA I ... 66
HOWLAHA QODISTA MACDANTA IYO SHIDAALKA ... 66
Qodobka 64-aad ... 66
Isticmaalka Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.. 66
QAYBTA II ... 66
BANGIYADA IYO CEYMISKA ... 66
Qodobka 65-aad ... 66
Ganacsiga Bankiyada ... 66
Qodobka 66-aad ... 68
Ganacsiga Caymiska Guud ... 68
Qodobka 67-aad ... 69
Ganacsiga Caymiska Muddada Dheer ... 69
Qodobka 68-aad ... 70
Dheefta Caymiska ... 70
QAYB III ... 71
KAYDKA HAWLGABKA ... 71
Qodobka 69-aad ... 71
Sanduuqyada Hawlgabka ee La Aqoonsaday ... 71
Qodobka 70-aad ... 71



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qaaraanka Hawlgabka ee Sanduuqyada Hawlgabka ee La Aqoonsaday ........ 71
Qodobka 71-aad ........ 72
Canshuurta Sanduuqyada Hawlgabka ........ 72
Qodobka 72-aad ........ 73
Lacagaha Hawlgab Ee Laga Helo Sanduuqyada Hawlgabka ........ 73
QAYBTA IV ........ 73
HAWLAHA DANTA GUUD, ISKAASHATADA IYO KUWA AAN FAA'IDO-DOONKA AHAYN ........ 73
Qodobka 73-aad ........ 74
Aqoonsiga Ururada iyo Hay'addaha Danta Guud ee aan Faaiido Doonka Ahayn ........ 74
Qodobka 74-aad ........ 75
Canshuurista Ururada iyo Hay'addaha Dantaguud Ee Aan Faaiido Doonka Ahayn ........ 75
Qodobka 75-aad ........ 77
Naadiyada iyo Ururada Ganacsi ........ 77
Qodobka 76-aad ........ 79
Tabarucaadka Lagu-taageero Arrimaha Qiimaha leh ........ 79
CUTUBKA VIII ........ 79
ARRIMAHA CAALAMIGA AH ........ 79
QAYBTA I ........ 79
DEGGANAANSHO IYO ISHA DAKHLIGA ........ 79
Qodobka 77-aad ........ 79
Shakhsiyaadka Dalka Deegaanka Ku Ah ........ 79
Qodobka 78-aad ........ 81
Badalashada Deganaashaha ........ 81
Qodobka 79-aad ........ 81
Ilaha Dakhliga iyo Lacag-bixinnada ........ 81
QAYBTA II ........ 84
GANACSIYADA JOOGTADA AH ........ 84
Qodobka 80-aad ........ 84
Xarumaha Ganacsi ee Joogtada ah iyo Mulkiilayaashooda ........ 84
Qodobka 81-aad ........ 85
Mabaadi'ida Canshuur Qaadista ........ 85
Qodobka 82-aad ........ 87
Hawlaha, Hantida iyo Qaamaha Xarunta Ganacsi ee Joogtada ah ........ 87
Qodobka 83-aad ........ 89
Dakhliga iyo Khasaaraha Xarunta Ganacsi ee Joogtada ah ........ 89
Qodobka 84-aad ........ 90

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Dakhliga Dibada Loo Diray ..... 90
QAYBTA III ..... 90
DAKHLIGA IYO KHASAARAHA HOWLAHA DIBADDA ..... 90
Qodobka 85-aad ..... 91
Lacag Goynta iyo Khasaaraha Howlaha Dibadda ..... 91
Qodobka 86-aad ..... 92
Tixgelinta Canshuur Dibadda Lagu Baxshay ..... 92
Qodobka 87-aad ..... 93
Amaanooyinka iyo Shirkadaha Dibaddeed ee La Kontoroolo ..... 93
Qodobka 88-aad ..... 95
Canshuur Khafiifinta La Xiriirta Faa'dada Ka-dhalata Saamiyada ..... 95
CUTUBKA IX ..... 96
HABRAACA CANSHUUR BIXINTA ..... 96
QAYBTA I ..... 96
WAAJIBAADKA GUUD ..... 96
Qodobka 89-aad ..... 96
Hababka Iyo Waqtiga Bixinta ..... 96
QAYBTA II ..... 96
CANSHUURTA LAGU BIXINAYO HABKA CANSHUUR KAREEBIDDA ..... 96
Qodobka 90-aad ..... 97
Canshuurta Loo Shaqeeyuhu Kareebayo Shaqaalaha ..... 97
Qodobka 91-aad ..... 97
Canshuur Ka-jarista Lacagaha Laga-helo Maalgashiga ..... 97
Qodobka 92-aad ..... 98
Canshuur Ka-jarista Khidmadaha Adeegga ..... 98
Qodobka 93-aad ..... 99
Warbixinnada iyo Bixinta Canshuurta La-jaray, ama Loola Dhaqmay in La- jaray ..... 99
Qodobka 94-aad ..... 101
Shahaadooyinka Canshuur Ka-jarista ..... 101
Qodobka 95-aad ..... 102
Canshuurta Lacag-bixinta Kama Dambaysta ah Laga Jaro ..... 102
Qodobka 96-aad ..... 104
Tixgelinta Canshuureed ee Lacag-bixinta Laga-jaray Canshuur Aan Ku Waajibin ..... 104
QAYBTA III ..... 104
CANSHUURTA LOO BIXIYO QAYB QAYBTA ..... 104
Qodobka 97-aad ..... 104
Canshuur Ku Bixinta Qayb-qayb Rubucla Ah ..... 104



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Qodobka 98-aad ........ 105
Warbixinta Qiyaasta Canshuurta La Bixinayo ........ 105
Qodobka 99-aad ........ 106
Marka Aan La Rabin Warbixinta Qiyaasta ee Canshuurta La Bixinayo ........ 106
Qodobka 100-aad ........ 107
Hal Mar Shubista Canshuurta Waqtiga Wareejinta Ama Lacag Helidda ........ 107
QAYBTA IV ........ 109
CANSHUURTA LAGU BIXINAYO QIIMAYNTA ........ 109
Qodobka 101-aad ........ 109
Warbixinta Xisaab-canshuureedka Dakhliga ........ 109
Qodobka 102-aad ........ 111
Shakhsiyaadka Aan Laga Rabin Soo Gudbinta Warbixinta Xisaab Canshuureedka Dakhliga ........ 111
Qodobka 103-aad ........ 111
Qiimaynta iyo Canshuur Bixinta ........ 111
CUTUBKA X ........ 111
BURINTA, KALA GUURKA IYO DHAQAN GALKA SHARCIGAN ........ 111
Qodobka 104-aad ........ 112
Iswaafajinta Wax Ka- Bedellada ........ 112
Qodobka 105-aad ........ 112
Xilliga Kalaguurka ........ 112
Qodobka 106-aad ........ 113
Dhaqan Galka Sharciga ........ 113
JADWALLADA ........ 114
JADWALKA KOWAAD: BOQOLLEYDA CANSHUURTA (TAX RATES) ........ 114
(Qodobka 9) ........ 114
Qodobka 1-aad ........ 114
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shakhsiyaadka Dabiiciga (Rates of Income Tax for Individuals) ........ 114
Qodobka 2-aad ........ 115
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Ammaanooyinka (Rate of Income Tax for Trusts) ........ 115
Qodobka 3-aad ........ 116
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shirkadaha (Rate of Income Tax for Corporations) ........ 116
Qodobka 4-aad ........ 116
Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Xarun Ganacsi oo Joogto ah ee Soomaaliyeed (Rates of Income Tax for Somali Permanent Establishments) ........ 116



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

Qodobka 5-aad ..... 116
Boqolleeyda Canshuurta Isha Lacag-bixinta Lagu-jaro (Rates of Withholding Tax) ..... 116
JADWALKA LABAAD: CANSHUURAHA LA-FUDUDEEYEY (SIMPLIFIED TAXATION) ..... 118
(Faqradda 4-aad ee Qodobka 9-aad) ..... 118
Qodobka 1-aad ..... 118
Mabaadi'da Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay ..... 118
Qodobka 2-aad ..... 118
Xeer-nidaamiyaha Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay ..... 118
JADWALKA SADDEXAAD: DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY (EXEMPT AMOUNTS) ..... 119
(Qodobka 15) ..... 119
JADWALKA AFARAAD: HANTIDA QIIMO-DHACDA (DEPRECIABLE ASSETS) ..... 119
(Qodobka 20 ..... 119
Qodobka 1-aad) ..... 119
Ujeedooyinka Jadwalkan ..... 119
Qodobka 2-aad ..... 120
Xeer-nidaamiyaha Ku-aadan Sida Loola-dhaqmaayo Hantida Qiimo Dhacda ..... 120
JADWALKA SHANAAD: QIIMAYNTA DHEEFAHA (QUANTIFICATION OF BENEFITS) ..... 120
(Qodobka 32) ..... 120
Qodobka 1-aad ..... 120
Ujeedooyinka Jadwalkan ..... 120
Qodobka 2-aad ..... 120
Xeer-nidaamiyaha La-xiriira Sida Loo Qiimeeyo Dheefaha ..... 120
JADWALKA LIXAAD: ISWAAFAJINTA WAX KA- BEDELLADA (CONFORMING AMENDMENTS) ..... 121
(QODOBKA 104) ..... 121
Qaybta I ..... 121
Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966) ..... 121
Qaybta II ..... 121
Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27-ka Oktoobar 2019) ..... 121
Farqadda 1(a) ee Jadwalka Labaad waxaa loo beddelay sidaan soo socota: ..... 122
Qaybta III ..... 123
Is-waafajinta Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023) iyo Sharciga Canshuuraha Dakhliga ..... 123
Qaybta IV ..... 123
Sharciyada Kale ..... 123

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## CUTUBKA 1-AAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1-aad
### Magaca iyo Baaxadda Sharcigan

1) Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Canshuurta Dakhliga".

2) Sharcigan waxa uu soo rogayaa canshuurta dakhliga, waxa uuna go'aaminayaa qaddarta canshuurta dakhliga ee laga rabo shakhsiyaadka la qeexay, iyo sidoo kale wakhtiga iyo habraaca loo bixinayo canshuurta dakhliga.

3) Haddii Sharcigan gudihiisa aan si kale oo cad loogu sheegin:

   (b) Sharcigan ayaa ah midka dejinayaa dhammaan xeerarka ku saabsan canshuurta dakhliga.

   (t) Sharci aan ahayn Sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga ee markaas dhaqan-galka ah, haa ahaado sharci hadda dhaqan-gal ah ama mid mustaqbalka la dejin doono, looma isticmaali karo si loo go'aamiyo qaanta canshuureed ee ku waajibtay shakhsi si waafaqsan Sharcigan, marka laga reebo haddii sharciga kale uu si cad wax uga beddelayo Sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah.

   (j) Marka la fulinayo Sharcigan, Wasaaraddu waa inay si cad u dabaqdaa Qodobka 74-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, ama wax-ka-bedelkiisa.

4) Habraaca Sharcigaan loo dhaqangelinayo, oo ay ku jirto xiriirka ka dhexeeya canshuur-bixiyayaasha iyo Wasaaradda waxaa hagaaya Sharciga Maamulka Dakhliga ee markaas dhaqan-galka ah iyo Sharcigan.

5) Macaamilaad kasta oo sharcigan ku dhex xusan oo canshuur ku waajibto waa in ay waafaqsan tahay Shareecada Islaamka.

### Qodobka 2-aad
### Qeexitaanno

Sharcigan dhexdiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

1) " **Amaano *(Trust)*** " waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 13-aad.

2) **"Amaano-haye *(Trustee)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3- aad.

3) **"Badeeco Ganacsi *(Trading stock)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

4) **"Lacag-bixinnada Ugu-dambeyntii Cashuurta Laga-jarayo *(Final withholding payment)*"** waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 95-aad.

5) **"Canshuur Laga-jare *(Withholdee)*"** waxa loola jeedaa shakhsiga helaaya ama ay tahay inuu helo lacag-bixin ay waajib kutahay in canshuur laga jaro si waafaqsan Qaybta II ee Cutubka IX.

6) **"Caymiska Muddada-dheer *(Long term insurance)*"** waxa uu yeelanayaa macnaha lagu sheegay xeer-nidaamiye, ama macnaha ay go'aamisay hay'adda awoodda u leh ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, haddii uusan jirin xeer-nidaamiye.

7) **"Dalka Degaan Ku-ah *(resident)*"** marka ay timaado shakhsiyaadka, waxaa loola jeeda shakhsi la go'aamiyey inuu deganyahay Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 77- aad.

8) **"Faa'iidada Saamiyada *(Dividend)*"** marka ay timaado shirkadaha, waxaa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

9) **"Faa'iidada Laga-helo Qaamaha *(Return on debt claim)*"** marka ay timaado lacag bixinnada, waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

10) **"Hanti Maaliyadeed *(Financial instrument)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

11) **"Ganacsi *(Business)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 5-aad.

12) **"Hanti *(Asset)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

13) **Hanti Maxalli ah *(Domestic asset)*"** waxaa loola jeeda:

(b) hanti uu leeyahay shakhsi Dalka degaan ku ah (taas oo aan ahayn hanti ma guurta ah oo dibadda ku taala ama hanti ay leedahay Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Dibadeed ee shakhsigu leeyahay) ama loo nisbeeyay inay leedahay Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed si waafaqsan Qodobka 82(2);

(t) xuquuqda lahaanshiyaha hanti ma guurto ah oo kutaalla gudaha Soomaaliya; iyo

(j) xuquuqda lahaanshiyaha saamiga hay'ad Dalka degaan ku ah, taasoo milkiilaha xuquuqdaas oo ay weheliyaan shakhsiyaad isaga kudhaw, ay si toos ah ama si dadban, u leeyihiin/u maamulan ama ay u lahaayeen/u maamulayeen saddexdii sano ee la soo dhaafay, boqolkiiba 25 ama ka badan ee saamiga ama awoodda codeynta ee hay'adaas.

14) **"Hanti Maalgashi *(Investment asset)*"** iyo **"Hanti Maalgashi ee Canshuur-gal ah *(Chargeable investment asset*)"** waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

15) **"Hanti Raasumaal *(Capital asset)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

16) **"Hanti Qiima-dhacda *(Depreciable asset)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

17) **"Hanti ma guurto ah *(immovable property)*"**:

(b) waxa ay leedahay macnaha uu siiyay Xeerka Madaniga ee Soomaaliya ee markaas dhaqan-galka ah;

(t) waxana ka mid ah:

i. xuquuqda macdan qodista ama xuquuq kale ee loo baxshay si waafaqsan Xeerka Macdanta ee 1984 ama wax-ka-beddelkiisa ama heshiiska wadaagga wax-soo-saarka batroolka oo ay soo saartay ama gashay Dawladda Soomaaliya; iyo

ii. xuquuqda lahaanshiyaha saamiga hay'ad taasoo hantideeda badankeed ay ka koobantahay hanti kutaala Soomaaliya, ha ahaato hanti ay si toos ah u leedahay ama hanti ay si dadban iyada ugu maamulaan hay'addo kale oo iyada wakiil ka ah, oo nuuceedu yahay midda lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b) ama xuquuqaha lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b)(i).

18) **"Gacan Ku-hayn *(Hold)*"** marka ay timaado hanti, macnaheedu waa lahaanshiyaha hantida.

19) **"Hay'ad *(Entity)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

20) **"Il *(Source)*"** lacag ama dakhli kasoo xaroodo waxaa loo go'aaminayaa si waafaqsan Qodobka 79-aad.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

21) **"Ka-faa'iideyste *(Beneficiary)*"** marka ay timaado ammaano, waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

22) **"Kharash *(Expense)*"** waxa loola jeedaa lacag bixin yareyneysa hantida saafiga ah ee shakhsiga lacagta bixinaya.

23) **"Kharash Aan La-tixgelinayn *(Excluded expense)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 8-aad.

24) **"Kharash-gelid *(Incurred)*"** marka ay timaado kharash ama qadar lacageed, waxa la siinayaa macne waafaqsan Qodobbada 26-aad, 27-aad iyo 28-aad.

25) **"Kharashka Gaarka u ah Shakhsiga *(Private expense)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 8-aad.

26) "**Khayraad Dabiici ah *(Natural resource)***" waxaa loola jeedaa macdanta, batroolka, biyaha ama kheyraadka kale ee aan nooleyn ama nool ee laga helo berriga ama badda.

27) "**Khidmada Adeegga Dhijitaalka ah ee Otomaatigga ah *(Automated digital service fee)***" waxaa loola jeedaa lacagta lagu kharash-gareeyo adeeg kasta oo la iibiyo iyadoo la isticmaalaayo intarneetka ama shabakad elektarooniga ah, iyadoo adeeg bixintaasna ay u baahantahay waxqabad aadane ee kooban. Khidmadaan kamid maahan midda lagu bixiyo adeegyada farsamo.

28) " **Khidmadda Adeeg *(Service fee)***":

(b) waxaa loola jeedaa lacag bixin, si xilliyeeysan ama halmar ah loo bixiyay, ilaa xadna, marka lagu saleeyo qiimaha suuqa, ay macquul tahay in loo nisbayn karo adeegga ama hawl kale ee uu bixiyay ganacsi shakhsi leeyahay;

(t) waxaa ku jira Khidmadda Adeegga Farsamo iyo Khidmada Adeegga Dhijitaalka ah ee Otomaatigga ah; laakiin

(j) kuma jiraan Mushaarka Shaqaalaha (employment income), Khidmadaha Kheyraadka Dabiiciga ah, Kirada, Faa'iidada Laga-helo Qaamaha, Khidmadda Milkiyadda (royalty) ama lacagaha laga helo wareejinta hanti ama galidda qaan.

29) **"Khidmadda Kheyraadka Dabiiciga ah *(Natural resource payment)*"**: waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

30) **"Khidmadda Adeeg Farsamo *(Technical service fee)*"** waxa loola jeedaa Khidmadda Adeeg ee lagu bixiyay:

(b) adeeg kasta oo maamul, farsamo ama la-talin, oo ay ku jiraan adeegyada ay bixiyaan farsamo-yaqaannada ama shakhsiyaadka kale;

(t) helista aqoon, khibrad ama xirfad nuuceedu yahay mid farsamo, warshadeed, ganacsi ama saynis; ama

(j) helista kaalmo taageero u ah arimaha lagu sheegay qeexida Khidmadda Milkiyadda (royalty)" ee Qodobka 6(5)(t).

31) **"Kiro *(rent)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

32) **"Ijaar *(lease)*"** marka ay timaado hanti, waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

33) "**Faa'iido Lacageed *(gain)***" ee laga helo iibinta hanti ama qaan waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 39-aad.

34) **"Ku-tiirsane *(dependant)*"** Shakhsi waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 4-aad.

35) **"Lacag-bixin *(payment)*"** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo qiimo ama dheef ah ee shakhsi siiyo shakhsi kale waxaana ka mid ah:

(b) wareejinta hanti ama lacag ee shakhsi ku wareejiyo shakhsi kale ama wareejinta uu shakhsi qaan (liability) ku wareejiyo shakhsi kale;

(t) u abuurista shakhsi kale hanti ama hoos u dhigidda qaan shakhsi kale lagu leeyahay;

(j) adeeg bixinta shakhsi siiyo shakhsi kale; iyo

(x) u gacan gelinta shakhsi kale inuu isticmaalo hanti ama lacag uu shakhsi leeyahay ama uu haysto ama u ogolaanshaha in hantidaas ama lacagtaas uu isticmaalo shakhsi kale.

36) **"Dheefta Hanti *(proceeds)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 42-aad.

37) **"Lacag-bixin Hawlgab *(retirement payment)*"** waxaa loola jeedaa lacag bixin, oo ay kujirto lacag si duuduub ah halmar loo baxshay, liiltir ah ama liiltir si duuduub ah halmar loo baxshay, taaso la siiyo:

(b) qof marka uu hawlgab noqdo; ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

(t) xigtada qof haddii uu qofku geeriyoodo, balse aysan kujirin Dheefta Caymiska ee laga helo caymiska muddada dheer.

38) **"Milkiyad *(ownership)*"** marka ay timaado hanti waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

39) "**Milkiyadda Dhabta ah *(underlying ownership)***":

(b) marka ay timaado hay'ad, waxa loola jeedaa milkiyada saamiga ee hay'adda:

i) ha ahaato mid si toos ah loo leeyahay ama mid si dadban loo leeyahay iyadoo loo maraayo hay'addo kale oo si wakiil ah saamigaas gacanta ugu haaya; iyo

ii) iyadoo walibana la dabagelaayo dhammaan hay'adaha sida wakiilka ah saamiga gacanta ugu haaya ilaa laga ogaanaayo in dhammaan saamiyada hay'adda ay si toos ah ama si dadban u leeyihiin shakhsiyaad ama hay'ado kale oo aan shakhsina ku lahayn saami.

(t) marka ay tahay hanti ay leedahay hay'ad, waxaa loo aqoonsanayaa in hantidaas ay leeyihiin shakhsiyaadka leh milkiyada dhabta ah ee hay'ada, iyadoo lagu saleynayo sida ay saami ahaan u kala leeyihiin hay'ada.

40) **"Loo shaqeeye *(employer)*"**:

(b) waxa loola jeedaa shakhsiga shaqaaleysiiya ama mushaar siiya shaqaale u shaqeeya;

(t) waxaa ku jira, haddii aan la heyn caddayn shaqaaleysiin oo kale, shakhsiga bixiyay ama laga bixiyay lacagta shaqada lagu qabtay.

41) **"Maalgashi *(investment)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 5- aad.

42) "Wasaarad" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka.

43) **"Maamule *(manager)*"** marka ay timaado hay'ad, waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

44) "**Dakhliga Canshuur-galka ah *(chargeable income)***" waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 10-aad.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

45) "**Dakhliga Qiimayngalka ah *(assessable income)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 11-aad.

46) "**Dalka Degaan Ku-aheyn *(non-resident)***" waxaa loola jeedaa shakhsi aan Soomaaliya degaan ku aheyn.

47) "**Khidmadda Milkiyadda *(royalty)***" waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

48) "**Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay *(GAAP)***" waxaa loola jeedaa Halbeegyada Warbixin Maaliyadeed ee Caalamiga ah (IFRS) iyo kuwa hay'adda Soomaaliyeed ee awoodda uleh ay kusoo saartay Xeer-nidaamiye.

49) "**Dheefta Caymiska *(insurance proceeds)***" waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 68-aad.

50) **"Qaab-dhismeed *(arrangement)*"** waxaa loola jeedaa hawl-qabad, heshiis, hab dhaqan, macaamil, hannaan, ballan, isfaham ama waajibaad, kaas:

(b) oo noqon kara mid si cad ama sid maldahan laiskula fahmay;

(t) oo noqon kara mid hal dhinac ah ama ay ku middaysanyihiin in kabadan hal Shakhsi;

(j) oo aan ku qasbanayn in lagu dhaqan-geliyo awood sharci; iyo

(x) oo ka kooban qaybo gaar ah oo iskood loo aqoonsan karo.

51) "**Qaan *(debt claim)***" iyo "**Qaan Bixin *(debt obligation)***" waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay faqradda 7-aad.

52) "**Qaan Maxalli ah *(domestic liability)***" waxaa loola jeeda qaan lagu leeyahay Shakhsi Dalka Degaan Ku-ah, oo aysan kujirin qaan loo nisbeyn karo Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Dibadeed ee Shakhsigu leeyahay ama loo nisbeeyay Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed ee loo aas-aasay si waafaqsan Qodobka 82(2).

53) "**Qaaraanka Hawlgabka *(retirement contribution)***" waxaa loola jeedaa lacag lagu shubo Sanduuqa Hawlgabka iyadoo ujeeddada lag leeyahay ay tahay in laga helo xilligaas ama mustaqbalka Lacag-bixin Hawlgab.

54) **"La-helay *(derived)*"** marka ay timaado dakhli ama qaddar lacageed, waxaa loo fasiraya si waafaqsan Qodobbada 26-aad, 27-aad iyo 28-aad.

55) "**Qadar La-dhaafay *(exempt amount)***" waxa uu leeyahay macnaha lagu

sheegay Qodobka 15-aad.

56) **"Qadar** ***(amount)*"** waxaa loola jeeda qadar lacageed oo cayiman, waxaana kamid ah lacag-bixin

57) "**Qiimaha Saafiga ah** ***(net cost)***" ee hanti leedahay waqti gaar ah waxay la mid tahay:

(b) marka ay timaado Hanti Qiima-dhacda, qaybta ay ka-tahay ama kaga soo aadaysa qiimaha qoran ee hantida ay ka tirsan tahay wakhtigaas (eeg xeer-nidaamiyaha loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Afraad), iyadoo lagu salaynaayo qiimaha suuqa ee dhamaan hantida ay ka tirsan tahay wakhtigaas; halka

(t) marka laga hadlaayo hantida nuucyadeeda kale, farqiga u dhexeeya wadarta kharash ee ku baxday iyo wadarta dakhli ee kasoo xarooday hantidaas ilaa iyo intii ay jirtay.

58) "**Qiimaha Suuqa** ***(market value)***" ee lacag bixin, hanti ama qaan waxaa loo go'aaminayaa si waafaqsan Qodobka 32-aad.

59) "**Xidid** ***(associate)***" iyo "**Shakhsiyaad Xidid ah** ***(associated persons)***" waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 4-aad.

60) "**Dakhliga Dibadda Loo Diray** ***(repatriated income)***" ee Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed waxa uu leeyahay macanaha lagu sheegay Qodobka 84- aad.

61) "**Saamile** ***(shareholder)***" marka ay timaado Shirkad, waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

62) "**Sanad Canshuureed** ***(year of assessment)***" waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 25-aad.

63) "**Sanduuq Hawlgab ee La-aqoonsan Yahay** ***(recognised retirement fund)***" waxaa loola jeedaa Sanduuq Hawlgab ee loo aqoonsaday si waafaqsan Qodobka 69- aad.

64) "**Sanduuq Hawlgab** ***(retirement fund)***":

(b) waxa uu yeelanayaa macnaha lagu qeexay sharci ama xeer-nidaamiye; balse

(t) haddii uusan jirin sharci ama xeer-nidaamiye qeexaya, waxaa loola jeeda nidaam loo abuuray uruurinta iyo maalgelinta Qaranka Hawlgabka, si hadhoow looga siiyo Lacagaha Hawlgabka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

shakhsiyaadka xaqqa uleh Lacagaha Hawlgabka ama xigtadooda.

65) **"Shakhsi *(person)*"** waxa uu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

66) **"Shaqaale *(employee)*"** waxaa loola jeedaa Shakhsi qabanaya shaqo.

67) **"Shaqo *(employment)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 5-aad.

68) **"Shirkad *(corporation)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

69) **"Shuraako *(partnership)*"** iyo **"Shirkadle *(partner)*"** waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

70) **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Federaalka.

71) **"Canshuur-jare *(withholding agent)*"** waxaa loola jeedaa Shakhsiga ay saarantahay waajibaadka canshuur kajarista lacag-bixinnada si waafaqsan Qaybta II ee Cutubka IX.

72) **"Ka-kaaftoomid *(disposal)*"** marka ay timaado hanti ama qaan, waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobbada 43-aad iyo 44-aad.

73) **"Xarun Ganacsi oo Joogta ah *(permanent establishment)*"** waxaa loola jeedaa Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed ama Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Dibadeed.

74) **"Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed *(Somali permanent establishment)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 80-aad.

75) **"Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Dibadeed *(foreign permanent establishment)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 80-aad.

76) **"Xeerka Madaniga ah (Civil Code)"** waxaa loola jeeda Xeerka Madaniga ah ee Soomaaliyeed (Xeer No. 37 ee Juun 1973) iyo wax-ka-beddelkasta oo lagu sameeyo.

77) **"Xigto *(relative)*"** waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 4-aad.

78) **"Xubin *(member)*"** marka ay timaado hay'ad, waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 3-aad.

79) **"Saamiga Shakhsi *(membership interest)*"** marka ay timaado hay'ad,

waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

80) "**Sharciga Maamulka Dakhliga**" waxaa loola jeedaa Sharci Lr. 13, ee la soo saaray 27 Oktoobar 2019, iyo Wax-ka-beddelkasta ee lagu sameeyay.

81) **"Xeer-nidaamiye"**: waxaa loola jeeda xeer-nidaamiye lagu dhaqan-gelinaayo Qodobbada Sharcigan kaas oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga.

82) "**Erayada Aan La-qeexin**": Iyada oo la raacayo Qodobbada 3-aad, 4-aad iyo 15- aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, ama wax-ka-bedelkiisa, Sharcigan waxaa loo maamulayaa, islamarkaasna lala akhrinayaa Sharciga Maamulka Dakhliga. Erayada aan si toos ah loogu qeexin Sharcigan waxa ay leeyihiin macno la mid ah kuwa lagu qeexay Sharciga Maamulka Dakhliga.

## Qodobka 3-aad
## Shakhsiyaadka, Hay'adaha iyo Xubnahooda iyo Maareeya-yaashooda

1) "Shakhsi" waxaa loola jeedaa shakhsi dabiici ah ama hay'ad. Waxaa ku jira qof geeriyooday iyo hay'ad aan markaas jirin.

2) "Hay'ad" waa qaab-dhismeed loo aqoonsaday inay leedahay jiritaan ka madax- banaan Shakhsiyaadka xubnaha ka ah, si looga sal-gaaro dhammaan ama qaybo kamid ah ujeedooyinka Sharcigan. Qaybaha kala duwan ee Hay'ad waxaa kamid ah:

(b) "Shuraako" oo loola jeedo isutaga labo ama ka badan oo Shakhsiyaad ah kuwaasoo si wada jir ah u ganacsanaaya si ay faa'iido u helaan, iyada oo aan loo eegayn in isutagu ku dhisanyahay heshiis qoraal ah;

(t) "Amaano":

i. oo loola jeedo Qaab-dhismeed, kaasoo Amaano-haye uu gacanta ku haayo hanti;

ii. oo uu kamid yahay Sanduuq Hawlgab; balse

iii. ka baxsan Shuraako iyo Qaab-dhismeed kasta oo leh shakhsiyad khaanuuneed si waafaqsan Xeerka Madaniga ah; iyo

(j) "Shirkad":

i. waxaa loola jeedo:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(B) Qaab-dhismeed abuuraya Shakhsiyad khaanuuni ah oo madax banaan ee aqoonsanyahay Xeerka Madaniga ah; iyo

(T) isutag ama koox kale oo loo aqoonsan karo inay ka madax- banaanyihiin Shakhsiyaadka abuuray ama ku lugta leh, iyada oo aan loo eegayn in isutaggu ama kooxdu leedahay shakhsiyad khaanuuni oo madax-banaan;

ii. waxaa ka mid ah:

(B) iskaashato asxaabeed, iskaashato dhismo, sanduuq howlgab
(provident fund), iskaashato bulsho, ama sanduuq ama-iskaashatooyinka la midka ah;

(T) Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad Goboleedyada, oo ay ku jiraan wasaaradaha, hay'adaha ama wakaaladaha ka tirsan Dawladahaas;

(J) dawladaha hoose, golayaasha deegaanka ama hay'adaha la midka ah ee Soomaaliyeed;

(X) dawladaha shisheeye, maamulada iyo dawladaha hoose ee dawladaha shisheeye ama hay'adaha caalamiga ah ee ka hawlgasha arrimaha guud (public international organizations); iyo

(KH) isutag ama koox kasta ee shisheeye oo ay Wasaaraddu u aqoonsato in uu yahay Shirkad; laakiin

iii. waxaa ka baxsan Shuraako ama Amaano, inkastoo Wasaaraddu ay Xeer-nidaamiye ku go'aamin karto in qayb kamid ah Shuraakooyinka iyo Amaanooyinka loo aqoonsan karo inay yihiin Shirkado, si looga sal gaaro ujeedooyinka Sharcigan.

3) Si looga sal gaaro ujeedooyinka Sharcigan, qaar kamid ah Shakhsiyaadka ku lugta leh Hay'ad waxaa loo aqoonsanayaa Xubno, halka qaarka kalena loo aqoonsanayo Maamulayaal (inkastoo hal Shakhsi uu isku noqon karo labadaba). Si loo caddeeyo, qeexitaannada soo socda ayaa la dabaqayaa:

(b) "Xubin" Hay'addeed waxa loola jeedaa Shakhsiga kuleh Hay'ad Xuquuq Xubinnimo, gaar ahaan:

i. "Shirkadle (partner)" waa Xubin ka mid ah Shuraako;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ii. "Ka-faa'iideyste" waa Xubin ka mid ah Amaano; iyo

iii. "Saamile" waa Xubin ka mid ah Shirkad, waxaana erey bixintan la dabaqaaya iyada oo aan loo eegayn in Xuquuqda Xubinnimada ee Shakhsigu leeyahay ay tahay saami, si waafaqsan Xeerka Madaniga iyo shuruucda kale ee hagaysa arrimahan.

(t) "Maamule" Hay'ad waxaa loola jeedaa Shakhsiga mas'uulka ka ah Hay'adda ama Shakhsiga ka qaybqaata ama ka qaybqaadan kara (ha ahaado kaligii ama isagoo la wadaagaya Shakhsiyaad kale) qaadashada go'aamada maamul ee waaweyn isaga oo matalaya Hay'adda, waxaana ka mid ah:

i. agaasime, maamule sare ama sarkaal idman;

ii. Shirkadle kamid ah Shuraako iyo Amaano-haye katirsan Amaano;

iii. milkiilaha Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed; iyo

iv. shakhsi ay tilmaamihiisa iyo amaradiisa ay qaadato Hay'ad ama shakhsi kamid ah kuwa lagu sheegay qeexitaanka kore.

(j) "Amaano-haye" waxaa loola jeedaa Shakhsi ama Hay'ad leh shakhsiyad khaanuuni ah oo madax-banaan si waafaqsan Xeerka Madaniga iyo shuruucda kale ee hagta arrimahan, kaasoo hanti amaano ah u haaya (si keli ah ama si wadajir ula haaya hantidaas Shakhsiyaad ama Hay'ado kale) Ka- faa'ideystayaal cayiman ama ujeedo sharciga Dalku oggolyahay, waxaana ka mid ah:

i. Shakhsi loo magacaabay ama Amaano-haye kale oo ka dhashay go'aan shakhsiyadeed, dardaaran, go'aan maxkamadeed, ama saamayn sharci (operation of law);

ii. dardaaran fuliye, maamule maxkamadi magacawday, dhaxaltooyada hanti uu qofkeedi dhintay, ama qof loo magacaabay inuu daryeelo arrimaha ilmo aan qaan-gaarin ama qof aan awoodin inuu arrimihiisa maareeyo;

iii. xaraashe (liquidator), maamule la magacaabay (receiver), korjoogteeye xaraash (trustee in bankruptcy) ama maareeye maxakamadi magacawday (judicial manager);

iv. Shakhsiga maamula hanti lagu intifaacayo, hanti dhaxal sugaysa (fideicommissum) ama hanti shakhsi kale kuleeyahay xuquuq

kooban.

v. Shakhsiga maamula hantida dadka aan awoodda lahayn (incapacitated), oo ay ku jiraan caruurta (minor); iyo

vi. Shakhsiga maamula hanti uu leedahay urur shisheeya ama Qaab- dhismeed la mid ah.

## Qodobka 4-aad
## Shakhsiyaad Xidid ah

1) Laba Shakhsi waxaa loo tixgelinayaa inay yihiin Shakhsiyaad Xidid ah, haddii xiriirka ka dhexeeya labada Shakhsi uu yahay:

(b) midka ka dhaxeeya Shakhsi iyo Xigtadiisa ama Shakhsi iyo Ku- tiirsanihiisa;

(t) mid ka dhaxeeya Shirkadlayaasha kawada tirsan hal Shuraako;

(j) mid ka dhaxeeya Hay'ad iyo Shakhsi (oo ay ku jirto Hay'ad kale) ee lagu qeexay faqradda 2-aad ee Qodobkan; ama

(x) Xiriir kasta oo kale oo aan ahayn xiriir shaqaale, kaasoo Shakhsi laga filaayo inuu u hoggaansamo tilmaamaha ama ammarada:

i. Shakhsiga kale; ama

ii. Shakhsi xidid la ah Shakhsiga kale.

2) Shakhsi iyo Hay'ad waxaa loo tixgelinayaa inay yihiin Shakhsiyaad Xidid ah, haddii:

(b) Shakhsigu maamulo Hay'adda ama uu isticmaali karo boqolkiiba kontan (50%) ama in ka badan ee xuquuqda dakhli, ra'sumaal ama awoodda codbixineed ee Hay'adda:

i. isaga keligiisa ama isagoo kaashanaya Shakhsiyaad kale, kuwaasoo si waafaqsan Qodobkaan loo tixgelinayaa inay yihiin Shakhsiyaad Xidid ah la ah;

ii. si toos ah ama si dadban isagoo u maraaya Hay'addo kale oo wakiil ka ah; ama

(t) Shakhsigu, si waafaqsan Qodobkaan, uu Xidid layahay Shakhsi lagu xusay faqrad-hoosaadka (b) ee Qodobkan.

3) Laba Shakhsi looma tixgelinaayo inay yihiin Shakhsiyaad Xidid ah si waafaqsan faqradda 1(b) iyo 1(t) ee Qodobkan, haddii Wasaaraddu ku qancdo in aysan maangal ahayn in laga fisho in midkoodna u hoggaansamayo awaamiirta iyo tilmaamaha midka kale.

4) Laba Shakhsi waa "Xigto" haddii:

(b) midkood uu kan kale u yahay xaas, ama say, waalid, awoowe ama ayeeyo, walaal, eedo ama habar-yar, abti ama adeer, ama ina adeer, ina abti, ina eedo, ama ina habar-yar darajada kowaad ah, oo ay kujiraan kuwa ku imaan kara guur, ama nuujin, ama laba xaas oo la isla qabo; ama

(t) midkood ka gacansiiyo midka kale baahiyaha nolosha ee daruuriga ah.

5) "Ku-tiirsane" Shakhsi marka ay timaado Sanad Canshuureed waxaa loola jeeda xaaska, sayga, ubadka ama waalidka Shakhsigaas kaaso Dakhligiisa Canshuur-galka ah ee sanadkaas uu ka hooseeyo qadarka lagu cayimay Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 5-aad
## Hawlaha Dakhliga Laga Helo

1) Howlaha dakhliga laga helo waa hawlaha soo saara dakhli ay ku waajibtay canshuur si waafaqsan Sharcigan. Hawlaha dakhliga laga helo waxaa loo kala saaray sidan:

(b) "Shaqo" oo loo macnaynaayo si waafaqsan Xeerka Madaniga iyo shuruucda kale ee hagta arrimahan, waxaa kamid ah:

i. jagada Maamule ee uu Shakhsi ka hayo Hay'ad oo aysan kujirin jagada Shirkadle katirsan Shuraako;

ii. madax kanoqoshada xafiis;

iii. jagooyinka kale oo lagu qeexay xeer-nidaamiyeyaal ee ku aadan bixinta adeeg, kuwaasoo Shakhsigu, inkasta oo uusan kujirin heshiis shaqo oo rasmi ah, haddana uu u hoggaansamo tilmaamaha iyo awaamiirta Shakhsi kale ee ku aadan sida uu u fulinaayo hawlaha shaqadiisa; iyo

iv. Shaqo hore, mid markaa la haayo ama mid mustaqbalka imaan karta.

(t) "Ganacsi" waxa loola jeedaa hawlo warshadeed ama ganacsi oo:

i. ay ka mid yihin:

(B) meherad, xirfad, ganacsi, farsamo ama hawlo kale oo goos goos ah oo leh sifo ganacsi;

(T) bixinta adeegyo faa'iido doon ah, ha ahaadan kuwo goos goos ah ama joogta ah; iyo

(J) Ganacsi hore, mid hada socda ama mid mustaqbalka imaan kara; laakiin.

ii. aan ahayn Shaqo.

(j) "Maalgashi" oo macnehiisu yahay lahaanshaha hal ama in ka badan oo ah hanti kala duwan oo halmeel laga maamulo oo ujeedadeedu tahay in laga helo faa'ido iyo dakhli, waxaana:

i. ka mid ah Maalgashi hore, mid hada socda ama mid mustaqbalka imaan kara; laakiin

ii. ka baxsan Ganacsi ama Shaqo.

2) Shakhsiyaadka dabiciiga ah oo kaliya ayaa qaban kara shaqooyinka (employment). Shakhsiyaadka dabiciiga ah waxay qaban karaan Shaqooyin ka badan hal, ha ahaadan kuwo kala danbeeya ama kuwo iskumar la qabto.

3) Marka laga reebo xilliga Sharcigani uu waajibinayo in la kala saaro, dhammaan hawlaha ganacsi ee Shakhsi uu leeyahay waxa loo tixgelinayaa hal ganacsi. Waxaa intaasi dheer, dhammaan hawlaha Shuraako ama Shirkad (balse aan ahayn kuwa shakhsi dabiici ah ama amaano) waxaa loo tixgelinayaa hawlo ganacsi. Tani waxa uu macnaheedu yahay in dhammaan dakhliga Shuraako ama Shirkad loo tixgelinaayo dakhli ka yimid ganacsi.

4) Marka laga reebo xilliga Sharcigani uu waajibinayo in la kala saaro, dhammaan Maalgashiga shakhsi dabiici ah ama Amaano waxaa loo tixgelinayaa sidii hal maalgashi.

## Qodobka 6-aad
## Hanti, Milkiyad iyo Lacag-bixinnada Isticmaalka Hanti

1) "Hanti" waxaa ka mid ah hanti la taaban karo ama mid aan la taaban karin, lacag, sumcadwanaag (goodwill), aqoon xirfadeed oo gaar ah (know-how), Khidmadda Milkiyadda, xaquuqda milkiyadda dakhli markaa la helaayo ama mid mustaqbalka la helaayo, faa'iido (benefit) soconeysa in ka badan laba iyo

toban (12) bilood iyo qaybt hantid kamid ah.

2) Shakhsi waxa uu Hanti ku heli karaa inuu yeesho Milkiyadda Hantida ama inuu Kiraysto. Milkiyad iyo Kiro ayaa loo kala qeexay sida soo socota:

(b) "Milkiyad":

i. waxaa loola jeedaa xaqqa in aad si gaar ah oo joogta ah aad u haysato, walibana aad u isticmaasho Hanti inta ay waxtar leedahay; iyadoo

ii. xuquuqda Milkiyadda ay saamayn karto xuquuqda Shakhsi kale ee ka abuurantay Kiraynta Hantida.

(t) "Ijaar":

i. waxaa loola jeedaa qaab-dhismeed siinaya shakhsi xaq ku meel gaar ah ee isticmaalka hanti uu shakhsi kale leeyahay; iyadoo

ii. ay ka mid tahay xaqa isticmaalidda dhul shakhsi kale (easement), oggolaanshaha isticmaalidda hantida shakhsi kale (license), heshiiska ka-faa'ideysiga kheyraadka dhulka ee shakhsi kale (profit-a-prendre), heshiis ikhtiyaari ah ee iibsashada ama kiraysashada Hantid Shakhsi kale (option), heshiis kiro, heshiiska isticmaalidda xuquuqda milkiyadda (royalty agreement), iyo heshiis loo galay in lagu taageero Qaab-dhismeedka lagu xusay faqrad-hoosaadka (t) (i) .

3) Hantida uu isticmaalo Shakhsi ku jira Ganacsi waxa loo kala saaraa sidan:

(b) "Badeeco Ganacsi" taas oo loola jeedo:

i. Hanti uu Shakhsi leeyahay ee ganacsi ahaan loo gaday ama la qorsheeyay in loo gado, oo ay kujiraan alaabada wali laga shaqaynayo ama farsamadu udhimantahay iyo agabka loo isticmaali doono samaynta alaabtaas; iyo

ii. Hantida kale ee muddada gaaban ee Ganacsiga uu Shakhsigu leeyahay oo ay ka midyihiin alaabada sida degdega ah loo isticmaalo, sida saadka iyo kuwa loo isticmaalo socodsiinta lawl-maalmeedka

Ganacsiga.

(t) "Hanti Qiima-dhacda":



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

i. waxaa loola jeeda hanti uu shakhsigu ganacsigiisa u isticmaalo si uu dakhli uga sameeyo, iyadoo la filayo in hantidaas qiimaheeda dhacdo muddo ka dib sababo ay ka mid yihiin isticmaal joogta ah, tignoolajiyada oo duugowday awgeed, ama gabow darteed; balse

ii. Hantida Qiima-dhacda kuma jirto sumcadwanaaga shirkad, milkiyadda dhul, saamiyada ama milkiyadda shirkad, badeeco ganacsi loogu talagalay iyo hanti kasta oo kale ee uu xeer-nidaamiye qeexo.

(j) "Hanti Raasumaal":

i. waxaa loola jeedaa hanti uu shakhsi leeyahay, taasoo shakhsigu u isticmaalo ujeedooyinka ganacsigiisa; balse

ii. Kamid maahan Badeeco Ganacsi iyo Hanti Qiima-dhacda.

4) Hantida shakhsi u leeyahay Maalgashi ahaan waxa loo yaqaan Hanti Maalgashi. Faa'iidada Lacageed ee laga helo Hanti Maalgashi waxa la canshuuri karaa oo keliya marka la iibiyo ama si kale loo wareejiyo hantidaas, waase haddii ay tahay Hanti Maalgashi ee Canshuur-gal ah. Hanti Maalgashi ee Canshuur-gal ah:

(b) waxaa loola jeeda saamiga shakhsi kuleeyahay shirkad, amaano aan dalka degaan ku-aheyn, hanti ma guurto ah iyo hanti kasta oo kale ee uu xeer-nidaamiye qeexo; balse

(t) xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexi doona marka guriga uu shakhsigu sida joogtada ah u deganyahay aan loo tixgalinayn Hanti Maalgashi ee Canshuur-gal ah. Sidoo kale, xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexaya xeerarka lagu dhaqaayo faa'iidada iyo khasaaraha ka yimaada iibinta guriga uu shakhsigu sida joogtada ah u deganyahay.

5) Lacagaha lagu bixiyo isticmaalka hanti la ijaartay waxaa loo kala saaray sida soo socota:

(b) "Khidmadda Kheyraadka Dabiiciga ah":

i. waxaa loola jeeda khidmadda lagu iibsaday xuquuqda ka soo saarista berriga ama badda kheyraadka dabiiciga ah, ama khidmadda qayb ahaan ama gebi ahaanba lagu saleeyo qaddarka ama qiimaha kheyraadka dabiiciga ah ee laga qaatay berriga ama badda; waxaana sidoo kale

ii. ku jira lacagaha dheeraadka ah, ganaaxyada ama lacagaha kale ee la mid

ah marka loo eego arrimaha lagu sheegay farqad-hoosaadka (i); balse

iii. kamid maahan Khidmadda Milkiyadda ee uu sharci soo rogay, lana siinayo Dawladda Soomaaliya.

(t) "Khidmadda Milkiyadda":

i. waxa loola jeedaa khidmadda laga bixiyo isticmaalka ama xaqa isticmaal ee hanti aan la taaban karin;

ii. waxaa ka mid ah:

(B) isticmaalka ama xaqa isticmaalka ee wax-soos-saar sharcigu ilaaliyay sida suugaanta, farshaxanka ama sayniska, oo ay ku jiraan filimada, softweerada ama muuqaallada ama maqallada duuban, ha ahaado wax-soos-saarko mid danabeysan (electronic) ama mid aan danabeysnayn;

(T) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee curin ilaalsan, hal-abuur, calaamad ganacsi, naqshad ama moodel, qorshe, qaacido qarsoodi ah ama habraac, ama hanti kale oo la mid ah ama xuquuq;

(J) helitaanka ama xaqa lagu heli karo maqal ama muuqaal ama labadaba, kuwaas oo lagu gudbiyey qalabka dayax-gacameedka, fiilooyinka, faybar obtik ama tignoolajiyad la midka ah ee baahinta oo ay ku jiraan telefishanka, raadiyaha ama interneet;

(X) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee macluumaad khibrad warshadeed, ganacsi, ama saynis;

(KH) gabi ahaan ama qayb ahaan ka-tanaasulka ka dhasha arimaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i) ama xarfaha (B), (T), (J), ama (X) ee faqrad-hoosaadkan; ama

(D) lacagaha dheeraadka ah, ganaaxyada ama lacagaha kale oo la mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i) ama xarfaha (B), (T), (J), (X) ama (KH) ee faqrad-hoosaadkan; balse

iii. kuma jiraan Khidmadda Kheyraadka Dabiiciga ah.

(j) "Kiro":

i. waxa loola jeedo lacag lagu bixiyay:

(B) isticmaalka ama xaqa isticmaalka ee nooc kasta oo hanti ah, iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(T) gabi ahaan ama qayb ahaan ka-tanaasulka la xiriira arimaha lagu soo sheegay faqrad-hoosadka (i)(B);

ii. waxaa ku jira lacagaha dheeraadka ah, ganaaxyada ama lacagaha kale oo la mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i); balse

iii. kamid maahan Khidmadda Kheyraadka Dabiiciga ah, Khidmadda Milkiyadda ama Faa'iidada Laga-helo Qaamaha.

## Qodobka 7-aad
## Aaladaha Maaliyadeed iyo Faa'idooyinkooda

1) Aalado Maaliyadeed waxa loo kala saaray sidan soo socota:

b) "Saami Shakhsiyadeed":

i. waxaa loola jeedaa saamiga sharcigu aqoonsanyahay ee shakhsi ku leeyahay hay'ad. Tani waxay noqon kartaa saamiga shakshi kuleeyahay shuraako, saamiga shakhsi kuleeyahay amaano, ama saamiga shakhsi kuleeyahay shirkad.

ii. waxaana ka mid ah xuquuq kasta (ha ahaato mid sharcigu aqoonsanyahay ama shuruud ku xiran) ee shakhsigu uleeyahay dakhliga ama hantida hay'adda, marka laga reebo wixii xuquuq ah oo ay reebaan xeer-nidaamiyayaal.

t) Qaan-sheeg iyo Qaan Bixin waxaa loola jeedo xuquuqda lacag-helista ama mas'uuliyadda lacag siinta shakhsi kale, waxaana ka mid ah daymaha muddada gaaban iyo waajibaadyada ka dhalanaya lacagaha dhigaalka ah, dukumintiyada dayn-sidayaasha ah, amaahda, damaanadaha Dawladda, ballan-qaadyada lacag- bixinta, iyo dukuminitiyada maaliyadeed ee sarrifma, balse kamid maahan saamiyada shirkadda;

j) "Aaladaha Maaliyadeed ee Darajada Labaad (Derivative Instrument) " waxa ay yeelanayan macnaha lagu qeexo xeer-nidaamiye. Haddii aanu jirin xeer-nidaamiye, waxaa laga soo qaadanayaa macnahooda Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP); iyo

(x) "Aaladda lacagta qalaad" waxa ay yeelanayan macnaha lagu qeexo xeer-



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

nidaamiye. Haddii aanu jirin xeer-nidaamiye, waxaa laga soo qaadanayaa macnahooda Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP).

2) Faa'iidada aaladaha maaliyadeed waxaa ka mid ah:

b) "Faa'iidada Saamiyada":

i. waxaa loola jeedo lacagta uu saamile ka helo shirkad:

B) ha ahaato mid laga helo qaybsiga faa'idada, ka dhalataa kala dirida shirkadda ama dib-u-habaynteeda, dhimista ra'asamaalka ama dib-u-iibsashada saamiyada, ama si kale;

T) iyadoon loo eegayn in lacagta la helay ay si toos ah ugu jaango'antahay saamiga shakhsigu kuleeyahay shirkadda;

ii. waxaa ka mid ah ra'sumaaleynta faa'iidada:

B) iyadoo loo maraayo soo saarista saamiyo dheeri ah, kor-u-qaadista qiimaha saamiyada ama siyaabo kale;

T) iyada oo aan loo eegin in wax faa'ido ah la qaybiyay iyo in kale;

iii. waxaa ka baxsan lacagta:

B) u dhiganta lacag uu saamiluhu siisay shirkadda (oo aan ahayn habka wareejinta saamiga uu shirkadda kuleeyahay);

T) laga dhimay xisaabta ra'sumaalka, lacagaha dheeraadka ah ama xisaab la mid ah oo u dhiganta marka la barbar dhigo dhammaan saamiyada shirkadda; ama

J) ah canshuur la goostay ama lacagta lagu daray xisaabinta dakhliga xubinta (ha ahaato dakhliga xubinta kasoo galo shaqo, ganacsi ama maalgashi) oo ay ku jiraan faa'idada laga helo deymaha ama faa'iidada aaladaha maaliyadeed (oo aan ahayn midda saamiyada shirkadda);

t) "Faa'iidada Laga-helo Qaamaha", taas oo:

i. loola jeedo lacag loo bixiyay si la iskaaga baxsho qaan;

ii. ay ku jiran:

B) lacag loo bixiyay si waafaqsan Shareecada, taas oo ah faa'ido ka dhalatay qaan;

T) lacag bixin ku aadan qiimadhamis ama lacag dheeraad ah;

J) lacag lagu bedeshay dammaanad bixin; iyo

X) qadar kasta ee lacageed oo Sharcigani u aqoonsanyahay faa'ido laga helay qaan, ama si waafaqsan Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP) ama xeer-nidaamiye; balse

iii. waxaan ku jirin faa'idada ra'sumaalka ee uu tilmaamo xeer-nidaamiye ama si waafaqsan Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP), marka uusan jirin xeer-nidaamiye;

j) "**Faa'iidada Laga-helo Qaamaha** ee Caadiga ah" waxa ay leedahay macnaha uu tilmaamayo xeer-nidaamiye, haddiise uu xeer-nidaamiye jirin waa faa'idada laga helo qaamaha oo loo xisaabiyay boqolleyda qaanta taagan.

## Qodobka 8-aad
## Kharashaadka Gaarka ah iyo Kharashaadka aan La-tixgelinayn

1) Marka shakhsi uu galo kharash, kharashku waa "kharash gaar ah" marka loo galay:

b) arimo shakhsi ah, oo ay ku jiraan helista hoy, cunto, raashin fudud, madadaalo ama nasasho;

t) safar dartiis, gaar ahaan safarka joogtada ah ee udhaxeeya guriga iyo goobta shaqada ee caadiga ah;

j) soo gadashada dhar shakhsiyeed, oo aysan kujirin dharka aan lagu xiran karin meel ka baxsan shaqada ama ganacsiga; ama

x) waxbarashada shakhsiyeed darteed, oo aysan kujirin waxbarashada si tooska ah u khuseysa ganacsiga uu shakhsigu ka shaqeeyo islamarkaasina

aan horseedeyn shahaado heerka koowaad ee jaamacadda ama dibloomo.

2) Marka uu shakhsigu galo kharash inta uu ku guda jiro kharash-bixinta ama faa'ido siinta shakhsi kale, kharashku waa "kharash gaar ah" marka laga reebo in:

b) lacagta ama dheefta la bixiyay lagu daray xisaabinta dakhliga shakhsiga ka soo galay shaqada, ganacsiga ama maalgashiga;

t) shakhsiga kale uu bixinayo qiima u dhigma qiimaha suuqa ee lacagta ama dheefta; ama

j) qadarta kharash ee la galay ay aad uga yar tahay wax u qalama maamul ahaan ama caqli ahaanba in laga xisaabtamo.

3) Kharashaadka lagu sheegay faqradaha (1) iyo (2) waxaa ka mid ah faa'idada laga helo qaamaha ee labaxshay taas oo la xiriirta lacagta la amaahday loona isticmaalay sida ku cad isla faqradahahaas.

4) Kharashyada aan loo tixgelin kharashyo ganacsiga waxaa kamid ah:

b) canshuurta loo bixiyay si waafaqsan Sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga;

t) laaluushka iyo kharashaadka loo galay sababo la xiriira dhaqamo musuqmaasuq
ama fal dambiyeedyo;

j) faa'idada laga helo qaamaha, iyo ganaaxyada la siiyo dawladda ama maamul- hoosaad katirsan dowladda dal, kuwaa oo kadhashay xadgudub ka dhan ah sharci ama xeer-nidaamiye;

x) kharashaadka uu shakhsigu u galay si uu u helo dakhli aan canshuur-gal ahayn ama dakhli canshuurta horay looga jarto;

kh) faa'idada laga helo qaamaha oo lagu bixiyay qaan lasoo amaahday taas oo loo isticmaalay si loo iibsado hanti soo saarta dakhli aan canshuur-gal ahayn ama dakhli canshuurta horay looga jarto;

d) qaaraanka hawlgabka, haddii aan lagu darin xisaabinta dakhliga shaqaalaha sida ku cad Qodobka 13(3)(kh);

r) faa'idada saamiga shirkad iyo faa'idada ra'sumaal ee la xiriirta saamiga shakhsi kuleeyahay hay'ad;

s) lacagta la dhigo sanduuq keydka, ama meel loo dhigo bixinta kharashaad ama khasaare la filayo ama lacagta loo ra'sumaaleeyay hab kasta; iyo

sh) lacag bixin caddaan ah ee ka badan xadka lagu qeexay xeer-nidaamiye.

## CUTUBKA II
## WAAJIBINTA CANSHUURTA DAKHLIGA

### Qodobka 9-aad
### Waajibinta Canshuurta Dakhliga

1. Canshuurta dakhliga waxa ay sanad canshuureed kasta ku waajibtaa:

b) shakhsigii hela dakhli canshuurgal ah sanadkii;

t) shakhsigii hela dakhli canshuurta looga reebo si kama dembeys ah sanadka gudihiisa; iyo

j) shakhsi aan Dalka degaan ku aheyn oo kuleh Soomaaliya xarun ganacsi oo joogta ah, taas oo dakhli u dirtay dibadda sanadkaas.

2) Qaddarta canshuurta dakhliga ee uu shakhsigu bixinayo sanad canshuureed waa wadarta qaddarta lagu sheegay faqradda (1) (b), (t) iyo (j) ee Qodobkan.

3) Iyadoo la raacayo faqradda (4) ee Qodobkan, canshuurta dakhliga ee uu bixinayo shakhsi si waafaqsan faqradda (1)(b) ee Qodobkan waxa loo xisaabinayaa:

b) in boqolleyda canshuurta dakhliga ee ku haboon ee ku xusan Jadwalka Koowaad lagu dhufto dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsiga; kadibna

t) laga jaro tixgelinta canshuureed (tax credit) ee jaritaankeeda loo ogolyahay shakhsiga sanadkaas sida ku cad Qodobka 86-aad.

4) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi ka bixinayo dakhligiisa canshuur-galka ah ee uu ka helay ganacsi waxaa lagu dabaqayaa xeerarka la fududeeyay ee canshuuraha ee ku xusan ama loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Labaad.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

5) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi u bixinayo si waafaqsan faqradda (1) (t) ee Qodobkan waxaa la xisaabinayaa iyada oo la adeegsanayo boqolleyda ku waajibtay ee ku xusan Qodobka 5-aad ee Jadwalka Koowaad ee canshuur ka-reebid kasta oo kama dambays ah. Wadarta la bixinayo sida ku cad faqradda (1) (t) ee sanadka waa wadarta guud ee qadartaas.

6) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi u bixinayo si waafaqsan faqradda (1)(j) ee Qodobkan waxaa la xisaabinayaa iyada oo lagu dabaqaayo dakhliga Xarun kasta oo Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed ay dibadda u dirtay, boqolleyda ku waajibtay ee ku xusan Qodobka 4-aad ee Jadwalka Koowaad. Wadarta canshuurta sanadka ee loo bixinaayo si waafaqsan faqradda (1) (j) ee Qodobkan waa wadarta qaddartaas.

## CUTUBKA III
## SALDHIGA CANSHUURTA DAKHLIGA
## QAYBTA I
## DAKHLIGA CANSHUURGALKA AH

### Qodobka 10-aad Dakhliga Canshuurgalka ah

1) Iyadoo la raacayo faqradda (2) ee Qodobkan, dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsi ee sanad canshuureed waa wadarta guud ee dakhliga loo qiimeeyey inuu canshuurgal yahay ee shakhsigu sanadkii ka helo shaqo, ganacsi iyo maalgashi.

2) Marka la xisaabinayo dakhli canshuurgal ah, waxaa laga jarayaa wadarta dakhliga shakhsiga ee sanadka, lacagaha loo oggolyahay in loo jaro qaaraanka hawlgabka (si waafaqsan Qodobka 70-aad) iyo tabarucaadka lagu taageeray arrimaha qiimaha leh (si waafaqsan Qodobka 76-aad). Lacagaha loo jaray si waafaqsan faqradan kama badan karto wadarta dakhliga lagu sheegay faqradda (1) ee Qodobkan.

3) Dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsi kastaa waxaa loo xisaabinayaa si gooni ah.

## QAYBTA II
## DAKHLIGA QIIMAYNGALKA AH EE LA KASABADO

### Qodobka 11-aad
### Dakhliga Qiimayngalka ah

1. Dakhliga qiimayngalka ah ee uu shakhsi sanad canshuureed ka helo shaqo, ganacsi ama maalgashiga waa:

b) haddii uu Dalka degaan ku yahay, wadarta dakhliga dhammaan dunida qaybaheeda kala duwan ee shakhsigu sanadkii ka helo shaqada, ganacsiga ama maalgashiga;

t) hadii uusan Dalka degaan ku ahayna, wadarta guud ee:

i. dakhliga dhammaan dunida qaybaheeda kala duwan ee shakhsigu sanadkii ka helo Xarun kasta ee Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed ee shakhsigu leeyahay (si waafaqsan Qodobka 83-aad); iyo

ii. dakhliga sanadkaas shakhsiga uu ka helo shaqo, ganacsi, ama maalgashi uu ka sameeyay Soomaaliya, balse waa haddii uu yahay dakhli aan hoos imaanayn faqrad-hoosaadka (i).

## Qodobka 12-aad
## Dakhliga Shaqada

1) Dakhliga shaqo ee shakhsigu helo sanad canshuureed waa wadarta guud ee dakhliga shakhsigu ka helo shaqo kasta sanadkaas.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala shaqada:

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) ee Qodobkan haddi uu shakhsiga ka helo shaqada sanadkaas; balse

t) waxaa laga saarayaa qadarta lagu xusay faqradda (4) ee Qodobkan.

3) Qadarta lagu darayo dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala shaqada waa:

b) mushaharka billaha ah, mushaarka saacadlaha ah, gunnada, khidmada shaqo ka tagista, abaalmarinnada lacageed, mushaharka xilliyada fasaxa, lacageynta fasaxa, khidmada wakhtiga dheeraadka ah, liiltirka iyo lacag bixinnada la midka ah kuwa lasoo tixay, iyada oo aan loo eegin magaca loo bixiyay;

t) lacag-bixinnada lagu bixiyo heshiiska uu shakhsigu:

i. ku galayo shaqada;

ii. ku aqbalaayo shuruudaha shaqada ama wax-ka-bedellada lagu sameeyo shuruudahaas; ama

iii. ku aqbalaayo ama ku galaayo ballan lagu xadidaayo habdhaqankiisa la xiriirta shaqada;

j) lacag-bixinnada lagu dabaraayo ama dib loogu celinaayo kharashaad uu galay
shakhsiga ama shakhsi xidid la ah oo la xiriirta shaqadiisa;

x) lacag-bixinnada shaqa ka joojinta, ha ahaadan kuwa loo bixiyay si mutadawacnimo ah ama si heshiis lagu yahey, taas oo ay ku jirto magdhawga shaqo ka erinta ama shaqo waayidda;

kh) lacag-bixinnada kale, oo ay ku jiraan hadiyadaha lagu helay arimo la xiriira shaqada; iyo

d) lacag kasta oo kale oo in dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala shaqada lagu daro lagu farayo qeybaha kale ee Sharcigan, gaar ahaanna Cutubka IV.

4) Qadarta aan lagu darayn dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala shaqada waa:

b) dakhliga la canshuur dhaafay iyo lacag-bixinnada canshuurta looga reebay sida kama dambaysta ah;

t) lacag-bixinnada dib-ugu-celinaaya shakhsiga kharashaadka uu u galay loo-shaqeeyaha dartiis, kuwaa oo xiriir toosan laleh baahida ganacsi ee loo shaqeeyaha;

j) xuquuqda hawlgabka ee loo-shaqeeyaha iyo shaqaaluhu ku shubaan sanduuqa hawlgabka iyaga oo ka wakiil ah qofka ay khusayso ama qof la xiiira, iyo macaashka hawlgabka ee la bixiyo si waafaqsan heshiiska shaqada;

x) kharashaadka lagu daboolaayo baahida hoy muhiim u ah shaqaalaha si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo, balse waa hadii uu qeexo xeer-nidaamiye; iyo

kh) lacag-bixinnada loo siiyo shaqaalaha si aan kala sooc lahayn, kuwaas oo marka la eego cadadkooda, noocooda iyo inta jeer ee la bixiyayba, aysan macquul ama maamul ahaanba suurtagal u ahayn in loo-shaqeeyuhu kasoo xisaab-celsho ama ku qoro shakhsi gaar ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 13-aad
## Dakhliga Ganacsiga

1) Dakhliga uu shakhsi sanad canshuureed ka helo ganacsi waa wadarta faa'iidada iyo korarka maaliyadeed uu shakhsigu ka helay ganacsiyadiisa sanadkaas.

2) Marka la xisaabinayo faa'iidada iyo korarka maaliyadeed uu shakhsi sannad canshuureed ka helay ganacsi:

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) ee Qodobkan haddi shakhsigu sanadka gudihiisa uu ka helay ganacsiga; balse

t) waxaa laga reebaya qaddarta lagu xusay faqradda (4) ee Qodobkan.

3) Qadarta lagu darayo dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala ganacsiga waa:

b) khidmadaha adeegga;

t) dheefta kasoo xaroota iibka badeecada ganacsiga;

j) faa'idada ka dhalatey iska iibinta (disposal) hantida ra'sumaalka iyo deymaha ganacsiga, oo loo xisaabiyay si waafaqsan Cutubka V;

x) qadarta ay tahay in lagu daro si waafaqsan xeer-nidaamiyaha loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Afaraad ee khuseeysa hantida qiimo-dhacda ee ganacsiga uu shakhsigu leeyahay;

kh) qadarta lacag ee shakhsigu ku bedeshay inuu xaddido ganacsigiisa;

d) hadiyadaha ama kaalmooyinka (subsidies) uu shakhsigu ku helo ganacsiga;

r) qadarta lagu sheegay Qodobka 14(3) ee Sharcigan (dakhliga maalgashiga) balse si dhow oo toos ah ula xiriirta ganacsiga; iyo

s) lacagaha kale ee loo baahanyahay in lagu daro si waafaqsan qaybaha kale ee Sharcigan, gaar ahaan Cutubyada IV iyo VII iyo Qodobka 56-aad.

4) Qadarta aan lagu darayn dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala ganacsiga waa:

b) dakhliga la canshuur dhaafay iyo lacag-bixinnada canshuurta looga reebay sida kama dambaysta ah; iyo

t) qadarta lagu daray xisaabta dakhliga shakhsiga kasoo gala shaqada

## Qodobka 14-aad
## Dakhliga Maalgashiga

1) Dakhliga uu shakhsi sanad canshuureed ka helo maalgashi waa wadarta faa'iidada iyo korarka maaliyadeed ee shakhsigu ka helay maalgashiyadiisa sanadkaas.

2) Marka la xisaabinayo faa'iidada iyo korarka maaliyadeed ee shakhsi sannad canshuureed ka helay maalgashi:

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) ee Qodobkan haddi shakhsigu sanadka gudihiisa uu ka helay maalgashi; balse

t) waxaa laga reebaya qaddarta lagu xusay faqradda (4) ee Qodobkan.

3) Qadarta lagu darayo dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala maalgashiga waa:

b) faa'idada saamiyada, faa'idada qaamaha, lacag-bixinnada jadwalaysan, khidmadda kheyraadka dabiiciga ah, kirada, lacagaha hawlgabka, iyo khidmadaha milkiyadda;

t) faa'idada kasoo xaroota iska iibinta (disposal) hantida maalgashi ee canshuur-gal ah, ee loo xisaabiyay si waafaqsan Cutubka V ee Sharcigan;

j) qadarta lacag ee shakhsigu ku bedeshay inuu xaddido maalgashigiisa;

x) hadiyadaha uu shakhsigu ku helo maalgashigiisa; iyo

kh) lacagaha kale ee loo baahanyahay in lagu daro si waafaqsan qaybaha kale ee Sharcigan, gaar ahaan Cutubyada IV iyo VII iyo Qodobbada 59-aad, 61-aad iyo 68- aad.

4) Qadarta aan lagu darayn dakhliga sanad canshuureedka shakhsiga ka soo gala maalgashiga waa:

b) dakhliga la canshuur dhaafay iyo lacag-bixinnada canshuurta looga reebay sida kama dambaysta ah; iyo

t) qadarta lagu daray xisaabta dakhliga shakhsiga kasoo gala shaqada ama ganacsiga.

# QAYBTA III
# DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

### Qodobka 15-aad Dakhliga
### La Canshuur Dhaafay

Dakhliga la canshuur dhaafay waxaa loola jeeda:

a) Qadarta ku taxan Jadwalka Saddexaad ee Sharcigan; iyo

b) Dakhliga loo canshuur dhaafay si waafaqsan qodobada kale ee Sharcigan gaar ahaan Qodobbada 56-aad, 59-aad, 61-aad, 68-aad, 71-aad, 72-aad iyo 86-aad.

## QAYBTA IV
## LACAGAHA LA GOYNAYO

### Qodobka 16-aad
### Mabaadi'da Guud iyo Xadka Lacag Goynta

Xeerarka soo socota ayaa lagu dabaqayaa lacagaha laga goynayo dakhliga shakhsiga:

b) wax lacag ah lagama goyn karo dakhliga shakhsiga:

i. marka la xisaabinayo dakhliga shaqada;

ii. iyadoo la raacayo Qodobka 72(2), lacagaha lagu bixiyo kasbashada lacagaha hawlgabka; ama

iii. kharashaadka gaarka ah ama kharashaadka aan la-tixgelinayn ee uu galay shakhsiga (eeg Qodobka 8-aad);

t) marka faqrada (b) ee Qodobkan aysan diidayn lacag goynta:

i. lacag-goyn waxaa la ogolyahay oo kaliya inta uu Sharcigani si cad u fasaxay; iyadoo

ii. wadarta lacagaha laga goynayo dakhliga ganacsi ee sanad canshuureed aysan ka badan karin sagaashan iyo shan (95%) boqolkiiba lacagaha qayta ka ah xisaabinta dakhligaas;

j) marka in kabadan hal xeer lagu dabaqi karo lacag-goynta:

i. waxaa la dabaqayaa xeerka u gaarka ah xaalada markaas taagan, xataa haddii uu keenaayo in la diido lacag-goynta ama layareeyo lacagta la goynayo; iyadoo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ii. aan la oggolayn in lacag la goyo in ka badan hal mar.

## Qodobka 17-aad
## Xeerka Lacag-goynta ee Ganacsiga

1) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureed shakhsi ka soo galay ganacsi, waxa laga goyn karaa kharashaadka uu shakhsigu sanadkaas gudihiisa u galay dakhli ka soo saaridda ganacsiga.

2) Lacag-goynta ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan looma ogola kharashaadka leh sifo ra'sumaal. "Kharash leh sifo ra'sumaal" waxaa ku jira kharash loo galay si loogu helo faa'ido soconaysa in ka badan laba iyo toban (12) bilood.

## Qodobka 18-aad
## Faa'idada Ka-dhalata Qaamaha Ganacsiga

1) Marka sanad canshuureed la xisaabinayo dakhliga kasoo gala shakhsi ganacsi, waxa laga goynayaa faa'idada la socota qaamaha ee uu shakhsigu galay sanadkaas gudihiisa gaar ahaan:

b) haddii faa'idada la socota qaamaha lagu bixinayo lacag la amaahday, lacagtana:

i. loo isticmaalay sanadka gudihiisa si dakhli looga soo saaro ganacsiga; ama

ii. loo isticmaalay sanadka gudihiisa si loogu soo iibiyo hanti loo isticmaalay dakhli ka soo saardda ganacsiga; ama

t) xaalad kasta oo kale, oo qaanta loo galay si loo soo saaro dakhli.

2) Qadarta faa'idada qaamaha ee la ogol-yahey in la gooyo sanad canshuureedka iyadoo la raacayo faqradda (1) ee Qodobkan waxa ay ku kooban tahay wadarta qadarta soo socota:

b) faa'idada qaamaha ee uu shakhsigu helay taasoo ay tahay in lagu daro dakhliga ganacsi ee shakhsiga ee sanadka; oo lagu daray

t) labaatam iyo shan (25%) boqolkiiba dakhliga shakhsiga sanadkii ka soo gala ganacsiga oo loo xisaabiyay iyadoo aan:

i. lagu darin faa'idada qaamaha ee uu shakhsigu helay ama qaddarta lagu sheegay Qodobka 13 (3) (j) ama (x); ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ii. laga goyn faa'idada qaamaha ee uu shakhsigu galay ama qadarta lagu sheegay Qodobbada 20-aad, 21-aad ama 23-aad.

3) Faa'idada ka dhalata daymaha ee loo diiday in loo sameeyo lacag goyn iyadoo la raacaayo faqradda (2) ee Qodobkan:

b) waxaa loo rarayaa sanadka xiga, iyadoo loo tixgalinayo in la galay sanad canshuureedka xiga;

t) waxaa lacag-goynta loogu samaynayaa sida loo kala hor galay; iyadoo

j) aan loo rari karin muddo ka badan toban (10) sano.

4) Xeer-nidaamiye ayaa wax ku dari kara, qaabayn kara sida loo dabaqaayo, bedeli kara ama joojin kara isticmaalka xeerarka lagu qeexay faqraddaha (2) iyo (3) ee khuseeya lacag-goynta la xiriirta faa'idada qaamaha oo ay bixiyaan hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 19-aad
## Badeeco Ganacsi

1) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureed shakhsiga ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa qadarta loo ogolaaday (allowance) badeecada ganacsi. Lacagta la ogolaaday goynteeda waxaa loo xisaabinayaa sidani:

b) qiimaha badeecada ganacsigu leedahay billowga sanadkaas (opening value) oo; oo lagu daray;

t) kharashka uu shakhsigu galay sanadka gudihiisa oo ay ku jiraan kharashkii ku baxey badeecada ganacsi; oo laga jaray

j) qiimaha badeecada ganacsiga leedahay dhamaadka sanadka (closing value).

2) Qiimeynta badeeco ganacsi ee sanad canshuureed billowgiisu waa qiimaha lagu xiray badeecada dhamaadkii sanad canshuureedkii hore.

3) Qiimaha lagu xiray badeeco ganacsi sanadka canshuureed waa hadba kii yar:

b) qiimahay joogtay badeecada ganacsi dhamaadka sanadka; ama

t) qiimaha suuqa ay ka joogtay badeecada ganacsi dhamaadka sanadka.

4) Qiimaha badeeco ganacsi waxaa loo go'aaminayaa si waafaqsan Qodobbada 40-aad iyo 41-aad. Balse, haddii qiimaha badeeco ganacsi dhammaadka sanadka lagu go'aamiyo si waafaqsan faqradda (3) (t) ee Qodobkan, qiimaha

badeecada ganacsi waxaa lagu samaynayaa dib-u-dejinta iyadoo lasiin doono qiimaas.

## Qodobka 20-aad
## Hantida Qiimo-dhacda

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaa qaddarta qiimo dhaca la ogol yahay (depreciable allowance). Haddii ay jirto qaddar la-ogol-yahay oo la gooyn karo waa in la gooyaa. Qaddarta qiimo dhaca la-ogol-yahay:

b) waxaa loo ogolaanayaa hantida qiimo dhacda ee uu shakhsigu leeyahay una isticmaalay inuu sanadka gudihiisa dakhli uga soo saaro ganacsiga; waxaana

t) loo xisaabinayaa iyadoo la raacayo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Afraad ee Sharcigan.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaa kharashaadka ku baxay dayactirka ama hagaajinta hantida qiimodhacda. Qaddarta loo gooynaayo si waafaqsan faqradaan:

b) waxa ay ku kooban tahay kharashaadka ku baxay hantida qiimadhacda ee uu shakhsigu leeyahay una isticmaalay sanadka gudihiisa inuu dakhli kagasoo saaro ganacsiga;

t) si gaar gaar ah ayaa loogu xisaabinayaa koox walba oo hanti qiimodhacda ee isku nuuc ah ee uu leeyahay ganacsigu; sidoo kale

j) waxaa lagu koobayaa boqolkiiba shan (5%) qiimaha qoran ee koox walba oo hanti qiimodhacda ee isku nuuc ah ay joogtay dhamaadka sanad canshuureedka (eeg xeer-nidaamiyaha loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Afraad) taasoo la xisaabiyay iyadoo layska indhatirayo qadar kasta oo lagu kordhinaayo qiimaha hoos u dhaca ee koox walba oo hanti isku nooca ah ee sanadkaas, si waafaqsan faqradda (3) ee Qodobkan.

3) Lacag-goynta (deduction) lagu qeexay faqradda (2) ee Qodobkan waxa loo hirgelinayaa sida loo kala hor galay kharashaadka. Kharashaadka aan lacag-goynta loo ogolaan ee lagu xadiday faqradda (2)(j) ee Qodobkan waxa lagu darayaa qiima dhaca kooxda hantida ah oo ay isku nooca yihiin (eeg xeer-nidaamiyaha loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Afraad).

## Qodobka 21-aad
## Hantida Ra'sumaal iyo Qaanta Ganacsiga

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaas khasaaraha shakhsiga ka soo gaaray gacan-ka- saaridda (disposal) sanadkaas hanti ra'sumaal ee ganacsiga ama deyn ganacsiga lagu
lahaa. Khasaaraha waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan Cutubka V, waxaana la goyn karaa:

b) hadii uu khasaaruhu la xiriiro hanti ra'sumaal, marka hantidaas uu iska lahaa shakhsiga una isticmaalayey dakhli ka soo saaridda ganacsiga;

t) hadii uu khasaaruhu la xiriiro deyn, marka deynbaxa loo galay lacag lasoo amaahday, iyadoo lacagtaas, ama hantidii lagu soo iibiyay lacagtaas loo isticmaalay dakhli ka soo saaridda ganacsiga; iyo

j) hadii uu khasaaruhu la xiriiro nooc kasta oo kale oo deyn ah, marka dayntaasi loo galay dakhli ka soo saaridda ganacsiga.

## Qodobka 22-aad
## Kala Soocidda Lacag-gooynada Marka ay timaado Aaladaha Maaliyadda

1) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureedka shakhsi ka soo gala ganacsi xadidaadahan soo socda ayaa la dabaqayaa:

b) lacag-goynta la xiriirta kharashaadka la galay ee la xiriira aaladaha maaliyadeed ama la xiriira gacan-kuhaynta ama gacan-ka-saaridda (disposing) aaladaha maaliyadeed (iyadoo meesha laga saarayo lacag-goynta loo ogolyahay faa'idada ka dhalata daymaha ee la galay); waxa lagu koobay

t) qadarta lagu daray xisaabinta dakhliga laga helay aaladaha maaliyadeed ama ka dhashay gacan-kuhaynta ama gacan-ka-saaridda aaladaha maaliyadeed (iyadoo meesha laga saarayo oo aan lagu darayn faa'idada daymaha ee la helay).

2) Lacag-goynta iyo ku-darista (inclusions) waxa lagu dhaqayaa faqrada Qodobka 31- aad.

3) Lacag goynta lagu diiday faqradda (1) ee Qodobkan:

b) waxa loo rarayaa sanadka xiya, iyadoo loo tixgalinayo in la galay sanad canshuureedka xiga;

t) waxaa lacag-goynta loogu samaynayaa sida loo kala hor galay; iyadoo

j) aan loo rari karin muddo ka badan toban (10) sano.

## Qodobka 23-aad
## Khasaaraha Ganacsiga

1) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureed shakhsiga ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa:

b) khasaaraha aan la jarin (unrelieved loss) oo shakhsiga ka soo gaaray ganacsi kasta oo kale ee uu sameeyay sannadka gudihiisa; iyo

t) khasaaraha aan la jarin oo shakhsiga ka soo gaaray ganacsigaas ama ganacsi kasta oo kale tobankii (10) sanad canshuureed ee la soo dhaafay.

2) Marka uu shakhsigu leeyahay wax ka badan hal ganacsi, shakhsigu waxa uu dooran karaa qaabka loo xisaabinaayo dakhliga ama qaab xisaabeedka u oggolaanaaya inuu doorto dakhliga laga jaraayo dhammaan ama qayb kamid ah khasaaraha aan la jarin (unrelieved loss). Si kastaba ha ahaatee, haddii lacag-goyn loo samayn karo khasaaraha, waa in lacag-goyntaas loo sameeya. Khasaaraha aan la jarin waxaa lacag- goynta loo sameeynayaa kadib marka lasameeyo lacag-gooynada kale ee la oggolyahay, iyadoo haddii ay jiraan khasaarooyin badan oo aan la jarin, aytaha in lacag-gooynta looga sameeyo sida ay u kala horeeyeen.

3) Iyadoo aan loo eegin faqradaha (1) iyo (2), marka uu shakhsi khasaaro galo, khasaaro goynta la ogolyahey waxaa lagu qiimeynayaa boqoleydii lagu canshuuri lahaa haddii khasaaruhu faa'iido noqon lahaa. Dakhli aan sidiisaba la canshuurin oo loo asteeyey canshuur dhaaf iyo midka canshuurta sida kama dambeys ah looga reebay looma ogolo khasaaro goyn (eeg Qodobbada 8(4)(x) iyo 16(b)(iii) ee Sharcigan).

4) Qodobkan marka la dabaqaayo:

b) "khasaaraha" ganacsi ee shakhsi galo sanad canshuureed xisaabtiisu waa inta ka dheeriga ah:

i. kharashaadka laga goynaayo xisaabinta dakhliga sanad canshuureed shakhsiga ka soo gala ganacsi (iyada oo aan loo eegayn Qodobka 16(t)(ii) iyo Qodobkan); oo la barbar-dhigey; oo laga jaro

ii. sagaashan iyo shan (95%) boqolkiiba lacagaha qaybta ka ah xisaabinta dakhligaas sanadka; sidoo kale

t) "khasaaraha aan la jarin (unrelieved loss)" waxaa loola jeedaa lacagta la khasaaray ee aan laga goynin marka la xisaabinaayay dakhliga shakhsiga si waafaqsan Qodobkan.

## Qodobka 24-aad
## Lacag-goynta Loogu Talagalay iyo Khasaaraha Ka-dhasha Maalgashiga

1) Qodobbada 17-aad iyo 23-aad ayaa la dabaqayaa marka la xisaabinaayo dakhliga shakhsiga ka soo gala maalgashiga, iyadoo:

b) erayga ganacsi lagu beddelaayo maalgashi; walibana

t) marka la joogo qeexitaanka "khasaaro" ee lagu xusay Qodobka 23(4)(t), "sagaashan iyo shan (95) boqolkiiba" lagu bedelay "boqolkiiba boqol (100%)".

2) Qodobka 18 (1) waxa lagu dabaqaa lacag-goynta loo ogolaado faa'idada kasoo xaroota deynta marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala maalgashiga, iyadoo erayga ganacsiga lagu beddelaayo maalgashi. Xadidaadaha ay dhigayaan qeybaha kale ee Qodobka 18-aad lama dabaqayo. Sidoo kale, wax lacag-goyn ah

looma oggolaanayo kharashaadka lagu bixiyo aaladaha maaliyadeed (oo ay ka mid yihiin noocyada kale ee faa'ida ka dhalata deymaha ee la galay) ama kharashaadka la xiriira gacan-ku-haynta ama gacan-ka-saarista (disposal) aaladaha maaliyadeed.

3) Xeerarka kale ee khuseeya lacag ka goynta ganacsiga midkoodna lama dabaqaayo marka la xisaabinaayo dakhliga kasoo xarooda maalgashiga.

4) Marka la xisaabinayo dakhliga sanad canshuureed shakhsiga ka soo gala maalgashi, waxa laga goynayaa khasaaraha shakhsiga ka soo gaaray gacan-ka-saarista (disposal) sanadka gudihiisa hanti maalgashi ee canshuurgal ah. Khasaaraha waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan Cutubka IV, waxaana laca-goynta loo ogolaan karaa ilaa iyo inta ay la ekayd milkiyadda hantida ee shakhsiga iyo inta loo isticmaalay hantidaas dakhli kasoo saaridda maalgashiga.

# CUTUBKA IV
# XEERARKA KHUSEEYA QADDARTA LACAGEED EE LAGU XISAABINAYO SALKA CANSHUURTA DAKHLIGA
## QAYBTA I
## XISAABINTA CANSHUURTA IYO WAKHTIGA

## Qodobka 25-aad Sannad Canshuureed

1) Sannad cashuureedku waa sannadka kalandarka, oo bilaabmaya maalinta 1-aad ee Janaayo kuna dhammaanaya 31-ka December.

2) Shirkad ama Amaano ayaa ka codsan karta Wasaaradda in isbeddel loogu sameeyo sanad canshuureedkeeda, iyadoo Wasaaraddu oggolaan karta isbeddelkaas si waafaqsan shuruudaha iyo tilmaamaha ay u aragto in ay ku habboon yihiin.

3) Wasaaraddu waxa ay ka laaban kartaa oggolaanshaha ku xusan faqradda 2-aad, haddii Amaanada ama Shirkaddu ku guul darreysato in ay u hoggaansanto mid kamid ah shuruudaha iyo tilmaamaha ku lifaaqan oggolaanshaha.

4) Isbeddelka ku yimaada sanad canshuureedka Amaano ama Shirkad waxa uu beddelayaa wakhtiga Amaanada ama Shirkada laga rabo in ay canshuurta ku bixiso qayb-qayb iyo qiimaynta kadib si waafaqsan Cutubka IX.

## Qodobka 26-aad
## Habka Xisaabinta

1) Si uu ugu hoggaansamo waajibaadka canshuureed ee saaran, shakhsigu waa inuu u xisaabiyaa dakhlikiisa:

b) hab-xisaabeedka caddaan ah (cash basis), marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala shaqo ama maalgashi; sidoo kalana

t) hab-xisaabeedka muteysashada (accrual basis), marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala ganacsiga, haddii aan lagu dabaqayn nidaamka canshuuraha ee la fududeeyay (eeg Qodobka 9(4)).

2) Si ay ugu hoggaansanto waajibaadka canshuureed ee saaran, Shuraakadu waa in ay u xisaabisa dakhligeeda hab-xisaabeedka muteysashada, haddii aan lagu dabaqayn nidaamka canshuuraha ee la fududeeyay (eeg Qodobka 9(4)).

3) Haddii hab-xisaabeedka shakhsi ama shuraako wax iska beddelaan, waa in shakhsiga ama shuraakado sameeysaa sixitaanka loo baahanyahay sanad-canshuureedka xiga, si loo hubiyo in dakhli ah ama kharash aan loo xisaabin laba jeer ama gebi ahaanba aan looga tagin.

4) Amaanooyinku, marka laga reebo Ammaanooyinka loo aas-aasay shaqsiyaadka kartidu ka tagtay (eeg Qodobka 58(2), waa inay canshuurta dakhligooda u xisaabiyaan hab-xisaabeedka muteysashada (accrual basis), balse waxa ay Ammaano ka codsan kartaa Wasaaradda isticmaalka hab-xisaabeedka caddaanka ah (cash basis). Wasaaraddu waxa ay oggolaan kartaa isticmaalka hab-xisaabeedka caddaanka ah iyadoo ku xiraysa shuruudaha iyo

tilmaamaha ay u aragto inay ku habboonyihiin. Wasaaraddu waxa ay ka laaban kartaa oggolaanshaha ay bixisay haddii Amaanadu ku guul darreysato in ay u hoggaansanto shuruudaha iyo tilmaamaha ku lifaaqan ogolaanshaha.

5) Shirkadduhu waa in ay dakhligooda ku xisaabiyaan hab-xisaabeedka muteysashada.

## Qodobka 27-aad
## Hab Xisaabeedka Caddaanka ah

1) Marka hab xisaabeedka cadaanka ah la raacayo, waxaa loo qadarinayaa in shakhsigu:

b) qaddar lacageed helay marka ay lacagtu soo gaarto ama la siiyo; sidoo kalena

t) galay kharash ama qaddar lacageed kale marka uu shakhsigu bixiyo kharashkaas ama lacagtaas kale.

## Qodobka 28-aad
## Hab Xisaabeedka Muteysashada

1) Marka la raacayo hab xisaabeedka muteysashada (accrual basis), waxaa loo qadarinayaa in shakhsigu:

b) qaddar lacageed helay marka uu xaq uyeesho inuu helo; sidoo kalena

t) gelay kharash ama qaddar lacageed kale marka bixinteedu ku waajibto shakhsiga.

2) Waxaa loo qadarinayaa in shakhsi qaddar lacageed helitaankeeda leeyahay marka uu xaq u yeesho inuu helo lacagtaas, xataa haddii uu dib u dhac ku yimaado waqtiga lacag-bixinta ama lacag-bixintu tahay mid qayb qayb loo bixinaayo.

3) Waxaa loo qadariniyaa in bixinta qaddar lacageed waajibtay marka dhammaan shuruudaha abuuray waajibaadka ay soo buuxsamaan, walibana qaddarta waajibtay si cad xisaab loogu go'aamin karo, balse looma tixgalinayo in bixinteedu waajibtay ilaa dhab ahaantii loo fuliyo waajibaadka dhaqaale ee la xiriira. Waajibaadka dhaqaale waxa uu fulayaa:

b) marka uu la xiriiro helista adeeg ama hanti, wakhtiga adeegga ama hantida la bixiyay;

t) marka ay la xiriirto isticmaalka hanti, wakhtiga hantida la isticmaalay; ama

j) marka uu la xiriiro xaaladaha kale, wakhtiga uu shakhsigu iska wada bixiyo dhamaan qaddarta bixinteedu waajibtay.

4) Haddii ay khaladaad xisaabeed dhacaan xilliga dakhliga lagu xisaabinayo hab xisaabeedka muteysiga (accrual basis), waa in sixitaanka habboon la sameeyo wakhtiga lacagta la helo ama la bixiyo si loo saxo khaladka. Khaladaadka hab xisaabeedka muteysashada waxaa ka mid ah:

b) inuu shakhsigu xisaabiyo lacag gaar ah oo uu xaq u leeyahay ama ay waajib ku tahay in uu bixiyo; iyadoo

t) ka dibna xaqqii helitaanka lacagtaas ama waajibkii bixinteeda:

i. aan lagu guulaysan; ama

ii. shakhsigu helay ama uu bixiyay, hadba sida xaaladu tahay, tiro ka duwan intii hore oo la filaayay, iyadoo ay keeni karto sababo ay ka midyihiin isbeddel kuyimid sarifka lacagaha.

## Qodobka 29-aad
## Sixitaanka Xisaabaadka Oo Ay Ku Jiraan Kuwa Daymaha Laga Quustay

1) Haddii shakhsi uu kharash ka gooyo xisaabinta dakhligiisa, ka dibna uu dib u helo kharashkaas, waa in shakhsigu, isla marka uu helo, ku daraa qadarta lacageed ee dib loo helay xisaabinta dakhligiisa.

2) Haddii shakhsi uu ku daro qadar lacageed marka uu xisaabinayo dakhlikiisa, balse isagoo fulinaaya waajib sharci, uu dib u celiyo (refund) qaddarta lacageed, shakhsigu wuxuu qaddartaasi uu dib u celiyay ka goyn karaa xisaabinta dakhlikiisa wakhtiga uu dib u celinta.

3) Haddii shakhsigu, isaga oo dakhligiisa ku xisaabinaya hab xisaabeedka muteysashada, uu ka gooyo kharash uu markii hore ku qasbanaa in uu bixiyo, laakiin uu markii dambe ka baaqsado (disclaims) bixinta kharashkaas, waa in uu xisaabinta dakhligiisa ku daraa qadarta uu ka baaqsaday bixinteeda isla wakhtiga uu ka baaqsaday.

4) Iyadoo la raacayo faqradda 5-aad ee Qodobkan:

b) marka dakhliga ganacsi lagu xisaabinayo habka muteysashada, haddii uu shakhsigu ku daro xisaabta qadar lacaga ee uu xaq u lahaa helideeda; iyadoo

t) kadibna uu shakhsigu qadartaas lacageed ka saaro xisaabaadka ganacsiga isagoo u tixgelinaa inay tahay deyn laga quustay, shakhsiga waxaa loo oggol yahay inuu qaddartaas lacageed ee laga saaray xisaabaadka ganacsiga ka jaro

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xisaabinta dakhlikiisa wakhtiga uu ka saaray xisaabaadka ganacsiga.

5) Iyadoo la raacaayo Qodobka 65-aad (ganacsiga bankiyada), lacag-goynta lagu sheegay faqradda 4-aad ee Qodobkan lama samayn karo ilaa shakhsigu:

b) qaadday talaabo kasta oo macquul ah oo uu ku daba galayo sidii uu u soo xerayn lahaa dayntaas; islamarkaasina uu

t) si macquul ah u rumaystay in aysan dayntaasi marnaba soo xeroonayn.

## Qodobka 30-aad
## Qandaraasyada Muddada-dheer

1) Haddii shakhsi ku hawlan ganacsi:

b) si uu ugu hoggansamo canshuur dakhli, uga soo warbixiyo dakhliga ganacsigiisa isagoo isticmaalaya hab xisaabeedka muteysashada; islamarkaasina

t) uu qayb ka yahay qandaraas muddo dheer, qaddarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga shakhsigaas ee la xiriirta qandaraaska mudada dheer ayaa xisaabta lagu darsanayaa, iyadoo lagu salaynayo hadba inta ay la egtahay boqolleyda qandaraaska ee la dhammeeyay sanad canshuureed kasta.

2) Xeer-nidaamiye ayaa qeexaya xaaladaha keeni kara in khasaaro dhaca sanadka u dambeeya ee qandaraaska muddada dheer loogu rari karo gadaal, si khasaarahaas looga gooyo dakhliga heshiiskaa ee sannadihii hore.

3) Marka la dabaqayo Qodobkan:

b) "qandaraas mudada dheer" waxaa loola jeedaa qandaraas:

i. loogu talagalay warshadeyn, rakibid, ama dhismo ama bixinta adeegyada la xiriir mid kasta oo kamid ah kuwaas lasoo sheegay; kaas oo

ii. aan ku dhamaaneynin laba iyo toban (12) bilood gudahood marka laga soo bilaabo taariikhda uu billoday.

t) "boqolleyda qandaraaska ee la dhammeeyay" waxaa loo go'aaminayaa, haddii aanu jirin xeer-nidaamiye u gaar ah, si waafaqsan Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP) kaasoo dakhliga iyo kharashaadka ka soo baxa qandaraaska muddada dheer loo xisaabiyo iyadoo lagu saleeynaayo inta qandaraaska ka midka ah ee la dhammeeyey

4) Xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexi doona habraaca loogu dabaqaayo mabaadi'da Qodobkan qandaraasyada noocyadooda kale, ee ka baxsan kuwa lagu sheegay faqradda (3)(b)(i) ee Qodobkan, ee soconaya in ka badan muddo laba iyo toban (12) bilood ah.

## Qodobka 31-aad
## Aaladaha Maaliyadeed

1) Haddii shakhsi ku xisaabinayo dakhlikiisa hab xisaabeedka muteysiga (accrual basis), lacagaha lagu darayo xisaabinta dakhliga iyo kuwa kharashaad ahaan looga goynayo ee la xiriira aaladaha maaliyadeed ee lagu sheegay Qodobka 22(1) waxa ay u hoggaansamayaan xeerarkan soo socda:

b) wakhtiga qadarta lacageed lagu darayo ama laga goynayo waxa loo go'aaminayaa, haddii aanu jirin xeer-nidaamiye u gaar ah, si waafaqsan Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP);

t) xeer-nidaamiyaha, haddii uu jiro, ama mabaadi'daas ayaa sidoo kale go'aaminaya shakhsiga qadar lacageedka loo nisbeeynaayo, tirada iyo nooca lacagta; sidoo kalena

j) xeer-nidaamiyaha, haddii uu jiro, ama mabaadi'daas ayaa la dabaqayaa xataa haddii loo baahan yahay in la isticmaalo qiimaha suuqa ay ka joogaan (mark-to- market) marka la xisaabinaayo lacagaha lagu darayo xisaabinta dakhliga iyo kuwa kharashaad ahaan looga goynayo, iyada oo aan loo eegayn in:

i. qaddarta lacageed ee la helay, la galay ama la xaqiijiyay; ama

ii. lacagtu ay nooc ahaan tahay ra'sumaal ama dakhli.

# QAYBTA II
# QIIMAYNTA, QOONDAYNTA IYO NOOCEYNTA QADDAR LACAGEED

## Qodobka 32-aad
## Qiimaynta Waafaqsan Qiimaha Suuqa

1) Lacag-bixinta ama qadarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhli waxaa lagu qiimaynayaa (quantified) qadarta lagu qeexay xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Jadwalka Shanaad ama haddii kale, sida uu yahay qiimaha suuqu.

2) Qaddarta lacag-bixineed waxa lagu qiimaynayaa iyada oo aan laga goyn wax canshuur ah ee laga jaray lacag-bixintaas si waafaqsan Qaybta II ee Qodobka



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

IX ee Sharcigan.

3) Iyada oo la raacayo faqradda 5-aad ee Qodobkan, qiimaha lacag-bixin, hanti ama qaan ay suuqa ka joogan waqti gaar ahi waa:

b) qiimaha (value) lacagta, hantida ama qaantu ka joogto suuq furan oo caadi loogu ganacsado wakhtigaas; ama

t) haddii faqrad-hoosaadka (b) aan la dabaqi karin, qiimaha lacag, hanti, ama qaan waxaa laga qiyaas qaadanayaa qiimaha suuq furan oo kale oo caadiya ah wakhtigaas ka joogto lacag, hanti, ama qaan la mid ah, iyada oo la tixgelinaayo wixii kala duwanaasho ah ee u dhexeeya lacagta, hantida, ama qaanta la midka ah iyo lacagta, hantida, ama qaanta dhabta ah; balse

j) haddii faqrad-hoosaadka (b) iyo (t) aan midina la dabaqi karin, waxaa la qaadanayaa qaddarta ay go'aamisay Wasaaradda, balse waa in ay waafaqsan tahay Mabaadi'da Qiimaynta Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAVPs).

4) Iyadoo laga duulaayo ujeedooyinka faqradda 3(t) ee Qodobkan, lacag-bixin, hanti ama qaan waxa loo tixgalinayaa in ay la mid tahay ama ay aad ugu dhowdahay lacag- bixin, hanti ama qaan kale, marka ay wadaagaan sifo, tayo, tiro, waxtar, nuxur, iyo sumcad.

5) Qiimaha suuqa waxaa la go'aaminayaa:

b) iyada oo lagu xisaabtamayo, markii ay suuragal tahay, nidaamka eex la'aanta ah (the arm's length standard) ee lagu sheegay Qodobka 37-aad; balse

t) iyada oo aan loo eegayn:

i. in qaddartu tahay mid ka badan baahida ama rabitaanka shakhsi kasta;

ii. in qaddartu ama qadar la mid ah la siiyay shakhsi kale;

iii. in qaddartu la bixay iyada oo loo hoggaansamaayo waajibaad sharci oo sidaasi faraya;

iv. in qaddarta loo beddeli karo lacag-bixin ama qiimo lacageed; ama

v. haddii ay tahay hanti, xaddidaada saaran wareejinta hantidaas.

## Qodobka 33-aad
## Lacag Bixinta Dadban iyo Tan Gacanta-dhexe

1) Wasaaraddu waxa ay wareegto rasmi ah oo waafaqsan Qodobka 9-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ama ogeysiis qoraal ah ku qeexi kartaa, hagayaashan soo socda:

b) haddii ay tahay lacag-bixin dadban, ka-faa'iidaystaha waxaa loola dhaqmayaa in uu yahay:

i. shakhsiga qaatay lacagta;

ii. shakhsiya bixiyay lacagta; ama

iii. shakhsiga qaatay lacagta iyo sidoo kale shakhsiga siiyay lacag u dhiganta shakhsiga kale kaas oo loo tixgelinaayo lacag qaataha, haddii faqrad-hoosaadkan layska indhatiro; iyo

t) haddii ay tahay lacag-bixin gacan dhexe usoo martay shakhsiga lacag-bixinta qaatay (back-to-back payment):

i. waxaa shakhsiga qaatay lacag-bixinta labaad loola dhaqmayaa sidii shakhsiga qaatay lacag-bixinta koowaad;

ii. waxaa shakhsiga bixiyay lacag-bixinta koowaad loola dhaqmayaa sidii shakhsiga bixiyay lacag-bixinta labaad; ama

iii. in la mideeyo lacag-bixinta koowaad iyo tan labaad islamarkaasina loola dhaqmo sida hal lacag-bixin oo uu bixiyay lacag bixiyaha koowaad uuna qaatay lacag qaataha labaad.

2) Qodobkan dhexdiisa:

b) "lacag-bixinta dadban" waxaa ka mid ah hannaan u oggolaanaya:

i. inuu shakhsi (ka faa'iidaystaha):

b) si dadban uga faa'iidaysto lacag-bixin uu shakhsi kale bixiyay; ama

t) go'aamiyo cidda la siinaayo lacag-bixin uu sameeyo shakhsi kale; iyadoo

ii. ay suurtagal tahay in la fahmo in shakhsiga kale ee bixinaya lacagta (ama shakhsi xidid la ah shakhsiga kale) uu damacsan yahay in ka-faa'iideystuhu ku nacfiyo lacag-bixinta.

t) "lacag-bixinta gacan dhexe usoo martay shakhsiga lacag-bixinta qaatay (back-to- back payment)" waxaa ka mid ah hannaan:

i. lacag-bixin lagu sameeyo (lacag-bixinta koowaad); islamarkaasina

ii. ay suurtagal tahay in la fisho in lacag-bixinta kowaad ay sababi karto in shakhsiga lacag-bixinta koowaad qaatay (ama shakhsi xidid la ah ) uu lacag siiyo shakhsi kale (lacag-bixin labaad).

## Qodobka 34-aad
## Maalgashiga Wadajirka Loo-leeyahay

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala maalgashi uu shakhsi kale la leeyahay, qaddarta lagu darayo iyo mida laga goynayo waxaa loogu kala qaybinayaa milkiilayaasha wadajirka ah sida ay u kala leeyihiin saamiga maalgashiga.

2) Marka aan la xaqiijin karin saamiga ay kala leeyihiin milkiileyaashu, waxaa loola dhaqmayaa si siman.

## Qodobka 35-aad
## Magdhawga iyo Lacagaha Soo Kabashada

1) Iyada oo la raacayo Qodobka 29-aad, qaddarada magdhawga ah (compensations) waxaa lagu darayaa xisaabinta dakhliga shakhsiga magdhowga la siiyey, iyadoo magdhawgu sifadiisa ka qaadanaayo qaddarka magdhawga laga bixinaayo.

2) Qodobkan dhexdiisa, "qaddar magdhow ah" waxaa loola jeedaa qaddar uu helay shakhsi ama shakhsi kale oo xidid la ah, taasoo ujeedadeedu tahay in ay magdhaw ama soo kabasho ka bixiso:

b) dakhli ama qaddar lagu daray xisaabinta dakhliga shakhsi, kaasoo shakhsigu filaayo ama uu filaayay inuu helo; ama

t) khasaaro ama qaddar laga goyay xisaabinta dakhliga shakhsiga, kaasoo shakhsigu galay, ama shakhsigu filaayo ama uu filaayay inuu galo.

## Qodobka 36-aad
## Ijaarka Maaliyadeed, Lacag-bixinnada Qayb-qaybta iyo Lacag-bixinnada Waqtiyeeysan

1) Lacagaha uu shakhsi ku bixiyo heshiisyada ijaarka maaliyadeed (finance lease) ama uu ku iibsado hanti lacagteeda loo bixinayo qayb-qayb waxaa loola dhaqmayaa sida faa'idada ka dhalata daymaha iyo dib isaga bixinta qaamaha raasumaal oo la siiyey iibiyaha ama kireeyaha (lessor) uuna bixiyey iibsadaha ama kiyeystaha (lessee), kolba sidii ay xaaladdu u baahato.

2) Lacag-bixinnada shakhsi loo siiyo si waqtiyeeysan (annuity) waxa loola dhaqmayaa sidii faa'idada ka dhalata daymaha iyo dib isaga bixinta qaamaha raasumaal.

3) Faa'idada ka dhalata daymaha iyo dib isaga bixinta qaamaha raasumaal ee lagu sheegay faqradda 1-aad iyo 2-aad waxa loo xisaabinayaa sida in amaahdu ay aheyd amaah isku dhafan (blended) oo leh faa'ido isdulsaaran oo xisaabinteedu tahey lix biloodle ah.

4) Qodobka 50-aad ayaa dejinaya xeerar dheeraad ah oo ku saabsan wareejinta heshiisyada ijaarka maaliyadeed iyo iibka lacagta loo bixiyo qayb-qaybta.

5) Qodobkan dhexdiisa:

b) "amaah isku dhafan (blended loan)" macnaheedu waa amaah:

i. taasoo lacagaha amah-qaataha uu bixinayo ay qeyb ahaan tahay bixinta faa'idada daynta, halka qaybta kalina tahay dib-u-bixinta raasumaalka;

ii. taas oo xisaabinta qeybta faa'idada daynta lagu saleynaayo ra'sumaalka wali aan labixin marka la gaaro wakhtiga lacag bixinta; islamarkaasina

iii. boqolleyda lagu xisaabinaayo faa'idada ay isku mid tahay muddada amaahda;

t) "heshiisyada ijaarka maaliyadeed (finance lease)" waxa uu leeyahay macnaha lagu qeexay xeer-nidaamiye, balse haduusan jirin xeer-nidaamiye, waxa loola jeedaa heshiis ijaar mudo dheer oo loola dhaqmo sida heshiis ijaar maaliyadeed iyada oo la raacayo Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP); iyo

j) "iibka loo bixiyo lacagta qayb-qaybta (instalment sale)" waxa ka baxsan iibka lacagaha la yaryareeyo kaasoo lacagaha dhiman ay la lasocoto dulsaar faa'iido.

## Qodobka 37-aad

## Macaamilaadka Eex la'aanta ah ee Shakhsiyaadka Xiddidka ah

1) Haddii xiriir macaamil ka dhaxeeyo shakhsi dalka deegaan ku ah (a resident person) iyo xiddid Dalka deegaan aan ku ahayn (associated non-resident person), waa in shakhsiga dalka deegaanka ku ah shakhsiyaadku u



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

xisaabiyaa dakhligooda iyo canshuurta ku waajibtay si waafaqsan nidaamka eex la'aanta ah (arm's length standard).

2) Nidaamka eex la'aanta ah (arm's length standard) waxa uu ku waajibinayaa shakhsiyaadka xiddidka ah (associated persons) inay u xisaabiyaan, qeexan, cayimaan, walibana u qoondeeyaan qadarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga si la mid ah habraaca ay u hoggaansamaan shakhsiyaadka kala madax-banaan.

3) Xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexi doona:

b) waxyaabaha ka reebban nidaamka eex la'aanta iyo halbeegyada kale ee la isticmaalayo bedelkiisa. iyo

t) tilmaamaha caalamiga ah ee la raacayo marka la fulinayo nidaamka eex la'aanta oo ay ku jiraan wax ka beddelka ku dhaqanka tilmaamahas.

4) Haddii uu shakhsi ku guuldareysto inuu u hogaansamo faqradda 1-aad ee Qodobkan, waxa ay Wasaaraddu awood u leeyahay inuu ku sameeyo xisaabaadkiisa sixitaanka waafaqsan faqradda 1-aad, iyada oo Wasaaraddu:

b) dib-u-qeexid ku samayn karto macaamilka dhex maray shakhsiyaadka xiddidka ah;

t) dib-u-qeexid ku samayn karto isha iyo nooca kasta oo kamid ah dakhliga, khasaaraha, qaddarta ama lacag bixinta; sidoo kalana

j) u kala qaybin karta ama u kala qoondayn karta kharashaadka iyadoo ku salaynaysa dakhliga (turnover).

## Qodobka 38-aad
## Kala Qaybinta Dakhliga

1) Haddii uu shakhsi isku dayo in uu dakhlikiisa la qaybsado (split) shakhsi kale, Wasaaraddu waxay ka hor tagi kartaa wax kasta oo hoos u dhigaya qadarta canshuurta ee lagu leeyahay shakhsiga, iyada oo soo saaraysa ogeysiis qoraal ah.
2) Ogeysiiska lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkan waxa ay sixi kartaa qaddarta lagu darayo ama laga goynayo marka la xisaabinaayo dakhliga shakhsi kasta ama waxa uu dib-u-qeexis ku samayn karaa isha iyo nooca kasta ee kamid ah dakhliga, khasaaraha, qaddarta ama lacag-bixinta.

3) Qodobka dhexdiisa, isku dayga "kala qaybin dakhli (split income)" waxaa ka mida hanaan kasta oo leh dhammaan sifooyinka soo socda:

b) wareejinta hanti (si toos ah ama si dadban), oo ay ku jirto wareejinta qadar lacageed ee laga helayey hantidaas;

t) wareejiyaha hantida oo ay wali gacanta ugu jirto xaqa sharci ama awoodda u oggolaanaya inuu ka faa'idaysto (xilligas la joogo ama mustaqbalka) hantidaas; iyo

j) sababaha wareejinta hantida oo ay ka mid tahay in la yareeyo canshuurta shakhsiga ku waajibtay

## CUTUBKA V
## HANTIDA IYO QAAMAHA
## QAYBTA I
## XEERARKA ASAASIGA AH

### Qodobka 39-aad
### Xisaabinta Kororka iyo Khasaaraha

1) Kororka dakhli ee shakhsigu ka helo gacan-ka-saarista (disposal) hanti ama qaan waa qaddarta ay wadarta lacagta lagu gaday hantida ama qaantu ka badan tahay qiimaha kharash (cost) ee hantida ama qaantu ku fadhisay wakhtiga gacan-ka-saarista.

2) Khasaaraha shakhsi ka soo gaara gacan-ka-saarista (disposal) hanti ama qaan waa qadarta ay wadarta qiimaha kharash (cost) ee hantida ama qaantu ku fadhiso ka badan tahay wadarta laga helay hantida ama qaanta wakhtiga gacan-ka-saarista (disposal).

### Qodobka 40-aad
### Kharashka Ku-baxa Hanti

1) Iyadoo la raacayo Sharcigan, kharashka (cost) ay shakhsi ugu fadhiso hanti waa wadarta:

b) kharashaadka uu shakhsigu u galay hanashada hantida oo ay ku jiraan, haddii loo baahdo, kharashaadka dhismaha, warshadaynta ama soo saaridda hantida;

t) kharashaadka uu shakhsigu ku bixiyay wax-ka-bedelka, qurxinta, rakibidda, dayactirka ama hagaajinta hantida;

j) kharashaadka uu shakhsigu ku bixiyay gacan-ka-saaridda (disposal) hantida;

x) kharashaadka lama filaanka ah ee uu shakhsigu u galay hanashada iyo

gacan-ka- saaridda hantida; iyo

kh) qaddarta dakhli ee lagu sheegay faqradda 2-aad ee Qodobkan; iyadoo aan qadar lacageed la xisaabin karin wax ka badan hal mar.

2) Qadar dakhli waa:

b) qadarta ay fareyso Qaybta II ee Cutubka III ee Sharcigan in si toos ah loogu daro marka la xisaabinaayo dakhliga shakhsiga, ama waa qaddarta la canshuur dhaafay ama mid canshuurta horay looga soo jaray ee shakhsigu leeyahay; iyadoo

t) ku-dhaqanka faqrad-hoosaadka (b) ee sare ku xusan ay ka dhalatay hanashada hantida ee shakhsiga ama gelista shakhsi kale ee kharashaadka noocoodu yahay kuwa lagu sheegay faqradda (1)(t), (j) ama (x) isaga oo wakiil ka ah shakhsigaas.

3) Kharashka (cost) ku baxay hanti kuma jiraan:

b) kharashaadka gaarka ah ama kharash aan la-tixgelinayn (excluded expense);

t) kharashaadka ay tahay in si toos ah looga gooyo xisaabinta dakhliga shakhsiga;

j) lacagaha lagu bixiyay faa'idada daynta; ama

x) kharashaadka lagu daray kharashka hanti kale.

4) Qaddarta kharash ee la galay ee la xiriirta aaladaha maaliyadeed kama mid noqonayso kharashka (cost) ku baxay hanti kasta oo aan ahayn aaladaha maaliyadeed. Ka hor inta aan lagu darin kharashka (cost) ku baxay aaladaha maaliyadeed, qaddartu waa in ay u qalantaa in lagu daro si waafaqsan faqradda 1-aad, sidoo kalena aysan ahayn mid aan la tixgelinayn si waafaqsan faqradda 3-aad.

5) Qodobkan dhexdiisa, "kharashaadka lama filaan ah" ee uu shakhsigu u galay hanashada ama gacan-ka-saaridda hanti waxa ka mid ah:

b) kharashka xayaysiinta, canshuuraha iyo khidmadaha kala wareejinta iyo kharashaadka kale ee ku baxa kala wareejinta hantida;

t) kharashaadka la xiriira caddaynta, ilaalinta ama difaaca milkiyadda hantida; iyo

j) khidmadaha lagu bixiyo adeegyada ay bixiyaan xisaabiyaasha, wakiilada, xirfadlayda naadada, dallaallada, lataliyaasha, lataliyaasha sharci, xirfadlayda



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

sahanka ama qiimeeynta oo la xiriirta kharashaadka lagu sheegay faqrad-hoosaadka
(b) ama (t) ee faqraddan.

## Qodobka 41-aad
## Qiimaha Badeeco Ganacsi

1) Marka la go'aaminaayo qiimaha (cost) ay leedahay badeeco ganacsi ee uu shakhsi ku ganacsado:

b) lama tixgelinaayo lacagaha ku baxa dayactirka, ama hagaajinta hantida ama xiriirka laleh qiima dhaca hantida qiimodhacda;

t) iyadoo loo hoggaansamaayo faqrada-hoosaadka (b), waa in habka kooba dhamaan kharashka (absorption-cost method) loo istcimaalaa si dhamaan qadarta lacageed ee u-qalanta in lagu daro loogu daro qiimaha badeecada ganacsiga sida ku cad Qodobka 40-aad; iyadoo

j) la tixgelinaayo dib-u-dajin kasta (resetting) oo lagu samayay qiimaha (cost) badeecadda siwaafaqsan faqradda 4-aad ee Qodobka 19-aad.

2) Milkiilaha shay ka mid ah badeecada ganacsiga oo aan si gaar ah loo aqoonsan karin waxa uu dooran karaa in qiimaha (cost) hantida lagu go'aamiyo iyadoo la raacayo habka kala horreynta (first-in-first-out) ama habka qiimaynta celceliska ah (average-cost method). Mulkiilaha ayaa dooran karaa habka la isticmaalayo.

3) Habka lagu doortay faqradda 2-aad ee Qodobkaan waxa lagu bedeli karaa oo keliya ogolaansho qoran oo ay Wasaaraddu bixiso.

4) Qodobkan dhexdiisa:

b) "habka kooba dhamaan kharashka (absorption-cost method)": waxa loola jeedaa Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP) taasoo qiimaha badeecada ganacsiga ay tahay wadarta qiimaha asalka aha ee hantida, kharashaadka tooska ah ee shaqaalaha, iyo qiimaha maamulka shaqada;

t) "habka qiimaynta celceliska ah (average-cost method)": waxa loola jeedaa Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP) taasoo qiimaynta badeecadda ganacsiga lagu salaynayo celceliska la-saxay ee qiimaha dhammaan badeecada ganacsi ee isku nuuca ah ee la haayo;

j) "kharashaadka tooska ah ee shaqaalaha (direct labour costs)": waxa loola jeedaa kharashaadka shakhsigu ku bixiyo shaqaalaha taasoo si toos ah ula

xiriirta soo saaridda badeecadda ganacsi;

x) "qiimaha asalka ah ee hantida (direct asset costs)": waxa loola jeedaa qiimaha uu shakhsi u galay helitaanka hanti noqonaysa badeecadda ganacsi ama qeyb asaasi ah ka ah badeecadda ganacsiga ee lasoo saaray;

kh) “qiimaha maamulka shaqada (factory overhead costs)” waxa loola jeedaa dhamaan kharashaadka uu shaksigu u galay soo saarka badeecadda ganacsiga oo aanay ku jirin kharashaadka tooska ah ee shaqaalaha iyo qiimaha asalka ah ee hantida; iyo

d) "habka kala horreynta (first-in-first-out method)" waxa loola jeedaa Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP) taaso qiimaha (cost) loogu qoondeeyo badeecada isku nooca ah iyadoo lagu salaynaayo fikirka ah in badeecada isku nooca ah loo kala hor iibshay sidii loo kala hor keenay.

## Qodobka 42-aad
## Dheefta Laga-helo Hantida

1) Iyadoo la raacayo Sharcigan, dheefta (proceeds) wakhti gaar ah laga helo hanti uu shakhsi leeyahay waxa loola jeedaa:

b) qadarta uu shakhsigu ku helay milkiyadda hantida oo ay ku jiraan:

i. qadarta laga helay wax ka bedelka ama yareynta qiimaha hantida; iyo

ii. qadarta laga helay hantida oo ay ku jiraan heshiis loo galay dayactiridda iwm; iyo

t) qadarta uu shakhsigu helay ee la xiriirta gacan-ka-saaridda hantida ama xaqqa uu shakhsigu u leeyahay in uu hantidaas ka helo mustaqbalka qadar lacageed ee la xiriirta gacan-ka-saaridda hantida.

2) Dheefta laga helo hantida kuma jiraan lacagaha la canshuur dhaafay, lacag-bixinnada canshuurta horay looga soo jaray, ama wixii aan aheyn badeecad ganacsi, qaddarta sida toos ah loogu darayo xisaabinta dakhliga shakhsiga si waafaqsan Qaybta II ee Cutubka III ee Sharcigan.

## Qodobka 43-aad
## Gacan-ka-saaridda Hantida

1) Iyada oo la raacayo Sharcigan, shakhsiga hantida leh waxa uu gacan-ka-saaray (disposes) hantida:

b) marka shakhsigu lumiyo milkiyada hantida, oo ay kamid tahay marka hantida la iibiyo, lagu bedesho wax kale, la wareejiyo, la qaybiyo, la baabi'iyo, dib loo iibsado, la burburiyo, ay lunto, wakhtigeedii dhaco ama la iska dhiibo;

t) haddii ay dhacdo in shakhsigii hantida lahaa uu meesha ka baxo, oo ay ka mid tahay geeri;

j) haddii ay tahay hanti aan aheyn badeeco ganacsi ama hanti qiima dhacda, marka wadarta dheefta laga helay hantida ay ka adato qiimaha (cost) hantidu ku fadhisay;

x) iyada oo la raacayo Qodobka 65-aad (ganacsiga bankiyada), marka ay hantidu tahay deyn uu shakhsi leeyahay, taasoo qayb ka ah ganacsigiisa, marka shakhsigu:

i. qaaday dhammaan talaabooyinka uu ku xaqiijinayo raadinta lacagta;

ii. si macquul ah u rumaystay in aanay dayntu soo xeroonayn; kadibna

iii. u aqoonsado qaddarka daynta ah inay tahay dayn laga quustay, kana saaro xisaabta ganacsiga;

kh) hadii ay tahay badeeco ganacsi, hanti qiimo dhacda, hanti ra'sumaal ee ganacsi ama hanti maalgashi oo canshuurgal ah, kahor inta uusan shakhsigu u hawlgelin hantida hab doorinaaya sifooyinkii lagu aqoonsanaayey; iyo

d) marka ay dhacaan xaaladaha ku xusan Qodobbada 54-aad iyo 57-aad (shuraakooyin), 63-aad (isbeddelka milkiileyaasha), 65-aad (ganacsiga bankiyada), 78-aad (isbedelka dagenaashaha) iyo 82-aad (xarumaha ganacsi ee joogta ah).

2) Gacan-ka-saaridda hanti waxaa ka mid ah gacan-ka-saaridda qayb hantida ka mid ah (eeg Qodobada 51-aad iyo 52-aad).

## Qodobka 44-aad
## Habka Ku Dabaqida Cutubkan Qaamaha

1) Marka laga go'aaminaayo qiimaha (cost) qaamaha iyo lacagaha dheefta ah ee kasoo xarooda qaamaha ee shakhsi waxa loo raacayaa Qodobada 40-aad iyo 42-aad sida iyada oo qaantu ay la mid tahay hanti oo kale. Waxaa sidoo kale lagu darayaa kuwaan soo socda:

b) marka la joogo qiimaha (cost) qaanta, waxaa lagu darayaa kharashka lagu galay gacan-ka-saarista qaanta; iyo

t) marka la joogo lacagta dheefta ah ee qaamaha, waxaa lagu darayaa qadarta lacageed ee laga helay markii qaanta la galaayey.

2) Iyadoo la raacayo Sharcigan, shakhsiga qaba qaan, waxa uu gacanta-ka-saaraya qaanta:

b) marka shakhsiga ay ka harto qaanta, oo ay ku jirto marka qaanta la wareejiyo, la bixiyo, la baabi'iyo, laga dhaafo ama uu waqtigeedii dhaco;

t) haddii ay dhacdo in shakhsigii qaanta lagu leeyahay uu meesha ka baxo, oo ay ka mid tahay dhimashada shakhsiga, ka hor inta aanu shakhsigu geeriyoon; iyo

j) marka ay dhacaan xaaladaha ku xusan Qodobbada 54-aad iyo 57-aad (shuraakooyin), 63-aad (isbeddelka milkiileyaasha), 78-aad (isbedelka dagenaashaha) iyo 82-aad (xarumaha ganacsi ee joogta ah).

3) Iyadoo la raacayo xeerarka lagu dejin doono xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, xeerarka gaarka ah ee ku xusan Qaybta II ee Cutubk V ee Sharcigan ayaa lagu dabaqayaa qaanta si la mid ah sida loogu dabaqayo hantida, iyada oo la tixgelinaayo duruufaha gaarka u ah qaamaha.

## Qodobka 45-aad
## Sixitaanka, Qiimaynta iyo Magdhawga Lacagaha

1) Iyadoo la raacayo Qodobka 29-aad (sixitaanka xisaabaadka), marka shakhsi uu kharashka ku daro qiimaha (cost) hantida ama qaanta ka dibna uu dib u helo kharashkaas, shakhsigu waa in uu ku daraa qaddartaas lacageed ee uu dib u helay lacagta dheefta ah ee hantida ama qaanta, hadba midda ay khuseeyso.

2) Iyadoo la raacayo qodobka 29-aad (sixitaanka xisaabaadka), marka shakhsi uu qadar lacageed ku daro lacagta dheefta ah ee hanti ama qaan, balse isagoo u

hoggaansamaayo waajibaad sharci uu qaddarkaas lacageed dib u celsho, waa in shakhsigu ku daraa qaddarkaas lacageed ee uu dib u celiyay qiimaha (cost) hantida.

3) Iyadoo la raacayo sixitaan kasta oo lagu sameeyo xisaabaadka oo waafaqsan Sharcigan ee uu kujiro kuwa lagu sheegay Qodobka 35-aad (magdhawga iyo lacagaha soo kabashada), lacagaha magdhawga ah waxaa lagu darayaa lacagta dheefta ah ee hantida ama qaanta oo ay la xiriirto, hadba midda ay khuseeyso.

4) Qodobkan dhexdiisa, "lacagaha magdhowga ah" ee la xiriira hantida ama

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

qaanta waxaa loola jeedaa qaddar uu helay shakhsi ama shakhsi kale oo xidid la ah, taasoo ujeedadeedu tahay in ay magdhaw bixiso ama u taagan:

b) ka soo kabashada qiimaha (cost) dhabta ah ama tan la filayey ama lacagta dheefta ah ee hantida ama qaanta ee la filaayay laakiin aan la helin, hadba siday xaaladdu tahay; ama

u) hoos u dhaca qiimaha hantida ama kor u kac ku yimaada qaanta, hadba siday xaaladdu tahay.

## QAYBTA II
## XEERARKA GAARKA AH

### Qodobka 46-aad
### U Wareejinta Hanti Shakhsi Xiddid ah ama Hadyad Ahaan

1) Iyada oo la raacayo Qodobkan iyo Qodobka 48-aad ee Sharcigan, marka uu shakhsi gacanta-ka-saaro hanti isagoo milkiyadda hantida ku wareejinaya shakhsi ay xiddid yihiin ama u hadiyeeyo shakhsi kale:

b) shakhsiga hantida wareejiyay waxaa loola dhaqmaa in hantida uu gacanta-ka- saaray uu ka helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha markaas suuqa ay ka joogto ama qiimaha saafiga ah ee hantidu ugu fadhisay ka hor inta uusan gacan-ka-saarin, iyadoo marwalba la qaadanaayo labada qiimo midka badan; iyadoo

t) shakhsiga hantida loo wareejiyay loola dhaqmayo sidii in uu galay kharash la mid ah mid lagu hantiyi karo hantidani oo kale.

2) Haddii uu shakhsi gacanta-ka-saaro badeeco ganacsi, hanti qiimo-dhacda, ama hanti ra'sumaal ee ganacsi isagoo milkiyadda hantida ku wareejinaya shakhsiy ay xiddid yihiin, lana soo buuxiyay shuruudaha faqradda 3-aad ee Qodobkan:

b) shakhsiga hantiga lagu wareejiyay waxaa loola dhaqmaa in hantida uu gacanta- ka-saaray uu ka helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha (cost) saafiga ah ee hantidu joogtay ka hor inta uusan gacanta-ka-saarin; iyadoo

t) shakhsiga hantida loo wareejiyana loola dhaqmayo sidii inuu galay kharash la mid ah mid lagu hantiyi karo hantidani oo kale.

3) Sharuuduhu waa:

b) in hantida la wareejiyey qeyb katahey ganacsi shaqeynaya oo loo wareejinayo shakhsi xiddid la ah shakhsiga wareejinaaya, kana koobnaan tahay

dhammaan hantida ganacsigaas;

t) in shakhsiga wareejinaaya ama shakhsiga xiddidka ah uu midkood yahay hay'ad (ama labaduba ay yihiin hay'ad), iyadoo inkabadan sideetan (80%) boqolkiiba qiimaha saamiga ee hay'ada uu si toos ah gacanta ugu haayo shakhsiga kale;

j) in wakhtiga la wareejinaayo hantida:

i. shakhsiga hantida wareejinaaya iyo shakhsiga kale ee xiddidka la ah ay deegan ku yihiin Soomaaliya;

ii. ay hantidu tahay hanti maxalli ah; iyo

iii. shakhsiga xiddidka ah uusan ahayn, ama marka la joogo shuraako xiddid ah (associate partnership), ama mid kasta oo ka mid ah xubnaha shuraakada uusan ahayn sanduuq hawlgab ama urur aan faa'iido doon ahayn ama mid ka faa'iidaysanaya canshuur-dhaafka lagu sheegay Jadwalka Saddexaad ee Sharcigan;

x) in wareejinta ka dib ay hantidu sii tahay hanti maxalli ah; iyo

kh) in shakhsiga hantida wareejinaaya iyo shakhsiga xiddidka la ah ay si wadajir ah qoraal ugu doorteen in la dabaqo faqrada 2-aad ee Qodobkan dhammaadka sanad canshuureedka ee hanti wareejintu dhacayday.

## Qodobka 47-aad
## Gacan-ka-saaridda Hanti Iyadoon La Wareejin

1) Hadii uu shakhsigu gacanta-kaga-saaro hantidiisa qaab ka mid ah nidaamyada lagu sharaxay Qodobbada 43(1)(kh), 57-aad (shuraakooyin), 63-aad (isbeddelka milkiilayaasha) ama 78-aad (beddelka degenaanshaha), shakhsiga waxaa loola dhaqmayaa sidii:

b) in ay ka wareegtay milkiyaddii hantida iyo in hantidii uu gacanta-ka-saaray uu ka helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha suuqa ah ee hantidu ka joogtay marka uu gacanta-ka-saaraayay; iyo

t) inuu isla markiiba dib usoo ceshaday hantidii, isaga oo galaya kharash udhigma kan hantida uu kusoo ceshanayo.

## Qodobka 48-aad
## Wareejinta Hantida Laga Dhinto ama Midda Lammaanaha Is-furay

1) Marka shakhsi geeriyooday hantidiisa lagu wareejinayo wakiil (executor)



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ama dhaxaltooyada shakhsiga geeriyooday:

b) shakhsiga geeriyoodey waxaa loola dhaqmayaa sidii inuu hantida uu kadhintey tahey mid uu gacanta-ka-saaray kana helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha
suuqa eey hantidu ka joogtay waqtiga gacan-ka-saarista hantida (xilliga geerida); iyadoo

t) wakiilka ama dhaxaltooyada, hadba sida ay tahay, loola dhaqmayaa inuu galay kharash la mid ah kharashka lagu hantiyi karo hantidaas oo kale.

2) Haddii, iyada oo qayb ka ah is-afgarad ka dhashay furiinka lammaane, hanti loo kala wareejinayo lammaane isfurey, iyadoo lammaanaha is furay ay si wadajir ah u doortaan in la dabaqo faqraddaan:

b) midka wareejinaaya hantida waxaa loola dhaqmaa in hantida uu wareejiyey uu gacanta-ka-saaray, kana helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha saafiga ah ee hantidu ka joogtay suuqa ka hor inta uusan gacanta-ka-saarin (wareejin);

t) midka loo wareejinaayo hantida waxaa loola dhaqmaa inuu galay kharash la mid ah kharashka lagu hanti karo hantidan mid lamid ah; iyadoo

j) isla marka hantida lala wareego ka dib, hantida loola dhaqmayaa in ay midka loo wareejiyay agtiisa ku leedahay sifo la mid ah tii ay ku lahayd marka ay kujirtay gacanta midka soo wareejiyay ka hor wareejinta.

## Qodobka 49-aad
## Gacan-ka-saarista Hanti Kutimid Ikhtiyaar La'aanta oo Bedelka-leh

1) Faqrada 2-aad ee Qodobkan waxaa la dabaqayaa marka shakhsigu:

b) si aan iskiisa ahayn gacanta-kaga-saaro hanti maxalli ah iyadoo loo maraayo mid kamid ah habraacyada lagu xusay Qodobka 43(1)(b) ee Sharcigan;

t) helo hanti kale oo laga-leeyahay gudaha Dalka oo isla nooca ah oo u badasha hantidii hore muddo lix bilood kahor gacan-ka-saaridda hantida ama hal sano kadib gacan-ka-saaridda hantida; islamarkaana

j) si qoraal ahi ku doorto in lagu dabaqo Qodobkan.

2) Haddii faqradan la dabaqaayo, shakhsiga waxaa loola dhaqmaa sidii:

b) inuu lacag dheef ah ka helay gacan-ka-saaridda hantida taaso lamid ah



JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

i. qiimaha (cost) saafiga ah ee hantidu joogtay ka hor inta aan gacanta-laga- saarin; oo lagu daray

ii. qadarta lacageed, haddiiba ay jirto, ee dheefta laga helay gacan-ka-saarida hantida ay ka badan tahay kharashka loo galay hanashada hantidii lagu bedelay (taasoo la xisaabinayo iyada oo aan la raaceynin Qodobkan); iyo

t) inuu kharashaadka u galay hanashada hantida beddelka ah taaso ay la mid ah:

i. qaddarta lagu sheegay farqad-hoosaadka (b)(i); oo lagu daray

ii. qaddarta lacageed, haddiiba ay jirto, ee kharashka loo galay hanashada hantida bedelka ahi ay ka badan tahay lacagta dheefta ah ee laga helay gacan-ka-saaridda hantida (taasoo loo xisaabinayo iyada oo aan la raaceynin Qodobkan);

3) Xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexayaa xaaladaha ku beddelida hanti maaliyadeed (security) ee shirkad hanti maaliyadeed ee kale ee isla shirkadda ama shirkad kale loo aqoonsanaayo gacan-ka-saaris aan ikhtiyaar loo lahayn. Xaaladahaas waxa ku jiri kara midoobidda shirkadaha, kala-baxa shirkadaha iyo dib-u-habaynta shirkada.

## Qodobka 50-aad

## Wareejinta Hantida ee loo maro Rahanta, Heshiisyada Ijaarka Maaliyadeed iyo Iibka Lacagta Loo Bixiyo Qayb-Qaybta

1) Haddii shakhsi uu rahmo hantidiisa si uu u xaqiijiyo fulinta waajibaadka shakhsi kale ku leeyahay:

b) shakhsiga loolama dhaqmayo sida in uu gacanta-ka-saaray hantida ama qayb kamid ah, balse waxaa loo tixgelinayaa in uu hantida weli leeyahay hase ahaatee ay saarantahay waajibaadka shakhsi kale ku leeyahay (waajibaadka la damaanad qaadayo); sidoo kale

t) shakhsiga kale loolama dhaqmayo sidii inuu hantinaayo hantida ama qayb ka mid ah hantida, balse waxaa loo tixgelinayaa in uu leeyahay milkiyadda waajibaadka la damaanad qaaday.

2) Haddii hanti lagu ijaaro iyadoo la isticmaalayo heshiis ijaar maaliyadeed (finance lease), ijaaraha waxaa loola dhaqmayaa in uu milkiyadda hantida ku wareejinaayo ijaartaha.

3) Iyadoo la raacayo Qodobka 46-aad (u wareejinta hanti shakhsi xiddid ah), haddii uu shakhsi wareejiyo hanti isagoo isticmaalaya iibka loo bixiyo lacagta qayb-qaybta (instalment sale) ama heshiis ijaar maaliyadeed:

b) shakhsiga waxaa loola dhaqmayaa sidii in uu hantidii la wareejiyey ka helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha suuqa ee hantidu ka joogtay ka hor inta aan la wareejin; iyadoo

t) shakhsiga lagu wareejiyay hantida loola dhaqmaayo sidii in uu galayo kharash la mid ah kan lagu hantinayo hantidas oo kale.

4) Haddii ijaartaha ku jira heshiis ijaar maaliyadeed uu dib ugu soo celiyo ijaaraha hantida ka hor inta aysan milkiyaddu u wareegin ijaartaha (marka laga reebo xaaladaha lagu qeexay faqradda 2-aad), ijaartaha waxaa loola dhaqmayaa in uu milkiyadda hantida dib ugu wareejiyay ijaaraha.

5) Qodobkan dhexdiisa, erayada "heshiis ijaar maaliyadeed" iyo "iibka loo bixiyo lacagta qayb-qaybta (instalment sale)" waxa ay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 36-aad ee Sharcigan.

## Qodobka 51-aad
## Gacan-ka-saaridda Ka Dhalata Wareejinta Hantida

1) Iyadoo la raacayo Qodobka 50-aad (wareejinta hantida ee loo maro rahanta iwm), haddii xuquuqo ama waajibaad la xiriira hanti uu shakhsi leeyahay lagu wareejiyo shakhsi kale, iyadoo loo maraayo habraacyada ay kamid yihiin ijaarka hanti ama qayb hanti kamid ah, markaasi:

b) haddii xuquuqahaa ama waajibaadkaasu yihiin kuwo joogta ah, shakhsiga hantida lahaa wareejinta kahor waxaa loola dhaqmayaa in uu gacantiisa-ka-saaray qayb ka mid ah hantida, balse loolama dhaqmayo in uu hantinayo hanti cusub ama galayo qaan cusub; iyadoo

t) haddii xuquuqaha ama waajibaadku ay yihiin kuwo ku-meel-gaar ah ama shuruudeysan, shakhsiga loolama dhaqmayo in uu gacantiisa-ka-saaray hantida ama qaanta, balse waxa loola dhaqmayaa in uu hantinayo hanti cusub ama galayo qaan cusub, hadba siday xaaladdu tahay.

2) Xuquuqda iyo waajibaadka waxa loo tixgalinayaa in ay joogto yihiin haddii ay u badan tahay in ay sii jirayaan inta hantidu waxtar leedahay ama, ugu yaraan konton
(50) sano.

## Qodobka 52-aad
## Ukala Qeybinta Kharashaadka iyo Lacagaha Dheefta ah Hantida Gacanta- laga-saaray

1) Marka uu shakhsi isku wakhti hal ama in ka badan oo hanti ah ku helo habraaca wareejinta ama iyadoo qayb ka ah hannaan hanti wareejin, kharashka ku baxay helidda midkasta oo hantida katirsan waxaa loogu kala qoondaynayaa hantida dhexdeeda iyada oo loo raacayo qiimaha suuqa uu ka joogay midkasta wakhtiga lala soo wareegaayay hantida.

2) Marka uu shakhsi isku wakhti hal ama in ka badan oo hanti ah uu gacantiisa-ka- saaro isagoo maraaya habraaca wareejinta ama iyadoo qayb ka ah hannaan hanti wareejin, lacagta dheefta ah ee laga helay gacan-ka-saarista midkasta oo hantida katirsan waxaa loogu kala qoondaynayaa hantida dhexdeeda iyada oo loo raacayo qiimaha suuqa uu ka joogay midkasta wakhtiga gacanta-laga-saarayay hantida.

3) Haddii shakhsi hanti leh uu gacantiisa-ka-saaro qayb ka mid ah hantida, qiimaha (cost) saafiga ah oo ay hantidu lahayd ka hor inta aanu gacantiisa-ka-saarin waxaa loo kala qaybinayaa qaybta hantida kamida ee gacanta-laga-saaray iyo qeybta hartay iyada oo la raacayo qiimaha suuqa ay ka joogeen kadib islamarka gacanta-laga-saaro.

## Qodobka 53-aad
## Xeerar Gaar ah oo Dheeraadka ah

Xeer-nidaamiyeyaal ayaa lagu qeexayaa xeerarka gaarka ah ee dheeraadka oo lagu dabaqi karo xisaabinta hantida iyo qaamaha oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, gacan-ka-saarista hantida ka dhalata midoowga shirkadaha iyo bixinta saamiyada iyadoo aan lagu beddelaynayn lacag caddaan ah.

# CUTUBKA VI
# XEERARKA NIDAAMINAAYA NOOCYADA SHAKHSIYAADKA
# QAYBTA I
# SHURAAKOOYINKA

## Qodobka 54-aad
## Mabaadi'da Canshuurta

1) Dakhliga kasoo xarooda ganacsiga shuraakada iyo khasaarihiisa waxa loogu qaybiynayaa xubnaha shuraakada si waafaqsan Qaybtan I ee Cutubkan VI. Tani waxa loola jeedaa shuraakada ganacsi:

b) waajib kuma ahan inay canshuur ka bixiso dakhligeeda canshuurgalka ah si waafaqsan Qodobka 9(1)(b), xaqna uma leh wax tixgelin canshuur ah (credit) oo la xiriira dakhligaas; balse

t) waxa waajib ku ah:

i. in ay canshuur ka bixiso dakhliga kaasoo canshuurta kajarista horay loogu soo sameeyay, kaas oo ay hesho si waafaqsan Qodobka 9(1)(t);

ii. in ay canshuurta ka reebto lacagaha ay shuraakada bixiso si waafaqsan Qaybta II ee Cutubka IX; iyo

iii. in ay soo gudbiyo xisaab canshuureedka si waafaqsan Qodobka 101-aad ee Sharcigan.

2) Lacagaha ay helaan ama kharashaadka ay u galaan xubnaha shuraakada si wada jir ah ama si guud oo la xiriira hawlaha shuraakado ku hawlan tahay waxa loola dhaqmayaa sida in lacagtaasi ay heshay ama kharashkaasi ay gashay shuraakada, oo looma tixgelinayo inay tahay mid ay heleen ama galeen xubnaha shuraakada.

3) Hantida ay xubnaha shuraakadu si wadajir aha ama si guud u leeyihiin (oo uu ku jirto sumcadwanaaga) iyo qaanta xubnaha shuraakadu si wadajir aha ama si guud u qabaan oo la xiriira hawlaha shuraakado ku hawlan tahay waxa loola dhaqmayaa sida in hantidaas ay leedahay ama qaantaas ay qabto shuraakada, oo looma tixgelinayo inay tahay mid ay leeyihiin ama qabaan xubnaha shuraakada. Waxaa intaasi dheer, hantida iyo qaamaha waxa loola dhaqmayaa sidii:

b) haddii ay tahay hanti, inay shuraakadu heshay milkiyadda marka ay milkiyada hantidaasi ugu wareegto xubnaha shuraakada si wada jir ah ama si guud;

t) haddii ay tahay qaan, inay shuraakadu gashay marka qaanta loogu yeesho xubnaha shuraakada si wada jir ah ama si guud; iyadoo islamarkaana

j) in shuraakadu gacanta-ka-saartay marka milkiyada hantida ama qabista qaanta si wada jir ah ama si guud uga wareegto xubnaha shuraakada, hadba sida xaalku yahay.

4) Iyadoo loo hoggaansamaayo qeybaha kale ee Sharcigan, heshiisyada u dhexeeya shuraakada iyo xubnaheeda waxa lasiinayaa tixgelinta ay mudanyihiin, marka laga reebo kuwaan soo socda, kuwaas oo xisaabta lagu darsanaayo marka la go'aaminayo saamiga ay xubin ku leedahay shuraako si waafaqsan Qodobka 56(1):

b) amaahda uu xubin shuraakada katirsan siiyey shuraakada iyo faa'ida ka dhalatay dayntaas ee lasiiyay xubinta amaahda bixisay; iyo

t) adeegyada uu xubin katirsan shuraakada siiyay shuraakada (oo ay ka mid tahay inuu u shaqeeyay) iyo khidmad adeeg ama dakhli kasta oo shaqadaas darteed lagu siiyo.

## Qodobka 55-aad
## Dakhliga iyo Khasaaraha Shuraakada

1) Dakhliga shuraakada ee sanad canshuureed waa dakhliga shuraakada ka soo gala ganacsiga sanadkaas gudihiis (ee Qodobka 13).

2) Khasaaraha shuraakada ee sanad canshuureed waa wadarta khasaaraha aan laga jarin dakhliga shuraakada ee kasoo gaara ganacsiga sanadkaasi gudihiisa (eeg Qodobka 23(4)). Khasaaraha aan laga jarin dakhliga shuraakada waxa uu ka baxayaa inuu ahaado khasaare shuraako marka loo kala qoondeeyo xubnaha shuraakada si waafaqsan Qodobka 56(1).

## Qodobka 56-aad
## Canshuurta Xubnaha Shuraakada ah

1) Marka la xisaabinayo dakhliga xubin katirsan shuraakada ka soo gala shuraakada sanad canshuureed gudahiisa:

b) waxa lagu darayaa saamiga ay xubinta katirsan shuraakada ku leedahay dakhliga kasta ee shuraakada sanadkaas; ama

t) waxa laga goynayaa saamiga ay xubinta katirsan shuraakada ku leedahay khasaara kasta ee shuraakada sanadkaas.

2) Qaybta u kuleeyahay shuraako xubin katirsan shuraako waa hanti la canshuur dhaafay, iyadoo khasaaraha iyo faa'idada ka dhasha gacan-ka-saarista qaybta u kuleeyahay shuraako xubin katirsan shuraako aan la tixgelinayn.

3) Dakhliga ama khasaaraha shuraako ee loo kala qoondeeyo xubnaha katirsan shuraakada sida ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan:

b) sidooda ayay ahaanayaan nooc ahaan iyo il dakhli ahaanba;

t) waxa loola dhaqmayaa sidii lacag uu helay ama khasaare uu galay xubin katirsan shuraakada dhammaadka sanad canshuureedka; sidoo kalana

j) waxa loogu kala qoondaynayaa xubnaha katirsan shuraakada iyadoo lagu salaynaayo saamiga xubin kasta kuleedahay shuraakada, haddii aysan Wasaaraddu go'aamin sidaas si ka duwan.

4) Canshuurta loo bixiyay si waafaqsan Sharcigan ama canshuur dakhli ee shuraakadu ku bixisay dibada ama loo tixgeliya inay shuraakadu dibbada ku bixisay oo la xiriirta dakhliga shuraakada waxaa:

b) loogu qoondeeynayaa xubnaha katirsan shuraakada iyadoo lagu saleeynaayo saamiga xubin kasta kuleedahay shuraakada;

t) loo qoondeeynayaa waqtiga dakhliga shuraakada loo aqoonsaday inay heleen xubnaha katirsan shuraakada si waafaqsan faqradda (3)(t) ee Qodobkan; sidoo kalan

j) loola dhaqmayaa sidii in ay bixiyeen xubnaha katirsan shuraakada.

5) Iyada oo la raacayo Qodobka 54(4) (heshiisyada u dhexeeya shuraakada iyo xubnaheeda), marka la dhaqan-gelinaayo Qodobkan, "saamiga xubin katirsan shuraako" waxa uu la'eg yahay boqolkiiba inta xubintu kuleedahay shuraakada.

## Qodobka 57-aad
## Isbadalka Xubnaha Shuraakada ah

1) Marka xubin katirsan shuraakada gacanta-ka-saaro saamigiisa shuraakada gabi ahaan ama qayb:

b) haddii saamiga gacanta-laga-saaray uu ka badan yahay boqolkiiba toban (10) ee saamiyada shuraakada, shuraakada waxa loola dhaqmayaa sidii in ay gacanta-ka- saartay qayb hantida shuraakada (oo uu ku jiro sumcadwanaag) iyo qaanteeda kamid ah oo u dhiganta saamiga gacanta-laga-saaray; iyadoo



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t) haddii saamiga gacanta-laga-saaray uu ka yaryahay boqolkiiba toban (10), shuraakada loolama dhaqmayo in ay gacanta-ka-saartay wax hanti ama qaan ah.

2) Marka la go'aaminayo in xadka toban (10) boqolkiiba ee ku cad farqadda (1)(b) la gaaray, waxaa laisku geeynaya wadarta dhammaan gacan-ka-saarrada (disposals) ee xubinta katirsan shuraakadu sameeyay saddexdii sano ee la soo dhaafay.

3) Faqradda 1-aad ee Qodobkan lama dabaqaayo marka ay tahay in lagu dabaqo Qodobka 63-aad (isbeddelka milkiyadda) isbeddelka ku yimaada milkiyadda saamiyada shuraakada. Haddii aan la dabaqin Qodobka 63-aad (isbeddelka milkiyadda), shuraakadu waa ay sii jiraysaa xitaa hadii uu isbeddel ku yimaado xubnaheeda.

## QAYBTA II
## AMMAANNO
### Qodobka 58-aad
### Canshuurta Amaanooyinka

1) Amaanada waxa ku waajibtay canshuur ka gooni ah tan ku waajibtay ka-faa'iideystayaasha amaanada. Si gooni gooni ah ayaa loo xisaabinayaa dakhliga amaannooyinka iyadoon loo eegayn in amaanooyinku wadaagan amaano-haye-yaal.

2) Amaanada waxa loo canshuurayaa sidii hay'ad oo kale. Balse, amaanooyinka shakhsiyaadka karti la'aanta ah waxa loo canshuurayaa sidii iney tahay qof shakhsi ah. Marka la dabaqaayo faqradaan, shakhsiyaad aan qaan-gaarin loolama dhaqmaayo sidii shakhsiyaad karti la'aan ah.

3) Lacagaha soo galay amaanada ama amaano-hayaha (ee aan ahayn wakiilada caadiga ah "bare agent") iyo kharashaadka ay galeen waxaa loola dhaqmayaa in ay heshay ama ay gashay amaanada, oo aysan helin ama gelin shakhsi kale. Xeerkan waxaa la dabaqayaa iyada oo aan loo eegayn in:

b) lacagta loo helay ama loo galay iyadoo shakhsi kale wakiil laga yahay; ama

t) shaksi kale uu xaq u leeyahay lacagtaas ama dakhliga kadhashay lacagtaas.

4) Hantida ay leedahay amaano ama amaana-haye (ee aan ahayn wakiilada caadiga ah) iyo deymaha ay qabaan waxaa loola dhaqmayaa sidii in ay leedahay ama lagu leeyahay amaanada, oo uusan lahayn ama lagu lahayn shakhsi kale.

5) Iyada oo loo hoggaansamaayo qaybaha kale ee Sharcigan, heshiisyada u dhaxeeya amaanada iyo amaana-hayaheeda ama ka-faa'idaystayaasheeda waan la aqoonsanayaa.

6) Marka la dabaqaayo Qodobkan, amaano-haye waxaa loo aqoonsanayaa wakiil caadi ah (bare agent) marka ay gacanta ku hayaan hantida oo keliya, oo aysan saarnayn masuuliyada aan ahayn in ay hantida ku wareejiyaan ka-faa'idaystaha marka uu dalbado iyo inay u maamulaan hantida iyagoo raacaya tilmaamaha ka- faa'idaystaha.

## Qodobka 59-aad
## Canshuurta Ka-faa'idaystayaasha

1) Lacaga-bixinnada ay:

b) amaanooyinka Dalka degaan ku ah siiyaan ka-faa'idaystayaashooda waxaa laga dhaafayaa canshuurta; iyadoo

t) amaanooyinka Dalka aan degaan ku aheyn siiyaan ka-faa'idaystayaashooda waxaa lagu darayaa marka la xisaabinaayo dakhliga ka-faa'idaystayaashooda, waxaana loona canshuuraayo si waafaqsan Sharcigan.

2) Saamiga uu leeyahay ka-faaiidayste ee:

b) amaano Dalka degaan ku ah waa hanti la canshuur dhaafay, iyadoo faa'idada iyo khasaaraha ka dhasha gacan-ka-saarida saamigaas aan la aqoonsanayn; iyadoo

t) amaano aan Dalka degaan ku aheyn, ma aha hanti la canshuur dhaafay, iyadoo faa'idada iyo khasaaraha ka dhasha ka dhasha gacan-ka-saarida saamigaas lagu daraayo marka la xisaabinaayo dakhliga ka-faaidaystaha.

# QAYBTA III
# SHIRKADAHA



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 60-aad
## Canshuurta Shirkadaha

1) Shirkad kasta waxaa ku waajibtay canshuur gooni ka ah midda ku waajibtay saamilaydeeda.

2) Lacagaha iyo kharashaad ay si wada jir ah ama si guud u helaan ama u galaan maareeyayaasha ama saamilayda iyagoo fulinaaya u jeedooyinka shirkad aan lahayn shakhsiyad khaanuuni ee u gaar ah (eeg Qodobka 3(2)(j)(i)(T))) waxaa loola dhaqmayaa sidii in lacagtaas ama kharash ay heshay ama gashay shirkaddaas, ee uusan helin ama gelin shakhsi kale.

3) Hantida iyo qaanta ay si wadajir ah ama si guud ah u leeyihiin ama loogu leeyahay maareeyayaasha ama saamilayda, ee loogu talagalay ujeeddooyinka shirkad aan

lahayn shakhsiyad khaanuuni ee u gaar ah (eeg qodobka 3(2)(j)(i)(T)) waxa loola dhaqmayaa sidii in ay leedahay ama lagu leeyahay shirkaddaas, ee uusan lahayn ama lagu lahayn shakhsi kale.

4) Haddi qaab faai'da wadaag ah (joint venture) ay dhinacyo badan ku galayaan, dhinacyadaas ku noqoneysa inay ku fuliyaan shirkad u gaar ah oo sharciyaddeedu dhamaystirantahay.

5) Iyadoo la raacayo qaybaha kale ee Sharcigan, heshiisyada udhaxeeya shirkad iyo maareeyayaasheeda ama saamilaydeeda waa la aqoonsanayaa.

## Qodobka 61-aad
## Canshuurta Saamilayda

1) Faa'idooyinka saamiyada ee:

b) shirkad Dalka degaan ku ahi u qaybiso:

i. shirkad kale oo Dalka deegan ku ah, waxaa laga dhaafayaa canshuurta, haddii shirkada kale ay ku leedahay milkiyad mug leh (substantial participation) shirkadda faa'idooyinka qaybinaysa, isla marka aan la qaybin ka hor;

ii. shakhsi Dalka dagaan ku ah ama shakhsi Dalka degaan ku ahayn waa

la canshuurayaa, iyadoo canshuurta looga jaraayo si kama dambays ah kahor inta aan la siin shakhsiyaadka; iyadoo

iii. faa'iidada saamiga ee la siiyo saamilayda aan hoos imaan faqrad hoosaadka (b)(i) iyo (b)(ii) ee faqradan lagu daraayo xilliga la xisaabinaayo dakhliga saamilayda; sidoo kalan

iv. faai'idada saamiyada shirkad ama shakhsi Dalka degaan ku ah laga siiyo saamiga shirkad Dalka degaan ku ah lagama qaadayo wax canshuur oo dheeri ah.

t) shirkad aan Dalka degaan ku aheyn qaybiso waxaa lagu darayaa marka la xisaabinaayo dakhliga saamilayda.

2) Saamiyda shirkad:

b) marka shirkad deegan ku ah Dalka ay ku leedahay milkiyad mug leh (substantial participation) shirkad kale ee deegaan ku ah Dalka, waa hanti la canshuur dhaafay, iyadoo faa'idada iyo khasaaraha ka dhasha gacan-ka-saarista saamiyadaas aan la aqoonsanayn; iyadoo

t) haddii xaalku ka duwanyahay sida lagu qeexay faqrad-hoosaadka (b) ee kore, aysan ahayn hanti la canshuur-dhaafay, iyadoo faa'idada iyo khasaaraha ka dhasha gacan-ka-saarista saamiyadaas lagu daraayo xilliga la xisaabinaayo dakhliga saamilayda.

3) Qodobkan gudihiisa, "milkiyad mug leh (substantial participation)" ee jirta waqti gaar ah waxaa loola jeeda milkiyadda saamiyada shirkad (shirkadda laga hadlayo) oo ay leedahay shirkad kale, halka:

b) milkiyadda mugta leh ay la egtahay:

i. labo iyo toban dhibac shan (12.5%) boqolkiiba ama in ka badan ee qiimaha saamiyada shirkadda laga hadlayo, marka laga reebo saamiyada dib loo ceshan karo; oo ay wehliso

ii. koontarool, si toos ah ama si dadbanba, oo ku aadan boqolkiiba labo iyo toban dhibac shan boqolkiiba (12.5%) ama in ka badan awoodda codbixinta ee shirkadda laga hadlayo; iyadoo

t) milkiyaddaas mugta leh ay ahayd mid si joogta ah u jirtay muddo saddex boqol lixdan iyo shan (365) maalmood ah, kahor isla marka aan la qaybin faa'idada saamiga ama aan gacanta-laga-saarin saamiyada.

# QAYBTA IV
# QODOBADA GUUD EE KHUSEEYA HAY'ADAHA

## Qodobka 62-aad
## Isku-wareejinta Hantida ee u Dhaxeeysa Hay'adaha iyo Xubnahooda

1) Iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 46-aad (u wareejinta hanti shakhsi xiddid ah), hadii iyadoo loo maraayo habka wareejinta, hanti gacanta-laga-saaro iyadoo hay'ad ay ku wareejiso mid kamid ah xubnaheeda ama xubin ku wareejiyo hay'adda:

b) wareejiyaha hantida waxa loola dhaqmayaa sidii in uu lacag ka helay gacan-ka- saaridda hantida taas oo udhiganta qiimaha suuqa ee hantidu ka joogtay kahor isla marka aan gacanta-laga-saarin; iyadoo

t) loo wareejiyaha hantida loola dhaqmayo sidii in uu galay kharashaadka lagu sheegay farqad-hoosaadka (b) ee hanashada hantida.

## Qodobka 63-aad
## Isbeddelka Milkiyadda

1) Haddii milkiyadda dhabta ah (underlying ownership) ee hay'ad ku timaado isbeddel ka badan boqolkiiba kontan (50%) marka lala barbardhigo siday ahayd saddexdii sanadood ee lasoo dhaafay ("isbeddelka milkiyadda"), hayadda waxa loola dhaqmayaa sidii in ay gacanta-ka-saartay dhammaan hantidii ay lahayd iyo qaantii lagu lahaa, kahor isla marka uusan dhicin isbeddelku.

2) Isbeddelka milkiyadda kadib, hayadda looma ogola in ay:

b) ka goyso faa'idada ka dhalata daymaha ama qaddar lacageedyada laga soo raray sandihii hore si waafaqsan Qodobbada 18(3) ama 22(2), kuwaas oo ay markii hore gashay hayadda inta uusan dhicin isbeddelka ka hor;

t) goyso khasaaraha ku xusan Qodobbada 23(1) ama 24(1) kaas oo ay gashay hayadda inta uusan dhicin isbeddelka ka hor; ama



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

j) haddii ay dhacdo in hay'addu, ka hor isbeddelka, ay qadar lacageed ku dartay xisaabinta dakhlikeeda ayadoo raaceysa Qodobka 28 (4) ama Qodobka 29(2) ama Qodobbada 29(4) iyo 29(5), looma ogola, isbeddelka kadib, in ay soo sheegato in loo sameeyo lacag-goyn waafaqsan Qodobbada lasoo sheegay.

3) Haddii isbeddel milkiyadeed ku dhaco hay'ad sanad canshuureed gudihiisa, qaybaha sanadka ee ka horreeya isbeddelka iyo kuwa ka dambeeyay isbeddelka waxa loola dhaqmayaa sida sanado canshuureed kala madaxbannaan.

4) Shuraakadaha ama shirkaddaha aan lagu dabaqayn Qodobkani waxa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

# CUTUBKA VII
# HAWLAHA GAARKA AH
## QAYBTA I
## HOWLAHA QODISTA MACDANTA IYO SHIDAALKA
### Qodobka 64-aad
### Isticmaalka Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa

Habka Sharcigani loogu dabaqaayo hawlaha la xiriira khayraadka dhulka hoostiisa iyo kuwa la xiriira, waxaa go'aaminiyaa Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa ee markaas dhaqan-galka ah.

## QAYBTA II
## BANGIYADA IYO CEYMISKA
### Qodobka 65-aad
### Ganacsiga Bankiyada

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo shakhsiyaadka kujira ganacsiyada bankiyada. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Marka la dabaqaayo Sharcigani:

b) hawlaha shakhsiga ee la xiriira ganacsiyada bankiyada waxa loola



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

dhaqmayaa sidii in ay yihiin ganacsiyo ka madax-banaan ganaci ama hawl kasta oo kale ee uu shakhsi qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha sanad canshuureed shakhsi ka soo gaara ganacsiyadiisa banki waxa loo xisaabinayaa si gaar ah; iyo

j) amaahyada la bixiyo inta lagu guda jiro hawlaha caadiga ah ee ganacsiga bankiyada waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin hanti u taalla bankiga (current asset), iyada oo loo qadarinaayo badeecada ganacsigaas.

3) Si loo dabaqo Qodobka 19-aad, marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala ganacsiga bankiyada sanad canshuureed, waa in uu shakhsigu raacaa xeerarka khuseeya ee uu dejiyay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo loogu talagalay amaahda aan shaqaynayn (non-performing loans), oo ay ka mid yihiin:

c) in laga gooyo qiimo dhaca (write downs) ku yimaada amaahda aan shaqaynayn; iyo

t) in lagu daro dakhliga, wax-ku-darid kasta (add backs) oo la xiriirta qiimo dhacyadaas. Haddii lacag goyn ama ku darid la sameeyo, qiimaha amaahda aan shaqaynayn waa in laga dhigaa qiimiha la saxay.

4) Xadidaada ku xusan Qodobka 22(1) (kala soocidda marka ay timaado Aaladaha Maaliyadda) laguma dabaqayo deymaha la helay ama daymaha la galey inta lagu guda jiray ganacsiga caadiga ah ee bankiyada.

5) Haddii shakhsi kujira ganacsi banki uu ka saaro xisaabaadka bankiga dayn laga qabo isagoo u tixgelinaa inay tahay deyn laga quustay, si waafaqsan xeer-nidaamiyaasha gaarka ee la xiriira arrimahan ee uu soo saaray Bankiga Dhexe ee Soomaaliya:

d) shakhsigu waxaa loola dhaqmaa sidii in uu gacanta-ka-saaray daynta uu lahaa; iyadoo

t) shakhsigu soo codsan karo lacag goyn waafaqsan Qodobka 21-aad ee la xiriirta khasaaraha ka dhasha hantida ra'sumaal ama Qodobka 29-aad oo la xiriirta sixitaanka xisaabaadka, hadba midka ku habboon.

6) Qodobkan dhexdiisa, ganacsi banki waxa loola jeedaa ganacsiga hay'ad

maaliyadeed oo qabata hawlo banki, taaso ku qabata hawlahaa banki si waafaqsan shatti loo bixiyaya si waafaqsan Sharciga Hay'addaha Maaliyadda ee dhaqan-galka ah.

## Qodobka 66-aad
## Ganacsiga Caymiska Guud

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo shakhsiyaadka kujira ganacsiyada caymiska guud. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Marka la dabaqaayo Sharcigani:

c) hawlaha shakhsiga ee la xiriira ganacsiyada caymiska guud waxa loola dhaqmayaa sidii in ay yihiin ganacsiyo ka madax-banaan ganaci ama hawl kasta oo kale ee uu shakhsi qabto; iyadoo

t) dakhliga ama khasaaraha sanad canshuureed shakhsi ka soo gaara ganacsiyadiisa caymiska guud loo xisaabinayo si gaar ah.

3) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi ka soo gala sanad canshuureed ganacsiga caymiska guud, waxa lagu darayaa dakhliyadan soo socda (oo ay lajiraan qaddarta kale ee lacageed ee Sharcigani waajibiyo in lagu daro):

b) lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee caymiyuhu helo sanadka gudihiisa (oo ay ku jiraan lacagaha laga helo dib-u-cayminta) isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska; iyo

t) dheefta ceymiska ee shakhsigu sanadka gudihiisa ka helo qandaraas dib-u- caymin oo daboolaya khataraha ka imaan kara qandaraasyada caymiska ama dib-u- caymiska ee shakhsigu galay isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska.

4) Iyada oo la raacayo Qodobka 16-aad (xadka lacag goynta), marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala sanad canshuureedka gudahiisa ganacsiga ceymiska guud, waxa laga goynayaa lacagaha soo socda (oo qaddartii kale ee lacageed ee uu Sharcigani waajibiyo in la gooyo):

c) dheefta caymiska (proceeds) ee uu shakhsigu sanadka gudihiisa u bixiyay

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

ceymiye ahaan (oo ay ku jirto dheefta lagu bixiyay dib-u- caymin) isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska; iyo

t) lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee sanadka dhexdiisa shakhsigu ku bixiyey heshiis kasta oo dib-u-caymin ah oo daboolaya khataraha ka imaanaya qandaraasyada caymiska ama dib-u-cayminta, isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska.

5) Si waafaqsan Qodobka 28-aad (hab-xisaabeedka muteysashada), dheefta caymiska ee uu shakhsigu galay si waafaqsan doorkiisa caymiye guud ahaan waa in la bixiyo (iyadoo ay dhici karto in lacag goyn loo saameeyo si waafaqsan faqradda (4)(b) ee Qodobkan) marka shuruudaha soo socda la buuxiyo:

d) marka ay dhacaan dhammaan dhacdooyinka go'aaminaya qaanta; walibana

t) dheefta caymiska loo goyn karo si waafaqsan Mabaadi'da Xisaabaadka Sida Guud La'iskula Ogol Yahay (GAAP).

6) Wax lacag goyn ah looma samayn karo lacag loogu talagalay khatar aan wali dhicin (unexpired risks) ama kayd lacageed kale oo loogu talagalay ganacsiga caymiska guud.

7) Qodobkan dhexdiisa, "caymis guud" waxa loola jeedaa caymis kasta oo aan ahayn caymis mudo dheer ah.

## Qodobka 67-aad
## Ganacsiga Caymiska Muddada Dheer

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo shakhsiyaadka kujira ganacsiyada caymiska muddada dheer. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Marka la dabaqaayo Sharcigani:

b) hawlaha shakhsiga ee la xiriira ganacsiyada caymiska muddada dheer waxa loola dhaqmayaa sidii in ay yihiin ganacsiyo ka madax-banaan ganaci ama hawl kasta oo kale ee uu shakhsi qabto; iyadoo

t) dakhliga ama khasaaraha sanad canshuureed shakhsi ka soo gaara ganacsiyadiisa caymiska muddada dheer loo xisaabinayo si gaar ah.

3) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi ka soo gala sanad canshuureed guda hiisa ganacsiga caymiska muddada dheer, waxa laga saaraya dakhliyadan soo socda, mana ahan dheef laga helay hanti ama qaan toona:

b) lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee caymiyuhu helo (oo ay ku jiraan lacagaha laga helo dib-u- cayminta) isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska; iyo

t) dheefta ceymiska ee shakhsigu ka helo qandaraas dib-u-caymin oo daboolaya khataraha ka imaan kara qandaraasyada caymiska ama dib-u-caymiska ee shakhsigu galay isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska.

4) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ka soo gala sanad canshuureedka gudahiisa ganacsiga ceymiska muddada dheer, lacagaha soo socda lagama goynayo, loogumana darayo qiimaha hantida ama qaanta:

b) dheefta caymiska (proceeds) ee uu shakhsigu u bixiyay ceymiye ahaan (oo ay ku jirto dheefta lagu bixiyay dib-u- caymin) isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska; iyo

t) lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee shakhsigu ku bixiyey heshiis kasta oo dib-u-caymin ah oo daboolaya khataraha ka imaanaya qandaraasyada caymiska ama dib-u-cayminta, isagoo ku guda jira ganacsigiisa caymiska.

## Qodobka 68-aad
## Dheefta Caymiska

1) Si waafaqsan farqadda (2) ee Qodobkan iyo Qodobada 66-aad (caymiska guud) iyo 67-aad (caymiska muddada dheer), marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi uu ka helay, sida loola dhaqmayo dheefta caymiska uu shakhsigu helay waxa loo go'aaminaya si waafaqsan Qodobka 35-aad (magdhowga) ee Sharcigan.

2) Si waafaqsan Qodobbada 66-aad (caymiska guud) iyo 67-aad (caymiska muddada dheer), dheefta caymiska muddada dheer ee la siiyo la-ceymiyaha ama haddii uu la- ceymiyuhu dhinto qaraabadiisa, taas oo loo bixiyo si

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

waafaqsan heshiis caymis mudda dheer, waxaa:

b) haddii dheefta ceymiska uu bixiyay ceymiye Dalka deegaan ku ah, laga dhaafay canshuur marka ay gasho gacanta la-ceymiyaha; iyadoo

t) haddii dheefta ceymiska uu bixiyo caymiye aan Dalka degaan ku ahayn, lagu darayaa xisaabinta dakhliga la-ceymiyaha, balse waxaa lagu darayaa oo kaliya lacagta dheeraadka ah ee uu ka helo caymiska muddada dheer.

3) Qodobkan dhexdiisa, "lacagta dheeraadka ah ee la-ceymiyuhu ka helayo caymiska muddada dheer" waxa loola jeedaa farqiga siyaadada ah ee udhaxeeya lacagta uu ku iibsaday caymiska (premium) iyo dheefta caymiska ee uu ka helay caymiyaha.

## QAYB III
## KAYDKA HAWLGABKA

### Qodobka 69-aad
### Sanduuqyada Hawlgabka ee La Aqoonsaday

1) Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa qeexi doona xaalada iyo shuruudaha ay Wasaaraddu ugu aqoonsanayso sanduuq hawlgab oo deegan ku ah Dalka in uu yahay sanduuq hawlgab ee la aqoonsaday. Xeer-nidaamiyahan ayaa sidoo kale qeexaya habraaca aqoonsiga lagala laabanaayo sanduuq horay loo aqoonsaday.

2) Wasaaraddu waxa ay ku aqoonsanaysaa sanduuq howlgab go'aan gaar ah oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 13-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (ama wax- kabeddelkiisa) kaas oo xaqiijinaaya in sanduuqu u hoggaansanyahay shuruudaha lagu qeexay xeer-nidaamiyaha lagu xusay farqadda 1-aad ee Qodobkan.

3) Sanduuqa Hawlgabka iyo Liiltirka ee Shaqaalaha Rayidka Dawladda ee lagu aas- aasay Sharciga Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee dhaqan- galka ah waa sanduuq hawlgab oo la aqoonsanyahay. Sanduuqyo kale oo hawlgab waxaa loo aqoonsanayaa si waafaqsan faqradda 2-aad ee Qodobkan.

### Qodobka 70-aad
### Qaaraanka Hawlgabka ee Sanduuqyada Hawlgabka ee La Aqoonsaday

1) Shakhsi kasta ee Dalka deegan ku waxa uu soo sheegan karaa in xisaabinta dakhligiisa canshuurgalka ah ee sanad canshuureed laga dhimo qaaraanka uu ku bixiyo sanduuq hawlgabka ee la aqoonsanyahay (eeg faqrada 2-aad ee Qodobka 10- aad). Qaaraanka waa in uu bixiyey:

b) shakhsiga; ama

t) loo shaqeeyaha shakhsigu u shaqeeyo, balse waxaa shuruud ah in qaaraanka lagu daro xisaabinta dakhliga shakhsigu ka helo shaqada sida uu dhigayo Qodobka 12(3) (kh) ee Sharcigan.

2) Lacag dhimista uu shakhsigu soo sheegan karo sanad canshuureed waa qaddarta qaaraanka ama xadka sharciga jideeyay, hadba kii yar. "Qaddarta sharcigu jideeyay" waa labada qaddar ee soo socota tooda weyn:

b) qaaraanka waajib ah ee sharcigu ka rabo inuu shakhsigu ama loo shaqeeyuhu bixiyo muddada sanadka gudihiisa ah; iyo

t) qaddarta lagu cayimay xeer-nidaamiye.

## Qodobka 71-aad
## Canshuurta Sanduuqyada Hawlgabka

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo sanduuqyada howlgabka. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Qaaraanka hawlgabka ee uu helo sanduuq hawlgab waxaa laga dhaafay canshuurta sidoo kalena looma aqoonsanaayo hanti sanduuqu leeyahay ama qaan sanduuqa lagu leeyahay.

3) Sanduuqa howlgabka uma goyn karo kharash ahaan qaaraanka uu bixiyo, iyadoo qaaraankas uu bixiyayna aan lagu dari karo qiimaha hantida ama qaanta sanduuqa.

4) Dakhliga uu helo sanduuqa hawlgabku isaga oo ah sanduuq hawlgab ee la aqoonsaday waa la canshuur dhaafayaa.

5) Haddii sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsanaa uu waayo aqoonsiga sanad

canshuureedka gudihiisa, dakhligiisa canshuurgalka ah ee sanadka waxa lagu kordhinayaa qaddar u dhigan farqiga u dhexeeya labada qaddar ee soo socda:

b) wadarta lacagaha soo socda ee sanduuqu helay intii uu ahaa sanduuq la aqoonsan yahay:

i. dhammaan qaaraanka hawlgabka ee uu sanduuqa hawlgabku ka helo shakhsiyaad Dalka deegan ku ah; iyo

ii. dakhliga canshuurgalka ah ee sanduuqa (ee la xisaabiyay iyadoo aan layska indha tirayo farqadda 4-aad ee Qodobkan) ee sanad canshuureed; oo laga gooyo

t) dhammaan lacag-bixinnada hawlgab ee sanduuqu siiyey shakhsiyaad deegan Dalka ku ah intii uu ahaa sanduuq la aqoonsan yahay.

## Qodobka 72-aad
## Lacagaha Hawlgab Ee Laga Helo Sanduuqyada Hawlgabka

1) Marka la xisaabinaayo dakhliga uu shakhsi sanad canshuureed gudahiisa ka helo qaaraankii u ku darsadey sanduuq hawlgab:

b) lacagaha hawlgabka ee laga bixiyo sanduuq hawlgab ee la aqoonsan yahay ee laxiriirta qaaraankii hore loogu darsadey waxa lagu darayaa dakhliga ka yimaada maalgashiga;

t) lacagaha hawlgabka ee laga helo sanduuq Dalka degaan ku ah oo aan la aqoonsaneyn taasi oo la xiriirta qaaraankii hore loogu darsadey waa la canshuur dhaafay; iyadoo

j) kororka laga helo qaaraankii hore loogu darsadey sanduuq howlgab ee aan Dalka degaan ku ahayn waxaa lagu darayaa dakhliga, balse lacag-bixinnada hawlgabka ee aan ahayn kororka waxaa laga dhaafayaa canshuurta.

2) Qodobkan gudihiisa, "kororka laga helo qaaraanka (gain from an interest)" ee sanduuq hawlgab waxa loola jeedaa xadka lacag-bixinta uu sanduuqu sameeyay ay ka badan tahay qaaraanka hawlgab ee sanduuqa lagu shubay.

## QAYBTA IV
## HAWLAHA DANTA GUUD, ISKAASHATADA IYO KUWA AAN

## FAA'IDO- DOONKA AHAYN

### Qodobka 73-aad

### Aqoonsiga Ururada iyo Hay'addaha Danta Guud ee aan Faaiido Doonka Ahayn

1) Si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigan, Wasaaraddu waxa ay u aqoonsan kartaa hay'ad ama urur inuu yahay mid aan faa'iido doon ahayn, iyad oo go'aan qoraal ah kusoo saaraysa kaas oo waafaqsan Qodobka 13-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqangalka ah, kuna sheegaysa go'aanka in hay'adda ama ururku u hoggaansanyahay faqradda 2-aad ee Qodobkan.

2) Shuruudaha looga baahanyahay hay'addaha ama ururada aan faa'iido doon ahayn waa:

b) in haya'ddu ama ururku yahay mid si sharci ah loogu aasaasay inuu ka shaqeeyo oo keliya hawlo aan faaiido doon ahayn, tusaale ahaan:

i. hay'ad danguud oo ka shaqaysa arrimo diini ah, hawlo khayri ah ama daryeel bulsho;

ii. hay'ad waxbarasho oo danguud ah; ama

iii. hay'ad danguud oo loo aasaasay ujeeddooyin dhaqan ama ciyaaro, taas oo buuxisay shuruudaha ay si gaar ah u dejiyaan xeer nidaamiyayaal; iyo

t) in hay'addu ama ururku leeyahay distuur qoran oo ka reebaya:

i. hawlkasta oo aan ahayn tan sida gaarka loogu tilmaamay farqad hoosaadka (b) ee faqrada 2-aad ee Qodobkan; iyo

ii. bixinta dheef ama faa'ido gaar ah oo ka baxsan kuwa daruuriga u ah fulinta hawlaha aan faa'iido doonka ahayn ee ururka ama ha'adda.

3) Wasaaraddu waxa ay kala noqon kartaa hay'add ama urur aqoonsiga lagu sheegay farqadda 1-aad ee Qodobka, haddii hay'addu ama ururku u dhaqmo si aan waafaqsanayn shuruudaha lagu sheegay farqadda 2-aad ee Qodobkan.

4) Habraaca kala noqoshada aqoonsiga iyo wadooyinka u furan hay'adda ama ururka lagala noqday aqoonsiga waxaa lagu qeexaya xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 74-aad
## Canshuurista Ururada iyo Hay'addaha Dantaguud Ee Aan Faaiido Doonka Ahayn

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo hay'addaha iyo ururrada danta guud ee aan fa'ida doonka ahayn. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigan:

b) hawlaha ururka ama hay'adda danta guud ee aan faa'iido doonka ahayn oo loogu talagalay si loogu sal-gaaro ujeedooyinka aan faai'do doonka ahayn waxaa loola dhaqmayaa sidii in uu yahay ganacsi ("ganacsi aan faa'iido doon ahayn"), kasoo ka baxsan hawl kasta oo kale oo ururka ama hay'addu qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha sanadka ee ka dhasha ganacsiga ururka ama hay'adda ee aan faa'iido doonka ahayn si gooni ah ayaa loo xisaabinayaa;

j) Qodobka 16(t) (ii) laguma dabaqayo ganacsiga aan faaiido doonka ahayn ee ururka ama ha'adda; iyadoo

x) ganacsiga ururka aan faaiido doonka ahayn lagu dabaqayaa Qodobka 23-aad iyadoo qeexitaanka "khasaaro" ee ku jira Qodobka 23 (4) (t) ee ah "sagaashan iyo shan (95%) boqolkiiba" lagu badalayo "boqolkiiba boqol (100%)".

3) Marka la xisaabinaayo dakhliga ururka ama hay'adda danta guud ee aan faa'ido doonka ahayn ka soo gala sanad canshuureed ganacsigeeda aan faiido doonka ahayn

waxa lagu darayaa dakhligaan soo socda (iyo qaddartii kale ee lacageed ee Sharcigani waajibinaayo in lagu daro):

b) dhammaan hadiyadaha iyo deeqaha uu ururku ama ha'addu heshay sanadka gudihiisa;

t) dhammaan lacag-bixinada aan ganacsiga ahayn ee uu sameeyay ururku ama hay'addu sanadka gudihiisa.

4) Marka la xisaabinaao dakhliga ka soo gala sanad canshuureed urur ama hay'add dan guud oo aan faa'ido doon ahayn ganacsigeeda danta guud ee aan faa'iida doonka aheyn, waxa laga goynayaa lacagaha soo socda (iyo qaddartii kale ee lacageed ee Sharcigan ogolaado in laga goyn karo):

b) qaddarada lacageed ee la galay sanadka gudihiisa (xataa kharashaadka gaarka ahaa) ee ilaa xad si gaar ah loogu qabtay fulinta oo keliya hawliha aan faa'iido doonka ahayn ee ururka ama hay'adda aan faa'ido doonka ahayn; iyo

t) boqolkiiba shan (5%) dakhliga saafiga ah (adjusted income) ee ururka ama hay'adda ka soo galay sanadka gudahiisa hawlaha aan faa'iido doonka ahayn. Balse shuruudu waxa ay tahay in lacagaha loo gooynaayo sanad canshuureed si waafaqsan faqrad-hoosaadkan (t) aysan ka badnaan dakhliga saafiga ah ee ururka ama hay'adda ee ka yimid sanadka gudahiisa howlaha aan faa'iido doonka ahayn, ka dib marka laga gooyo qaddarta lacageed ee sanadkaas loo oggolyahay ee lagu sheegay farqad-hoosadka (b)

5) Haddii ay hay'ad ama urur uu sii jirto kadib markii ay lumisey aqoonsigii urur danguud oo aan faa'iido doon ahayn:

b) qaybta sanad canshuureedka ee ka horaysay inta aanay lumin aqoonsigii urur danguud oo aan faa'iido doon ahayn waxa loola dhaqmayaa sidii sannad canshuureed gooni ah ("sanadka ka horeeyay luminta aqoonsiga) oo ka duwan qaybta dambe ee sanadka ee ka danbeeysa marka ay lumiso aqoonsiga ("sanadka ka danbeeya luminta aqoonsiga");

t) hay'adda ama ururka waxaa loola dhaqmayaa sidii inuu sii waddo ganacsi faa'ido doon ah ka dib marka uu lumiyay aqoonsiga; iyadoo

j) xisaabinta dakhliga hay'adda ama ururka kasoo gala ganacsiga sanadka ka danbeeya luminta aqoonsiga lagu daraayo:

i. dhammaan lacagaha loo soo sheegtay in loo gooyo si waafaqsan farqadda (4)(t) ee sanadka ka horeeyay luminta aqoonsiga iyo shantii sanad canshuureed ee ka horeeysay; balse waa in aysan ka badnaan;

ii. qiimaha suuqa ay ka joogto hantida saafiga ah ee hay'adda ama ururka wakhtiga ay lumisey aqoonsiga.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

6) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhliga saafiga ah (adjusted income)" ee urur ama hay'ad danguud oo aan faa'iido doon ahayn ka sameeyo ganacsigiisa aan faaiido doonka ahayn sanad canshuureedka waa dakhlikiisa ganacsi ee sanadkaas:

i. oo loo xisaabiyay qaabka caadi ah; iyad oo

ii. aan la tixgelinayn faqradaha (3) (t) and (4) ee Qodobkan;

t) "lacag-bixin aan mid ganacsi ahayn (non-business payment)" waxa loola jeedaa lacag bixin kasta oo uu bixiyo urur ama hay'ad danguud ee aan faaiido doon ahayn, oo aysan kujirin:

i. qaddar lacageedka sanadka dhexdiisa loo galay in si gaar ah loogu qabto oo keliya hawlaha aan faa'iido doonka ahayn ee ururka ama hay'adda;

ii. lacagaha dhigaalka ah ee u yaalla banki ama hay'ad maaliyadeed oo Dalka degaan ku ah ama banki ama hay'ad maaliyadeed oo aan Dalka degaan ku ahayn balse leh xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed; am

iii. lacagaha maangalka ah ee shakshi loo siiyo hanti ama adeeg uu ka iibiyay ururka ama hay'adda; iyo

j) "hawlaha aan faaiido doonka ahayn (non-profit functions)" ee urur ama hay'ad danguud oo aan faa'iido doon ahayn waxa loola jeeda macnaha lagu qeexay Qodobka 73(2)(b).

## Qodobka 75-aad
## Naadiyada iyo Ururada Ganacsi

1) Qodobkani waxa uu u hoggaansamaaya Qodobka 74-aad ee Sharcigan. Wuxuuna wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo howlaha naadiyaasha, ururada ganacsatada iyo hay'addaha ama ururada la midka ah. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Ururada ganacsatda, naadiyaasha iyo hay'addaha ama ururada la midka ah waxaa loola dhaqmayaa sidii shirkad oo kale, si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigan.

Dhammaan howlahoodana waxa loola dhaqmayaa sidii in ay yihiin hawlo la fuliyay iyadoo lagu guda jiro ganacsi.

3) Marka la xisaabinayo dakhliga urur ganacsato, naadi ama urur iyo hay'ad la mid ah ka soo gala ganacsigooda sanad canshuureed, xisaabta waxaa lagu darayaa khidmadaha ku-biirista (xubin ka noqoshada), lacagta joogtada ah ee xubnaha laga qaado (subscriptions) iyo lacag kasta ee kale laga qaado xubnaha sannadka gudihiisa.

4) Naadi ama hay'ad Dalka deegan ku ah ama hay'addo iyo ururo la mid ah oo u qalmi lahaa in sanad canshuureed loo canshuuro iyadoo la adeegsanaayo hab- xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay (modified cash basis) haddii ay ahaan lahaayeen shuraako, waxa ay u isticmaali karaan hab-xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay si ay u xisaabiyaan dakhliga soo galay sanad canshuureed.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "Xubin" waxa loo jeedaa:

i. marka ay tahay naadi ama hay'ad la mid ah, shakhsiga:

B) xaqqa u leh inuu saami ku yeesho dhammaan hantida naadiga ama hay'adda haddii ay noqoto in la xiro ama la baabi'iyo; am

B) xaqqa cod dhiibasho ku leh shirwaynaha naadiga ama ururka; iyadoo

ii. marka ay tahay urur ganacsato, shakhsiga xaqqa cod dhiibasho ku leh shirwaynaha ururka; iyadoo

t) "Urur ganacsato":

i. waxa loola jeedaa urur ka kooban shakhsiyaad, kaas oo u diiwaangashan si waafaqsan shuruucda Dalka:

B) kuwaas oo dhammaantood si kala gooni ah ugu jira ganacsi; walibana

T) loo dhisay ujeeddo guud oo ah ilaalinta ama sare u qaadidda danaha ganacsi ee shakhsiyaadka; iyadoo

ii. ururada ganacsato uu sidoo kale ka koobanyahay urur shaqaale oo loo diiwangeliyay si waafaqsan shuruucda Dalka.

### Qodobka 76-aad
### Tabarucaadka Lagu-taageero Arrimaha Qiimaha leh

1) Shakhsigu waxa uu codsan karaa in laga dhimo, marka la xisaabinaayo dakhliga canshuur-gal ah ee sanad canshuureedka, qaddar u dhigma qaddarta wadarta tabarucaadyadii uu ku taageeray arrimaha qiimaha leh sanadka gudihiisa. Arrimaha qiimaha leh ee u qalma tabarucaadyada waxaa lagu go'aaminayaa xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

2) Dhimista la xiriirta taburucaad loo sameeyay arrin gaar ah iyo wadarta qaddarta dhimista ee la oggolyahay sanad canshuureedka waxay ku kooban tahay qaddarta lagu sheegay xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan. Haddii tabarucaadka lagu taageeray in kabadan hal arrin ee qiimaleh ee katirsan kuwa lagu go'aamiyay xeer-nidaamiyaha lagu sheegay faqradda 1-aad, waxa la dabaqayaa oo kaliya halka arrin ee qiima leh ee ugu tabarucaadka sareeysa.

3) Tabarucaadka ay shaqsiyaadka iyo shirkaduhu ku taageeram hay'adaha samafalka ee Soomaaliya oo keliya ayaa loo tixgelinayaa dhimista. Xadka wadarta qaddarta dhimista ee la oggolyahay sanad canshuureed waxaa lagu go'aaminayaa xeer- nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

## CUTUBKA VIII
## ARRIMAHA CAALAMIGA AH
## QAYBTA I
## DEGGANAANSHO IYO ISHA DAKHLIGA
### Qodobka 77-aad
### Shakhsiyaadka Dalka Deegaanka Ku Ah

1) Qofku waxa uu Dalka degaan ku yahay sanad canshuureed gudahiis haddii qofku uu:

b) hoy joogta ah ku leeyahay Soomaaliya;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t) yahay muwaadin Soomaaliyeed, marka laga reebo haddii uu hoy joogta ah ku lahayn meel Soomaaliya ka baxsan kaas oo sanadka oo dhan diyaar u ah;

j) joogo Soomaaliya sanadka gudihiisa, joogitaankaasina uu la egyahay muddo ama muddooyin u dhiganta marka laisku geeyo boqol sideetan iyo saddex (183) maalmood ama ka badan intii lagu guda jiro laba iyo tobankii (12) bilood ee ka bilaabmaysa ama ku dhammaanaysa sannadka; ama

j) yahay shaqaale ama sarkaal ka tirsan Dowladda Federaalka ama Dowlad Goboleedyada Soomaaliya oo Dalka dibadiisa shaqo loogu diro sanadka gudihiisa.

2) Shuraako Dalka ayay degaan ku tahay sanad canshuureed haddii waqti ka mid ah sannadka uu xubin kamid ah shuraakada uu deegaan ku yahay Soomaaliya.

3) Amaano Dalka ayey degaan ku tahey sanad canshuureed haddii:

b) lagu abuuray ama lagu aasaasay Soomaaliya;

t) waqti sanadka ka mid ah amaano-hayaha amaanada uu deegaan ku yahey Soomaaliya; ama

j) waqti ka mid ah sanadka uu shakhsi deegaan ku ah Soomaaliya koontaroolo ama awood u leeyahay koontaroolka go'aamada ammaanada, koontaroolkaasi ha noqdo:

i. mid uu kali ku yahay ama ay la wadaagaan shakhsiyaad kale; ama

ii. mid toos ah ama uu u sii marayo hal ama hay'ado kale oo dhextaal ah.

4) Shirkadi Dalka ayey deegaan ku tahay sanad canshuureed haddii:

b) lagu diiwangeliyay, lagu dhisay, lagu abaabulay ama lagu aasaasay Soomaaliya gudaheeda; ama

t) sanadka gudihiisa mar uun maamulkeeda rasmiga ah (effective management) ka howlgalo Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 78-aad
## Badalashada Deganaashaha

1) Shakhsi sannad canshuureed Soomaaliya ku ahaa deegaan si waafaqsan Qodobka 77(1)(j) oo keliya, oo aan Soomaaliya degaan ku aheyn sannad canshuureedkii ka horeeyay, waxa loo aqoonsanayaa in uu Dalka degaan ku yahay oo keliya marka mudada boqol sideetan iyo saddex (183) maalmoodka ahi u bilaabato. Haddiise, shakhsigu degaan ku ahaa Soomaaliya sanad canshuureed waxaa loola dhaqmayaa inuu Dalka degaan ku ahaa sanadka oo dhan.

2) Marka shakhsi aan Dalka degaan ku aheyn uu ku noqdo Dalka degaan, qiimaha saafiga ah (cost) ee hantida shakhsigu haysto ka hor inta uusan Dalka degaan ku noqonin waxay la mid tahay qiimaha suuqa ee hantida wakhtigaas. Xeerkani laguma dabaqaayo hantida maxalliga ah ee shakhsigu lahaa ka hor inta uusan Dalka degaan ku noqon.

3) Ka hor inta shakhsi Dalka degaan ku ahaa uusan lumin degenaashihiisa Dalka, shakhsiga waxaa loola dhaqmayaa sidii inuu gacanta-ka-saaray dhammaan hantida uu lahaa (eeg Qodobka 47-aad). Haddii uu shakhsigu lumiyo deganaashihiisa bilowga

sanad canshuureedka (eeg farqadda 1-aad ee Qodobkan), gacan-ka-saaridda hantida waxaa loo arkayaa inay dhacday wax yar ka hor dhamaadka sanad canshuureedkii hore. Gacan-ka-saarista hantida ee faqradan ka hadlayso laguma dabaqaayo hantida maxalliga ah ee shakhsigu leeyahay kadib isla marka uu shakhsigu lumiyo degenaanshahiisa. Markay ku habboonaato, Wasaaraddu waxa ay adeegsan kartaa awoodaha ku qoran Qodobada 39(4) iyo 49-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkooda) si loo dhaqan geliyo waajibka canshuureed oo ay farqaddani keento.

## Qodobka 79-aad
## Ilaha Dakhliga iyo Lacag-bixinnada

1) Shakhsigu waa in uu dakhliga uu ka helo shaqo, ganacsi ama maalgashi si kala madax banana u xisaabiyaa, gaar ahaan waa inuu si kala madax banana u xisaabiyaa:

b) dakhliga ka yimaada il Soomaaliya gudaheeda ah; iyo

t) dakhliga ka soo galay il dibadeed; sidaas oo kale

j) shakhsigu waa inuu u xisaabiyaa khasaaraha ka yimaada ganacsi ama maalgashi il Soomaali leh si ka gooni ah khasaaraha il shisheeye leh (eeg Qodobka 85).

2) Dakhliga waxaa laga helay il gudaha Soomaaliya ah marka uu yahay mid kamid noocyada soo socda:

b) lacag-bixinta lagu bixiyo shaqo ama khidmadda lagu bixiyo adeeg, taasoo:

i. laga fuliyay gudaha Soomaaliya; ama

ii. ay bixiso Dawladda Federaalka ama Dawlad Goboleedyada Soomaaliya;

t) kirada ama khidmadaha xuquuqda milkiyadda ee loo bixiyo si loo isticmaalo hanti taala gudaha Soomaaliya;

j) faa'idada saamiga oo ay bixiso shirkad Dalka degaan ku ah;

x) faa'iidada laga-helo qaamaha, khidmadda xuquuqda milkiyadda (royalty), khidmadaha adeegyada farsamo, khidmadaha adeegyada dhijitaalka ah ee otomaatigga ah, dheefta caymiska muddada dheer iyo lacag-bixinnada hawlgabka:

i. ee uu bixiyo shakhsi Dalka degaan ku ah, ee aan ahayn mid loo bixiyay si loo daboolo kharashka ganacsi oo ay fuliso xarun ganacsi oo joogta ah ee dibadeed; ama

ii. uu bixiyay shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn si uu u daboolo kharash ganacsi oo ay fuliso xarun ganacsi oo joogta ah ee soomaaliyeed;

kh) khidmada khayraadka dabiiciga ah ee lagala soo baxo Soomaaliya;

d) kororka iyo lacagaha kale ee lagu daro dakhliga kuwaa oo laga helo hantida ama qaanta maxalliga ah;

r) lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) iyo dheefta ceymiska ee la xiriirta khataraha laiska caymiyay ee Soomaaliya;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

s) lacag-bixinnada uu helo shakhsi ka shaqeeya ganacsi gaadiid dhul, bad ama cir, kana shaqeeya qaadista rakaab, xamuul, fariimo ama hantida kale ee guurtada ah ee la taaban karo ee ku aadan:

i. qaadidda rakaab, xamuul, fariimo ama hantida kale ee guurtada ah ee la taaban karo, kuwaas oo socdaalkooda ka bilaabaya Soomaaliya, balse aan ahayn u kala wareejinta laba gaadiid rakaab, xamuul, fariimo ama hanti (transhipment);

ii. kiraynta konteenarada iyo qalabka la xiriirta ee kaabaha u ah daabulka lagu sheegay farqad hoosaadka (s)(i);

sh) lacag-bixinnada shakhsi Dalka degaan ku ah, ama xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed ay siiyaan shakhsi qabta ganacsiga gudbinta farriimaha isagoo adeegsanaaya waayarka, raadiyo, obtikalk faybar ama dayax-gacameed ama isgaarsiinta electarooniga ah taasoo la xiriirta gudbinta fariimo iyadoo la isticmaalaayo qalab ku rakiban Soomaaliya gudaheeda, iyadoon loo eegayn in farriimahaaasi asal ahaan ka yimaadaan Soomaaliya iyo in kale; iyo

dh) haddiyadaha iyo lacagaha maamuuska loo bixiyo ee la xiriira ama laga helo hanti ama qaan maxalli ah ah ama hawl laga qabtay gudaha Soomaaliya;

c) lacagaha magdhowga ee ku xusan Qodobka 35-aad marka sababta magdhowga loo baxshay ay tahay mid kasoo askuntay Soomaaliya.

3) Lacag-bixintu waxa ay sidoo kale kuleedahay il gudaha Soomaaliya haddii loo bixiyo ka tanaasulidda (forbearance of) :

b) fulinta ama qabashada mid kamid ah arimaha lagu sheegay farqadda 2-aad ee Qodobkan; ama

t) helista lacag lagu sheegay faqradda 2-aad ee Qodobkan.

4) Haddii heshiis caalami ah uu Soomaaliya u oggolaanaayo inay canshuurto dakhli (ha ahaato in si toos ah loogu daro dakhliga ama in la diido lacag-goynta la oggolyahay) iyada oo aan lagu saleeynayn deganaasho, xeer-nidaamiye ayaa lagu qeexi doona canshuur soo rogiddaas iyo in dakhligaas loola macaamilayo sidii dakhli laga helay il gudaha Soomaaliya ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

5) Qaddar lacageed waxaa loo tixgalinayaa inu leeyahay il dibadda ah, haddii aanu xiriir la lahayn ama aan laga soo saarin gudaha Soomaaliya.

## QAYBTA II
## GANACSIYADA JOOGTADA AH

### Qodobka 80-aad
### Xarumaha Ganacsi ee Joogtada ah iyo Mulkiilayaashooda

1) Sharcigani waxa uu aqoonsanayaa laba nooc oo xarun ganacsi oo joogto ah:

b) "Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed", waxaa:

i. loola jeedo meel cayiman oo Soomaaliya ku taala taas oo uu shakhsi aan Dalka degaan ku aheyn ku ganacsado ama uu awood u leeyahay inuu ku fushado ujeedooyinkiisa ganacsi;

ii. ka mid noqonaya xarumahan soo socda, iyadoo shuruudo tahay inay hawshooda ganacsi ay Soomaaliya ka socotay muddo sagaashan (90) maalmood ama ka badan inta lagu guda jira muddo 12 bilood ah:

B) goob Soomaaliya gudaheeda ah oo uu shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn ku haysto, ku isticmaalayo ama ku rakibanayo qalab ama mashiinno ganacsi oo muhiiim;

T) goob Soomaaliya gudaheeda ah oo uu shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn uu kaga shaqaynayo dhismo, mashruuc xirxirid qalab ama rakibid oo ay ku jirto goob uu ku samaynayo hawlaha korjoogteynta ee la xiriira mashruucaas;

J) goob Soomaaliya gudaheeda ah ee wakiil uu hawl ugu qabanayo ganacsiga shakhsi uu wakiil ka yahay oo aan Dalka degaan ku ahayn:

i) oo ay ku jiraan, marka ay timaado ganacsiga caymiska, ururinta lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ama cayminta khataraha ka jira Soomaaliya; balse

ii) aysan kujirin marka wakiilku u madax-banaanyahay qabashada howlaha ganacsiga ee noocaasi ah, iyadoo wakiilku aan loo arkayn inuu madax-

banaanyahay haddii uu wakiilku u xiddid layahy shakhsiga aan Dalka deeganka ku ahayn ama wakiilkun yahay mid qabta oo keliya shaqooyinka shakhsiga aan Dalka deeganka ku ahayn ama shakhsiyaad xiddid la ah shakhsiga aan Dalka deegaanka ku ahayn;

t) Marka la go'aamiyo mudada sagaashanka (90) maalmoodka ah ee lagu sheegay faqrad hoosaadka (b)(ii), waxaa xisaabta lagu darsanayaa wixii hawlo ah oo habboon ee shakhsiga xiddidka la ah shakhsiga aan Dalka deegaan ku ahayn uu ka qabtay Soomaaliya gudaheeda muddadii 12 biloodka aheyd.

j) "Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Dibadeed" waxaa loola jeedo goob cayiman oo ganacsi taas oo shakhsi Dalka degaan ku ah ku leeyahay dal shisheeye halkaasoo uu ganacsigu si joogto uga shaqeynayey ugu yaraan lix (6) bilood, balse kuma jiraan goob kasta oo lagu qabto howlaha dabeecadoodu tahay diyaarinta (preparatory) ama caawinta (auxiliary) hawl kale.

2) "Milkiilaha" xarun gancasiga oo joogto ahi waa shakhsiga qabanaya ganacsiga ay xarunta joogtda ahi ay qeybta ka tahay.

## Qodobka 81-aad
## Mabaadi'ida Canshuur Qaadista

1) Marka dakhliga shakhsiga ee kasoo gala ganacsiga la xisaabinayo:

b) hawlaha xarun ganacsi kasta oo joogta ah waxa loola dhaqmaa sidii in ay yihiin ganacsi madax banaan, shakhsiguna waa in uu xisaabaadka ganacsigaasi u diyaariyaa si ka gaar ah hawl kasta oo kale ee uu shakhsigu qabtay; iyadoo

t) shakhsiga laga doonaayo inuu xisaabiyo sanad canshuureed kasta dakhliga ama khasaaraha ka dhashaa ganacsi kasta ee gaarka ah.

2) Dakhliga iyo khasaaraha xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxaa loo xisaabinayaa, loona canshuurayaa si la mid ah sida shirkadaha Dalka degaan ku ah, iyada oo aan loo eegayn in milkiilaheeda aan Dalka deegaan ku aheyn uu yahay shakhsi, shuraako, amaano ama shirkad. Inkastoo milkiiluhu uu qaadayo mas'uuliyadda, tani waxa loola jeedaa in xarun ganacsi oo joogta

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

ah ee Soomaaliyeed ay:

b) si milkiilaha ka gaar ah u bixisaa canshuurta lagu qeexay Qodobka 9 (1) (b) (dakhliga canshuurgalka ah) iyo (t) (canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro);

t) canshuurta ka reebto lacagaha ay bixiso si la mid ah sida shirkad Dalka degaan ku ah ay u reebaan;

j) canshuurta ku bixisaa si qeyb-qeyb ah iyo kdib marka qiimeynta lagu sameeyo, si lamid ah sida shirkad Dalka degaan ku ah; sidoo kalana

x) canshuur ka bixisaa dakhlikeeda dibada ka yimaada sida ku cad Qodobka 9 (1) (j) kaasoo:

i. dheeraad ku noqonaya dakhligeeda canshuurgalka ah; walibana

ii. loo bixinayo si qeyb-qeyb ah iyo kdib marka qiimeynta lagu sameeyo si waafaqsan Cutubka IX, taasoo ah si la mid ah sida loo canshuuro dakhligeeda canshuur galka ah.

3) Dakhliga ama khasaaraha xarun ganacsi oo joogta ah ee dibadeed waxaa loo nisbaynayaa milkiilaheeda deegaanka ku ah Dalka, waxay na sii lahaanaysaa sifadeedii, marka ay timaado nuuc iyo il ahaanba. Tan waxa loola jeedaa xarun ganacsi oo joogta ah ee dibadeed waajib kuma ahan iney bixiso canshuur waafaqsan Qodobka 9(1) (b) ama (t), xaqna uma lahan tixgelinta canshuureed (tax credit) oo la xiriirta dakhligeeda oo ka goonida ah milkiilaheeda.

4) Marka arrimaha soo socda laga reebo, macaamilka dhex mara xarun ganacsi oo joogta ah iyo milkiilaheeda lama aqoonsanayo. Macamilaadka laga reebay faqradan waxaa kamid ah:

b) marka ganacsi banki oo leh macnaha lagu sheegay Qodobka 65-aad uu shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn uu fulinaayo isagoo isticmaalaya xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed:

i. mas'uuliyadda bixinta dayn ee u dhexaysa milkiilaha iyo xarunta ganacsi ee joogtada ah ama xarunta ganacsi ee joogtada ah iyo milkiilaha; iyo

ii. lacagta laga helay ama loo galay daynta lagu sheegay farqad hoosaadka

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

(b)(i). Balse waxaa shuruud ah in xarunta ganacsi ee joogtada ah ay ogolaansho qoraal ah ka hesho Wasaaradda, kasoo tilmaamaya in farqaddan 2-aad la dabaqayo islamarkaasina milkiilaha iyo xarunta ganacsi ee joogta ay si isla mid ah ugu xusaan macaamilaadkas diiwanadooda xisaabeed; iyo

t) macaamilkaadka loola dhaqmaayo gacan-kudhigis (acquisition) iyo gacan-ka- saaris si waafaqsan Qodobka 82(5).

5) Marka farqadda (4) (b) la dabaqayo:

b) mas'uuliyadda dayn bixin ee mulkiiluhu u galay shakhsi kale dartiisa looma nisbeyn karo xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed si waafaqsan Qodobka 82-aad;

t) faa'idada ka dhalata daynta ee loola dhaqmay inay gashay xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxa laga rabaa in laga gooyo canshuur sida ay dhigayso Qeybta II ee Cutubka IX ee Sharcigan.

6) Xeerarka macaamilaadka eex la'aanta ah (transfer pricing rules) ee ku cad Qodobka 37-aad ayaa lagu dabaqayaa macaamilaadka lagu xusay farqadda (4)(b) iyo (4)(t) ee Qodobkan iyadoo laga soo qaadayo in xarunta ganacsi ee joogta ah iyo milkiilaheedu ay yihiin shakhsiyaad kala madax-banaan balse xiddid ah.

## Qodobka 82-aad
## Hawlaha, Hantida iyo Qaamaha Xarunta Ganacsi ee Joogtada ah

1) Hawlaha xarunta ganacsi ee joogtada ah waa howlaha uu milkiiluhu qabtay isaga oo adeegsanaya xarunta ganacsi ee joogtada ah. Waxa intaasi dheer, hawlaha soo socda ayaa loola dhaqmayaa inay qabatay xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed (balse aysan qaban xarun ganacsi oo joogta ah ee dibadeed):

b) shaqaaleysiinta shakhsi kasta oo deegan ku ah Soomaaliya ee uu sameeyo milkiilaha;

t) gaddista badeeco ganacsi ee uu sameeyo milkiilaha ama shakhsi xiddid la ah milkiilaha taasi oo ku nuuc ah ama la mid ah kuwa la iibiyay iyadoo la adeegsanayo xarunta ganacsi ee joogtada ah; iyo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

j) hawlaha kale ee ganacsi ee milkiilaha ama shakhsi xiddid la ah ee laga fuliyo Soomaaliya, kuwaas oo ku nuuc ah ama la mid ah kuwa la fuliyay iyadoo la adeegsanayo xarunta ganacsi ee joogtada ah.

2) Hantida iyo qaanta xarunta ganacsi ee joogtada ah waa kuwa uu leeyahay ama lagu leeyahay milkiilaha ahna:

b) hantida ay leedahay ama loo isticmaalay howlaha xarunta ganacsi ee joogtada ah;

t) hantida aan la taaban karin oo ay abuurtay xarunta ganacsi ee joogtada ah ama la abuuray iyadoo la adeegsanaayo xarunta ganacsi ee joogtada ah;

j) marka ay khuseeyso xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed, hantida aan la taaban karin ee lagu isticmaalay gudaha Soomaaliya;

x) iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 81(5) (ganacsiga baankiyada), mas'uuliyadda dayn bixinta ee lagalay si lacag loo amaahdo, lacagtaas oo loo adeegsaday hawlaha xarunta ganacsi ee joogtada ah ama loo isticmaalay si gacanta- loogu soo dhigo hantida lagu xusay faqrad-hoosadka (2)(b) ee Qodobkan; iyo

kh) qaamaha kale ee sida tooska uga dhalanaaya hawlaha xarunta ganacsi ee joogtada ah.

3) Xarunta ganacsi ee joogtada ah waxa loola dhaqmayaa in ay yeelaneyso hanti ama lagu yeelanaayo qaan marka hantidaaas ama qaantaasi ay noqdaan hanti ay leedahay xarunta ganacsi ee joogtada ah ama qaan lagu leeyahay.

4) Waxaa u dheeri ah xaaladaha lagu tilmaamay Qodobbada 43-aad iyo 44-aad (gacan-ka-saarista hantida iyo qaanta), xarunta ganacsi ee joogtada ah waxa loola dhaqmaa inay gacanta-ka-saartay hanti ay laheyd ama qaan lagu lahaa mark ay hantidaasi ama qaantaasi ay noqdan kuwa aysan lahayn ama lagu lahayn xarunta ganacsi ee joogtada ah.

5) Si la jaan-qaadaysa farqaddaha 3-aad iyo 4-aad ee Qodobkan, wareejinta hanti ama qaan:

b) uu milkiiluhu ku wareejinayo xarunta ganacsi ee joogtada ah waxa loola

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

dhaqmayaa gacan-ka-saaris hanti ama qaan dhinaca milkiilaha iyo helid hanti ama qaan dhinaca xarunta ganacsi ee joogtada ah; iyadoo marka

t) ay xarunta ganacsi ee joogtada ah ku wareejineyso milkiilaha hanti ama qaan loola dhaqmayo inay ka tahay gacan-ka-saaris hanti ama qaan dhinaca xarunta ganacsi ee joogtada ah iyo helid hanti ama qaan dhinaca milkiilaha.

6) Si waafaqsan faqraddaha (4) iyo (5) (t) ee Qodobkan, haddii xarunta ganacsi ee joogtada ah ay meesha ka baxdo:

b) waxa loola dhaqmayaa sidii inay gacanta-ka-saartay dhammaan hantidii ay lahayd iyo qaantii lagu lahaa, kuna wareejisay milkiilaheeda; iyadoo

t) milkiiluha uu keligii qaadayo mas'uuliyadda dhamaan waajibaadka canshuureed ee taagan iyo tan mustaqbalka ee xarunta ganacsi ee joogtada ah, iyadoo marka ay habboontahay, Wasaaraddu waxa ay adeegsan karto awoodaha ku qoran Qodobbada 39(4) iyo 49-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkooda) si loo dhaqan geliyo waajibkaas canshuureed.

## Qodobka 83-aad
## Dakhliga iyo Khasaaraha Xarunta Ganacsi ee Joogtada ah

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sida xeerarka caadiga ee uu Sharcigani dejiyay loogu dabaqaayo xisaabinta dakhliga ama khasaaraha xarunta ganacsi ee joogtada ah. Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga iyo khasaaraha ka dhasha ganacsiga xarun ganacsi ee joogta ah, waxaa loo nisbeynayaa xarunta ganacsi ee joogtada ah:

b) lacagaha ay soo saartay iyo lacag-bixinnada ay heshay ee la xiriira hantida ay leedahay, qaanta lagu leeyahay ama hawlaha xarunta ganacsi ee joogtada ah; iyo

t) kharashaadka la galay iyo lacagaha loo bixiyay ujeedooyin la xiriira hantida ay leedahay, qaanta lagu leeyahay ama hawlaha xarunta ganaci ee joogtada ah, balse kharashaadkaan iyo lacag-bixinnadaan waxaa laga tixgelinaayaa oo keliya hadba inta si sax ah loogu qoray xisaabta xarunta ganacsi ee joogtada ah.

## Qodobka 84-aad
## Dakhliga Dibada Loo Diray

1) Dakhliga dibada loo diray (repatriated income) sanad canshuureed ee xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxa loola jeedaa wadarta:

b) dakhliga canshuurgalka ah ee sanadka ee xarunta ganacsi ee joogtada ah kaas oo aan dib loogu maalgalin xarunta ganacsi ee joogtada ah; oo lagu daray

t) dakhliga canshuurgalka ah ee sanad canshuureed hore ee xarunta ganacsi ee joogtada ah ee dib loogu maalgaliyay xarunta ganacsi ee joogtada ah haseyeeshee dib loogala baxay xarunta ganacsi ee joogtada sanadka gudihiisii.

2) Marka la xisaabinayo dakhli dibadda loo diray:

b) dakhliga canshuurgalka ah waxa laga jarayaa canshuurta laga bixiyey dakhligaasi;

t) waxaa isbarbardhig lagu sameynayaa, bilowga iyo dhammaadka sanadka, isbadalada kuyimid ra'sumaalka xarunta ganacsi ee joogtada ah;

j) waxaa la xisaabinayaa ra'sumaalkeeda iyada oo qiimaha saafiga ah (net cost) ee hantida xarunta ganacsi ee joogtada ah laga jarayo wixii lacag qaan saafi ah ee xarunta lagu leeyahey; sidoo kale

x) waxa laga soo qaadayaa in dakhliga canshuurgalka ah ee sanadkan iyo dakhliga canshuurgal ahaa ee dib loogu maalgaliyay sanadihii hore in dib-loo-celiyay (repatriated) ama dib loogala baxay xarunta ganacsi ee joogtada ah ka hor inta saamileyda shirkaddu kala qaadan ra'sumaalka ay ku darsadeen.

3) Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa qeexaya tilmaamaha dheeraad ah oo ku aadan dakhli dibadda loo diro ee xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed.

# QAYBTA III
# DAKHLIGA IYO KHASAARAHA HOWLAHA DIBADDA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## Qodobka 85-aad
## Lacag Goynta iyo Khasaaraha Howlaha Dibadda

1) Lacag goynta dibadda waxa keliya oo loo isticmaali karaa xisaabinta dakhliga leh ilaha dibadda balse looma isticmaali karo xisaabinta dakhliga leh ilo Soomaaliyeed. Lacag goyn waxaa loo tixgelinaaya inay tahay lacag goyn dibaddeed haddii aysan ahayn lacag goyn Soomaaliyeed. Kuwan soo socda ayaa ah lacaga goyn Soomaaliyeed:

b) lacagaha goyntooda lagu ogolaaday Qodobka 19-aad ama 20-aad:

i. marka ay la xiriiran hanti maxalli ah sida ku cad farqad-hoosaadka (b)(ii); ama

ii. markaa loo eego ganacsiga gaadiidka ee lagu sheegay Qodobka 79(2)(s), lacaga goynta la xiriira hantida guurtada ah ee la taaban karo loona adeegsado in lagu qaado rakaabka socdaalka ah ama xamuulka, fariimaha ama hanti kale ee guurto ah oo la taaban karo kuwaas oo socdaalkooda ka bilaabaya Soomaaliya, balse aan ahayn u kala wareejinta laba gaadiid rakaab, xamuul, fariimo ama hanti (transhipment);

t) khasaare ka yimid gacan-ka-saarista:

i. hanti maxalli ah oo nuuceedu yahay hanti ra'sumaal ee ganacsi ama hanti maalgashi oo canshuurgal ah; ama

ii. qaan maxalli ah ee ganacsi; iyo

j) iyadoo loo hoggaansamaayo faqraddaha (b) iyo (t), lacag goynta la xiriirta kharashka la galay, kaas oo nuuciisu yahay lacag bixin maxalli ah oo leh il Soomaaliyeed;

2) Khasaaraha dibadda ee ganacsi ama maalgashi inta lagu jiro sanad cashuureedka waa xadiga lacagta loo gooyn karo ganacsigaas ama maalgashigaas ilaha dibadeed leh ay ka badan tahay dakhliga dibadeed ee sanadkaas ka soo xarooda ganacsigaas ama maalgashigaas.

3) Marka laga soo tago xaddidaadaha lagu xusay Qodobbada 83-aad (khasaaraha

ganacsiga) iyo 24-aad (lacag goynta iyo khasaaraha maalgashiga), khasaaraha shakhsiga kasoo gaara ganacsigiisa ama maalgashigiisa dibbada:

b) waxa lacag goyn loo samayn karaa oo keliya marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee ishiisu tahay dibadda; iyadoo

t) wax lacag goyn ah aan loo saamayn karin marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee ishiisu tahay Soomaaliya.

## Qodobka 86-aad
## Tixgelinta Canshuur Dibadda Lagu Baxshay

1) Shakhsi Dalka deegaan ku ah (ee aan ahayn shuraako) wuxuu codsan karaa in loo tixgeliyo canshuur uu ku bixiyey dibadda ee sanad canshuureedkaas oo ku aaddan wixii canshuur dakhli ah ee uu dibadda ku bixiyay oo la xiriira dakhliga dibadda ee shakhsiga ee qiimeyngalka ah sanadkaas. Ma jirayso tixgelin canshuur, iyadoo loo cuskanaayo xeerarka lagu xusay Qodobka 79-aad, hadii aan dakhliga dibadda laga helin isla wadanka shisheeye ee canshuurta lagu bixiyay.

2) Tixgelinta canshuur dibadda waxa loo xisaabinayaa:

b) si kala gooni ah sanad canshuureed kasta, iyo si kala gooni ah dakhli kasta dibadeed oo qiimeyngal ah ee laga helay shaqo, ganacsi ama maalgashiga; iyadoo

t) markastoo la xisaabinaayo, tixgelinta canshuurta dibbada waa in aysan ka badanin heerka celceliska canshuurta dakhliga Soomaaliya ee shakhsiga sanadkii loogu dabaqaayo dakhliga uu ka helay dibadda ee qiimeyngalka ah.

3) Shakhsigu waxa uu dooran karaa inuu ka tanaasulo tixgelinta canshuur dibaddeed ee sanadkaas ee uu heli karo, waxa uuna codsan karaa in lacag gooyn loo sameeyo canshuurta dakhliga ee uu dibadda ku bixiyay. Haddii aysan taasi dhicin, wax lacag goyn ah looma saamayn karo canshuurta dakhliga ee uu dibadda ku bixiyay.

4) Halkii laga dabaqi lahaa canshuur khafiifinta uu dhigayo Qodobkan, Wasaaraddu waxay go'aansan kartaa in lasoo saaro xeer-nidaamiye waafiqsan

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

Sharcigan kaas oo qeexi doona duruufaha iyo xaaladaha keeni kara in laga dhaafo canshuurta dakhli dibadda laga helay ee ka dhashay shaqo dibadda ah, xarun ganacsi oo joogta ah ee dibadeed, ama hanti ma guurto ee dibaddeed.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "heerka celceliska canshuurta dakhliga ee Soomaaliyeed (average rate of Somali income tax)" ee sanad canshuureed ee shakhsi deegaan ku ah Soomaaliya waa boqollayda:

i. canshuurta ku waajibtay shakhsiga si waafaqsan Qodobka 9(1)(b) (oo la xisaabinayo iyada oo aan la tixgelinayn Qodobkan); ee

ii. dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsiga ee sannadkaas.

t) "dakhli dibadda oo qiimeyngal ah (assessable foreign income)" waxa loola jeedaa dakhli ishiisu tahay dibadda ee lagu daray dakhliga qiimeyngalka ah ee shakhsi Dalka deegaan ku ah kasoo gala sanad canshuureed shaqo, ganacsi ama maalgashi, kolba siduu xaalku noqdo.

## Qodobka 87-aad
## Amaanooyinka iyo Shirkadaha Dibaddeed ee La Kontoroolo

1) Haddii dhamaadka sanad canshuureedka amaano ama shirkadi ay tahay shirkad ama ammaano dibaddeed ee la kontoroolo (controlled foreign trust or corporation), ammaanada ama shirkadda waxaa loola dhaqmayaa sidii in ay u qaybisay kahor dhamaadka sanad canshuureedka dakhligeeda aan lakala qoondayn ee sanadkaas xubnaheeda. Qaybinta waxa loo tixgelinayaa in loo sameeyay iyadoo lagu saleeynaayo xubin walba saamiga ay ku leedahay dakhliga aan la qeybin.

2) Qaybta dakhli ee xubin ka heshay ammaano ama shirkad dibaddeed ee la kontoroolo sanad canshuureedka gudahiisa (iyada oo aan la tixgelinayn farqadda 1- aad) waxa laga dhimayaa qeybtii ay xubintu ka heshay qoondooyinkii la sameeyay sanadkii hore si waafaqsan farqadda 1-aad. Dhimistu kama badnaan karto kolba tii yar:

b) inta dheeraadka ka ah dakhliga xubintu lasiiyay marka la barbar-dhigo intii ay ahayd inuu ku helo saamigiisa ee dakhliga amaanada ama shirkadda ee sanadka; ama

t) qeybintii dakhli ee sanadkii hore oo aan horay loogu saamyn dhimis si waafaqsan faqraddan.

3) Dakhliga kasta oo loola dhaqmay in loo qaybiyay si waafaqsan farqadda 1-aad ee Qodobkan waxa lagu darayaa waqtiga la qaybiyay maalgashiga xubinta uga baxay saamiga amaanada ama shirkadda.

4) Wax kastoo dhimis ah oo loo sameeyo si waafaqsan farqadda 2-aad ee Qodobkan waxa lagu darayaa dheefta xubintu ka heshay saamiga ay ku leedahay amaanada ama shirkadda waqtiga dhimista.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhliga loo nisbeyn karo (attributable income)" ammaano ama shirkad dibaddeed ee la kontoroolo (controlled foreign trust or corporation) sanad canshuureed gudahiisa waa dakhligeeda canshuurgalka ah ee sanadka oo loo xisaabiyay sidii ayadoo Dalka degaan ku ah;

t) "ammaano ama shirkad dibaddeed ee la kontoroolo (controlled foreign trust or corporation)" waxa looga jeedaa amaano ama shirkad aan Dalka degaan ku aheyn taas oo shakhsi Dalka deegan ku ah uu ka yahay xubin wax kuleh, si toos ah ama si dadban isagoo u maraaya shirkad ama dhawr shirkadood oo dhextaal ah oo aan Dalka deegan ku ahayn, iyadoo walibana:

i. shakhsigu xiriirka uu la leeyahay ammaanada ama shirkadda ay tahay mid waafaqsan faqrada (1)(x) ama faqradda (2) ee Qodobka 4-aad; ama

ii. haddii ay jiraan shakhsiyaad u dhaxeeyay hal ilaa afar shakhsi oo kale oo Dalka degan kuwaas oo haddii ay xiddid la ahaan lahaayeen shakhsiga, ay keeni laheyd in shakhsi uu xiddid la noqdo amaanada ama shirkadda;

j) "Saamiga xubin" marka loo eego dakhliga amaano ama shirkad waxa uu:

i. le'eg yahay boqollayda xubintu ay xaq ugu leedahay saamiga dakhliga la qaybsanayo; ama

ii. haddii uusan xaqani hubaal noqon karin, boqollayda ay Wasaaraddu ay aragto inuu ku habboon tahay duruufaha markaas jira;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

x) "dakhli aan la qeybin" ee ammaano ama shirkad dibaddeed ee la kontoroolo ee sanad canshuureed waa:

i. dakhliga loo nisbeeyn karo in ammaanadu ama shirkaddu heshay sanadkas; oo laga jaray

ii. dakhligii ay qaybisay ammaanadu ama shirkaddu sanadka gudihiisa (iyada oo aan la dabaqayn faqradda 1-aad) ee lagu daray xisaabinta dakhliga xubnaha.

## Qodobka 88-aad
## Canshuur Khafiifinta La Xiriirta Faa'dada Ka-dhalata Saamiyada

1) Faa'dada saamiga oo ay shirkad dibaddeed ee la kontoroolo siiday (oo ay kujirto iyada oo loo raacayo faqradda 1-aad ee Qodobka 87-aad) saamile muhiim ah waxaa loola dhaqmayaa sidii in:

b) ay leedahay sifo la mid ah nooc iyo il ahaanba dakhliga loo nisabeeyn karo in ay hesho shirkadda dibaddeed ee la kontoroolo; walibana

t) sida u dhiganta looga bixiyay nooca iyo il kasta oo dakhli ah oo loo nisbeyn karo shirkadda dibaddeed ee la kontoroolo. Waxaa muhiim ah in la oggaado in xeerka ku qoran faqradan 1-aad ee Qodobkan aan la dabaqayn haddii faa'idada saamiga oo ay qaybisay shirkadda dibaddeed ee la kontoroolo sanad canshuureedka uu ka badan yahay dakhliga loo nisbeyn karo shirkadda sanadkaas.

2) Saamilaha lagu dabaqayo faqradda 1-aad ee Qodobkaan waxa uu ka faa'idaysanayaa canshuurta dakhliga ee Sharcigan waajibinaayo ama canshuurta dakhliga ee shuruuc dibaddeed waajibanayaan oo ay bixisey ama loola dhaqmay inay bixisay shirkadda dibaddeed ee la kontoroolo oo la xiriira dakhliga loola dhaqmay in la qaybiyay. Saamilaha waxa loo tixgalinayaa inuu bixiyay canshuurtaas waqtigii qaybintu dhacdey, waxa uuna heli karaa tixgelinta canshuur lagu bixiyey dibadda si waafaqsan Qodobka 86-aad.

3) Faqradaha 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan waxaa loogu dabaqayaa dakhliga ay qaybisay shirkad Dalka deegan ku ah oo ay siisay saamile muhiim ah oo aan Dalka deegan ku ahayn sidii in shirkaddu tahay shirkadda dibaddeed oo la kontoroolo, walibana dakhliga shirkadda loo nisbeeynayo ee sanad canshuureedkuna yahay dakhligeedii canshuurgalka ahaa ee sanadka.

4) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhli la nisbeyn karo" iyo "shirkad dibaddeed ee la kontoroolo" waxa ay yeelanayaan macnaha lagu siiyay Qodobka 87-aad"; iyadoo

t) "saamile muhiim ah" loola jeedo shirkad leh milkiyad mug leh, sida lagu qeexay Qodobka 61-aad ee Sharcigan.

## CUTUBKA IX
## HABRAACA CANSHUUR BIXINTA
## QAYBTA I
## WAAJIBAADKA GUUD
### Qodobka 89-aad
### Hababka Iyo Waqtiga Bixinta

1) Canshuurta loo soo rogay si waafaqsan Qodobka 9-aad waxa lagu bixin karaa canshuurta oo isha lacag-bixinta lagu jaro si waafaqsan Qaybta II, qeyb-qeyb si
waafaqsan Qaybta III ama iyadoo loo hoggaansamaayo qiimeyn la sameeyay si waafaqsan Qaybta IV.

2) Canshuurta waxa la bixinayaa:

b) marka ay tahay canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro, xilliga ku cad Qodobka 93-aad;

t) marka ay tahay canshuurta loo bixiyo qeyb-qeybta, taariikhda ay tahay in qeyb walibaa la bixiyo sida ay dhigayaan Qodobada 97-aad ama 100-aad; iyo

j) marka ay tahay canshuurta la bixinayo iyadoo loo hoggaansamaayo qiimayn, taariikhda ay tahay in xisaab canshuureedka dakhliga loo gudbiyo Wasaaradda ee ku cad Qodobka 101-aad.

## QAYBTA II
## CANSHUURTA LAGU BIXINAYO HABKA CANSHUUR KAREEBIDDA

## Qodobka 90-aad
## Canshuurta Loo Shaqeeyuhu Kareebayo Shaqaalaha

1) Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa qeexi doona xilliyada loo shaqeeye Dalka deegan ku ah (oo ay kujirto xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed) ay waajib ku tahay inuu canshuurta ka reebo lacag-bixin kasta oo xisaabta lagu darsanaayo marka la xisaabinaayo dakhliga canshuurgalka ah ee shaqaalaha.

2) Waajibaadka canshuur kareebidda ee saaran loo shaqeeyaha ee lagu xusay farqadda 1-aad kuma yaraanaayo ama kuma suulaayo isagoo ku andacoonaaya sababaha soo socda:

b) in loo shaqeeyuhu uu xaq u leeyahay ama waajib ka saaran yahay inuu lacago kale ka jaro lacagta uu bixinaayo; ama

t) in sharci kale oo jiro uu sheegayo in dakhliga qofka shaqaalaha ah aan wax laga reebi karin ama aan loo leexin karin qaansheeg (attachment).

## Qodobka 91-aad
## Canshuur Ka-jarista Lacagaha Laga-helo Maalgashiga

1) Si waafaqsan farqadda 3-aad ee Qodobkan, shakhsi Dalka deegaanka ku ah (oo ay ku jirto xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed) waxaa waajib ku ah inuu ka jaro boqolleyda canshuurta ee lagu qeexay Qodobka 5-aad ee Jadwalka Koowaad, marka:

b) uu shakhsigu siinaayo shakhsi kale faa'ido saami, khidmad khayraad dabiici, kiro, faa'ido ka dhalaty qaan, ama khidmadda xuquuqda milkiyadda; iyo

t) lacagta laga helay ama isheedu tahay Soomaaliya.

2) Marka sanduuq hawlgab ee la aqoonsaday uu bixinayo lacag hawlgab, waa in canshuurta looga jaraa lacag-bixintaas si waafaqsan Qodobka 90-aad, iyadoo loola dhaqmaayo sidii:

b) in lacagtu tahay dakhli laga helay shaqo;

t) in sababta lacag bixinta hawlgabka loo bixiyaynaayo ay tahay sabab la



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

xiriirta shaqo la qabtay; iyo

j) in sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsaday uu yahay loo shaqeeye.

3) Farqadda 1-aad ee Qodobkan laguma dabaqaayo:

b) lacag-bixinnada canshuurta isha lacag-bixinta looga jaro si waafaqsan Qodobka 90-aad (dakhliga shaqada);

t) lacagaha ay bixiyaan shakhsiyaadka, marka laga reebo:

i. lacagaha lagu bixiyay qabashada hawlo ganacsi kaas oo ugu yaraan leh hal shakhsi oo shaqaale ah; ama

ii. marka lacag bixintu tahay kiro hanti ma guurto ah, iyadoo shuruudo tahay in kirada bisha ee la bixiyey ay ka badan tahay heerka uu jaangooyay xeer- nidaamiye dhaqan-gal ah;

j) kirada, faa'idada ka dhalata qaamaha, ama khidmadda xuquuqda milkiyadda ee la siiyay hay'ad Dalka degaan ku ah taas oo leh, isla markaana lacag-bixiyaha siineysa lambarka aqoonsiga canshuurbixiyaha; ama

x) lacagaha la canshuur dhaafay.

## Qodobka 92-aad
## Canshuur Ka-jarista Khidmadaha Adeegga

1) Iyadoo loo hoggaansamaayo farqadda 3-aad ee Qodobkan, shakhsi Dalka deegaanka ku ah (oo ay ku jirto xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed) waxaa waajib ku ah inuu ka jaro boqolleyda canshuurta ee lagu qeexay Qodobka 5-aad ee Jadwalka Koowaad, marka:

b) uu shakhsigu bixinayo khidmad adeeg oo isheeda dakhli ay tahay Soomaaliya, uuna siinayo shakhsi Dalka deegaan ku ah oo aan ahayn shaqaale, sida:

i. midda lagu bixiyo wax dhigidda, cashar-bixinta, imtixaamidda, imtixaan ilaalinta ama imtixaan kormeeridda;

ii. mida komishan ahaan loo siiyo caymis Dalka degaan ku ah, ama wakiil

iib- gayn;

iii. khidmadda xayaysiinta (endorsement fee); ama

iv. khidmadaha kale ee lagu qeexo xeer-nidaamiye loo soo saaro si waafaqsan Sharcigan; ama

t) uu shakhsigu bixinaayo khidmad adeeg ama lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) taas oo ay isheedu tahay Soomaaliya, uuna siinaayo shakhsi aan Dalka deegaan ku ahayn.

2) Iyada loo hoggaansamaayo faqradda 3-aad ee Qodobka, xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa lagu go'aamin karaa:

b) in shakhsi Dalka deegaan ku ah (oo ay ku jirto xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed) ay waajib ku tahay inuu canshuurta ka jaro marka uu lacag siinayo shakhsi aan Dalka deegaan ku ahayn, lacag-bixintaas nuuceeduna yahay midda lagu sheegay Qodobka 79 (2) (s) ama (sh) (lacag-bixinnada la xiriira gaadiidka dhulka, badda ama cirka ama adeegyada isgaarsiinta); iyo sidoo kale

t) boqolleyda canshuur oo ay tahay in laga jaro canshuurta lagu soo sheegay faqrad- hoosaadka (b) ee faqradaan.

3) Qodobkani laguma dabaqaayo::

b) lacag-bixinnada canshuurta isha lacag-bixinta looga jaro si waafaqsan Qodobka 90-aad (dakhliga shaqada);

t) lacagaha lagu bixiyay qabashada hawlo ganacsi kaas oo ugu yaraan leh hal shakhsi oo shaqaale ah; ama

j) lacag bixinnada canshuurta laga dhaafay.

## Qodobka 93-aad
## Warbixinnada iyo Bixinta Canshuurta La-jaray, ama Loola Dhaqmay in La- jaray

1) Cidkasta oo canshuur ka jartaa lacag-bixin ay sameeyanyso (oo halkaan kadib loogu yeeraayo wakiilka canshuur jarista) waa in ay Wasaaradda ugu soo

shubtaa canshuurtaas ay jartay muddo afar iyo toban (14) maalmood gudahood ah kadib dhamaadka bil kasta oo canshuurtaas loo jaray si waafaqsan Qaybtaan II ee Cutubkan IX.

2) Waqtiga loo soo shubaayo Wasaaradda lacagta ku xusan faqradda 1-aad, wakiilka canshuur jarista waa inuu usoo gudbiyaa Wasaaradda warbixin u qoran habka ay tilmaamtay Wasaaraddu taas oo tilmaamaysa:

b) lacag-bixinnada uu wakiilka canshuur jarista bixiyay bishii hore kuwaas oo ay ku waajibaysay canshuur ka-jaris waafaqsan Qaybtaan II ee Cutubkan IX;

t) magaca, goobta iyo lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha ee shakhsiga canshuurta laga jaray;

j) canshuurta laga jaray lacag bixin kasta; iyo

x) macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu go'aamiso.

3) Wakiil kasta ee canshuur jaris oo ku guul darraysta in uu canshuurta u jaro si waafaqsan Qaybtaan waa inuu jeebkiisa ka bixiyaa canshuurtii ay ahayd inuu jaro, isagoo usoo shubaaya Wasaaradda isla waqtigii laga rabay inuu soo shubo canshuurtii ay ahayd inuu jaro, isagoo maraaya qaabkii loo asteeyay soo shubista canshuurtii ay ahayd inuu jaro.

4) Marka wakiil canshuur jaris uu ku guuldareysto inuu canshuurta ka jaro lacagaha uu bixiyay sida ay fareeyso qaybtani:

b) cidda ay ahayd in canshuurta laga jaro waxa ay si wadajir ah iyo si kali ahba (jointly and severally) masuul ugula tahay wakiilka canshuur ka-jarista bixinta canshuurta iyo in loo soo shubo Wasaaradda canshuurtaas; iyo

t) in cidda ay ahayd in canshuurta laga jaro ay waajib kutahay inuu canshuurtaas usoo shubo Wasaaradda muddo afar iyo toban (14) maalmood gudahood ah kadib dhammaadka bisha uu helay lacag-bixinta.

5) Wakiil canshuur jaris ee canshuur jaraa isagoo adeegsanaya Qaybtaan, marka uu canshuurta uu jaray siiyo Wasaaradda waxa loola dhaqmayaa sidii inuu siiyay shakhsiga uu canshuurta ka jaray lacagtii uu canshuur ahaanta u



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

jaray, iyadoo shakhsiga canshuurta laga jaray uusan la imaan karin wax sheegasho ah oo la xiriirta lacagta canshuur ahaanta looga jaray ee loo shubay Wasaaradda.

6) Wakiil canshuur jaris ee ku guul darraysta inuu canshuurta u jaro si waafaqsan Qaybtaan balse siiya Wasaaradda canshuurtii ay ahayd inuu ka-jaro lacag bixinta uu sameeyay si waafaqsan faqradda 3-aad ee Qodobkan waxa uu xaq yeelanayaa inuu lacag la'eg canshuurii uu bixiyay uu kasoo ceshado shakhsiga ay ahayd in canshuurta laga jaro xilliga lacag-bixinta.

(7) Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa dejin doona in shakhsiga lacago ka badan xadka la go'aamiyay ku bixinaaya badeecado ama adeegyo ay ku waajibayso inuu Wasaaradda usoo gudbiyo waqtiga loo cayimay warbixin u qoran sida ay Wasaaraddu tilmaamtay, warbixintaas oo tilmaamaysa:

b) nooca iyo waddarta lacag ee la bixiyay;

t) magaca, goobta iyo lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha lacagta la siiyey; iyo

j) macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu go'aamiso.

## Qodobka 94-aad
## Shahaadooyinka Canshuur Ka-jarista

1) Wakiilka canshuur jarista waa inuu u diyaariyaa, lana wadaagaa shakhsiga canshuurta laga jaray shahaado canshuur jaris:

b) oo si gooni ah ula xiriirta waqti walba oo luga xusay faqraddaha 3-aad iyo 4-aad ee Qodobkan;

t) waqtiga lagu cayimay faqraddaha 3-aad iyo 4-aad ee Qodobkan; taasoo

j) loo diyaariyay qaabka la tilmaamay.

2) Shahaadada canshuur jarista waa inay caddaysaa qaddarta lacageed ee la siiyay shakhsiga canshuurta laga jaray iyo canshuurta wakiilka canshuur jarista uu u jaray si waafaqsan Qaybtan.

3) Iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda 4-aad ee Qodobkan, shahaadada canshuur jarista waa in ay daboosha hal bil, waana in lagula wadaagaa shakhsiga canshuurta laga jaray muddo soddon (30) maalmood gudahood ah kadib dhammaadka bisha.

4) Mark ay dhacdo in canshuurta loo jaro si waafaqsan Qodobka 90-aad (dakhliga shaqada), shahaadada canshuur jarista:

b) waa in ay dabooshaa qaybta sanadka kamidka ah ee shakhsigu shaqaalaha ahaa; sidoo kalana

t) waa in lala wadaagaa ugu dambeyn 30-ka Janaayo, kadib dhammaadka sanadka ama, hadii shakhsiga shaqaalaha ah uu joojiyay sanadka gudihiisa la shaqaynta wakiilka canshuur jarista, ugu danbayn soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa taariikhdii ay shaqaalenimadiisu joogsatay.

## Qodobka 95-aad
## Canshuurta Lacag-bixinta Kama Dambaysta ah Laga Jaro

1) Si waafaqsan ujeeddooyinka Sharcigan, lacag-bixinnada soo socda ayaa ah lacag- bixinno ay tahay in canshuurta looga jaro isha lacag-bixinta:

b) faa'idada saamiga oo ay shirkad Dalka deegan ku ah siiso shakhsi Dalka deegan ku ah;

t) faa'idada ka dhalata daymaha (returns on debt claims) oo ay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay bixiso, ee la xiriirta daymaha Dawladda:

i. taas oo ay siiso shakhsi Dalka deegaan ku ah; balse

ii. aysan kamid ahayn faa'idada ka dhalata daymaha ee uu helo shakhsi ka shaqaynaya ganacsi aan ahayn midka lagu dabaqaayo nidaamka canshuuraha la fududeeyey (eeg faqradda 4-aad ee Qodobka 9-aad);

j) faa'idada ka dhalata daymaha (returns on debt claims) oo ay bixiso haya'd maaliyadeed oo Dalka deegaan ku ah ama xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed oo qayb ka ah ganacsi bankiyeed ee hay'ad maaliyadeed oo aan Dalka deegaan ku aheyn (eeg Qodobka 65-aad), taasoo:

i. la siiyo shakhsi Dalka deegaan ku ah, lana xiriirta lacag shakhsigaas u



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

dhigtay hay'addaas; balse

ii. aysan kamid ahayn faa'idada ka dhalata daymaha ee uu helo shakhsi ka shaqaynaya ganacsi aan ahayn midka lagu dabaqaayo nidaamka canshuuraha la fududeeyey (eeg faqradda 4-aad ee Qodobka 9-aad);

x) kirada lasiiyo shakhsi Dalka deegaan ku ah oo la xiriirta hanti ma guurtada ah ee ku taala Soomaaliya;

kh) lacagaha la siiyo shakhsiyaadka aan Dalka deegan ku ahayn:

i. kuwaas oo laga rabo in canshuurta looga jaro si waafaqsan Qaybtan ama laga rabi lahaa in canshuurta laga jaro haddii Qodobada 91(3)(t) and 92(3)(t) (lacagaha aan ahayn kuwa ganacsiga oo ay shakhsiyaadku bixiyaan) aan la tixgelin; balse

ii. aysan kujirin lacag bixinnada laga helay xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed; iyo

d) wixii kale ee lacag bixin ah oo ay tilmaamaan xeer nidaamiyayaal loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

2) Canshuuraha soo socda ayaa buuxinaaya waajibaadka canshuureed ee shakhsiga canshuurta looga jarto isha lacag-bixinta si waafaqsan Qodobka 9(1)(t):

b) canshuurta isha lacag-bixinta lagu jartay si waafaqsan Qaybtan; iyo

t) canshuurta la bixiyay ee la xiriirta canshuurta ay ahayd in isha lacag-bixinta lagu jarto si waafaqsan faqradaha 3-aad ama 4-aad ee Qodobka 93 (ku guuldarraysiga canshuur ku-jarista isha lacag-bixinta).

3) Haddii lacag-bixin kama dambays ah aysan ku waajibin in canshuurta isha lacag- bixinta looga jaro sababo la xiriira Qodobka 91(3)(t) ama Qodobka 92(3)(t) (lacagaha aan ahayn kuwa ganacsiga oo ay shakhsiyaadku bixiyaan) ama in lacag-bixiyuhu uusan Dalka deegaan ku ahayn:

b) waajibaadka canshuureed ee shakhsiga lacag-bixinta qaatay ee ku cad Qodobka 9 (1)(t) ee la xiriirta lacag-bixintaas waxaa loo bixinayaa si qeyb-qeyb ah iyo marka qiimayn lasameeyo kadib; iyadoo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

t) si loo dabaqo Qaybaha III (qayb-qayb u bixin) iyo IV (qiimayn ku bixin), waajibaadka canshuureed loola dhaqmayo sidii waajibaadka canshuureed ee ku xusan Qodobka 9(1)(b).

### Qodobka 96-aad
### Tixgelinta Canshuureed ee Lacag-bixinta Laga-jaray Canshuur Aan Ku Waajibin

1) Shakhsiga laga jaray canshuurta lagu jaro isha lacag-bixinta ee la xiriirta lacag- bixin aysan ku waajibin canshuurta lagu jaro isha lacag-bixinta kama dambaysta ah, waxaa loola dhaqmayaa inuu bixiyay canshuur kasta:

b) oo laga jaray lacag bixintiisa si waafaqsan Qaybtan; ama

t) loo bixiyey si waafaqsan faqradaha 3-aad ama 4-aad ee Qodobka 93 (ku guuldarraysiga canshuur ku-jarista isha lacag-bixinta).

2) Shakhsiga laga jaray canshuurta lagu jaro isha lacag-bixinta waxa uu xaq u leeyahay sanadka canshuureedka uu lacag bixinta helay tixgelin canshuureed (tax credit) oo qiimeheedu la mid yahay canshuurta loola dhaqmay in la baxshay si waafaqsan faqradda 1-aad ee Qodobkan.

## QAYBTA III
## CANSHUURTA LOO BIXIYO QAYB QAYBTA
### Qodobka 97-aad
### Canshuur Ku Bixinta Qayb-qayb Rubucla Ah

1) Shakhsigu (qayb-qayb canshuur u bixiyaha) waa inuu ku bixiyaa canshuurta qayb- qeyb rubacla ah haddii uu shakhsigu ka helo sanad canshuureedka gudihiisa ama uu filayo inuu ka helo dakhli qiimeyngal ah:

b) ganacsi ama maalgashi; ama

t) shaqo taasoo oo loo shaqeeyaha aan laga rabin inuu canshuurta ku jaro isha lacag-bixinta si waafaqsan Qodobka 90-aad.

2) Canshuurta loo bixiyo qayb-qeybta waxaa waajib ah in la bixiyo dhammaadka rubac kasta inta lagu jiro sanad canshuureedka, iyada oo qaybta

ugu dambeysa ee canshuurtana ay waajib tahay in la bixiyo maalinta ugu dambeysa ee sanadka.

3) Si loo gaaro ujeedooyinka Qodobkan, qadarka qayb kasta oo ay tahay in la bixiyo sanad canshuureedka gudahiisa waxa loo xisaabinayaa si waafaqsan qaacidada lagu qeexi doono xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

4) Xeer nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa go'aamin kara in canshuur-bixiye-yaal gaar ah laga rabo inay canshuurta ku bixiyaan si qayb-qayb ah, oo ka duwan habka lagu tilmaamay Qodobkan ama xeer-nidaamiyaasha ka farcama.

5) Shakhsiga qayb-qayb u-bixiya canshuurta waxa uu xaq u leeyahay inuu sannad canshuureedka helo tixgelin canshuureed (tax credit) oo la mid ah canshuurta uu ku bixiyay qayb-qaybta sannadkaas gudahiisa.

## Qodobka 98-aad
## Warbixinta Qiyaasta Canshuurta La Bixinayo

1) Qof kasta oo canshuur qayb-qayb u bixiyaa sannad canshuureed gudahiisa si waafaqsan Qodobka 97-aad waa in uu Wasaaradda u gudbiyaa qiyaasta canshuurta laga rabo inuu bixiyo sanadkaas. Qiyaasta waa in lasoo gudbiyaa taariikhda la bixinaayo qeyb-qaybta ugu horreysa ee canshuurta. Qodobka 99-aad wuxuu qeexayaa duruufaha aan xeerkani lagu dabaqayn.

2) Qiyaasta lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkaan waa in:

b) loo soo gudbiyaa si waafaqsan habka iyo foomka ay Wasaaraddu tilmaamtay, walibana qiyaastaa:

i. dakhliga shakhsiga ee qiimeyn galka ah ee sanad canshuureedka kasoo gala shaqo, ganacsi iyo maalgashi iyo isha dakhligaas; iyo

ii. dakhliga shakhsiga ee sanadka ee canshuurgalka ah iyo canshuurta ay tahay in laga bixiyo akhligaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(b); iyo

t) ay ku jiraan, waliba ku lifaaqanaadaan wixii macluumaad kale ah oo ay Wasaaraddu tilmaamto.

3) Iyadoo la raacayo faqradaha 6-aad iyo 7-aad ee Qodobkan, canshuurta lagu sheegay faqradda (2)(b)(ii) waa canshuurta la qiyaasay ee uu shakhsigu bixinayo sanad canshuureedka.

4) Marka la qiyaaso canshuurta la bixinayo sanad canshuureedka ee ku cad faqradda (2)(b)(ii), shakhsigu waxa uu xisaabta ku darsan karaa canshuurta uu ku bixiyay dibadda taas ee uu sheegan karo in loo tixgeliyo si waafaqsan Qodobka 86-aad. Hasayeeshee, shakhsigu marka uu samaynayo sidaan lasoo sheegay, waxa uu xisaabta ku darsan karaa oo keliya canshuurta dakhliga ee dibadda haddii shakhsigu uu bixiyay canshuurtaas ama shakhsigu si maangal ah u saadaalinayo in canshuurta uu bixin doono sanadka dhexdiisa.

5) Qiyaasta shakhsiga canshuurta qayb-qaybta ku bixiya ee ku cad faqradda 1-aad ee Qodobkan waxa ay dhaqangal ahaanaysaa sanad canshuureedka oo dhan ilaa uu shakhsigu qiyaas dib-u-eegis lagu sameeyay usoo gudbiyo Wasaaradda.

6) Qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay ee uu shakhsigu usoo gudbiyo si waafaqsan farqadda 5-aad ee Qodobkaan waa qiyaasta canshuurta shakhsigu uu bixinayo sanad canshuureedka, balse waxaa loo adeegsan karaa oo keliya xisaabinta canshuuraha qayb-qaybta loo bixiyo oo ay tahay in la bixiyo si waafaqsan Qodobka 97-aad kadib taariikhda qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay loo gudbiyo Wasaaradda.

7) Marka loo gudbiyo Wasaaradda, qiyaasta ama qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay waxaa loo qadarinayaa is-qiimayn oo waafaqsan Qodobka 48-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa) waxaana dib wax uga badali kara Wasaaradda sida uu tilmaamay Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa). Wasaaraddu waxa ay ku saleyn kartaa wax-ka-beddelka canshuurta eey tahey in shakhsigu bixiyo iyadoo "sare u qaadis" ku sameeynaysa canshuurtii shakhsiga laga rabay sanad canshuureedkii hore. Shakhsigu dib-u-eegis kuma samayn karo qiyaas canshuureedka si waafaqsan faqradda 5-aad ee Qodobkan haddii ay Wasaaraddu wax-ka-beddel ku sameeysay qiyaasta.

## Qodobka 99-aad

## Marka Aan La Rabin Warbixinta Qiyaasta ee Canshuurta La Bixinayo

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

1) Qayb-qayb canshuur u bixiye (instalment payer) ama koox qayb-qayb canshuur u bixiye-yaal ah loogama baahna inay soo gudbiyaan qiyaasta canshurta ee lagu xusay Qodobka 98-aad haddii waajibaadkaas looga dhaafay:

b) xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan; ama

t) wareegto rasmi ah oo ay soo saartay Wasaaraddu si waafaqsan Qodobka 9-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa) ama wargalin qoraal ah oo si gaar ah ugu socota canshuur-bixiye gaar ah.

2) Hadii qayb-qayb canshuur u bixiye (instalment payer) aan laga rabin inuu soo gudbiyo qiyaas canshuureed siyaabo la xiriira arrimaha ku cad faqradda 1-aad ee Qodobkaan awggeed, Wasaaraddu:

b) waa inay qiyaasta canshuurta shakhsiga uu bixinayo sanad canshuureedka, taas oo lagu saleeyn karo canshuurtii laga rabay inuu bixiyo sanad canshuureedkii hore oo loo kordhiyay si habboon oo ay Wasaaraddu u aragto; iyadoo

t) la wadaagaysa qayb-qayb canshuur u bixiyaha wargelin qoraal ah oo sheegaya qiyaasta Wasaaradda iyo sida loo xisaabiyay.

3) Haddii Wasaaraddu gudbiso wargelinta ku cad faqradda 2-aad ee Qodobkan, si waafaqsan Qodobka 97-aad qiyaasta canshuurta ee uu bixinayo shakhsigu sanad canshuureedka waa inta ay qiyaastay Wasaaraddu.

## Qodobka 100-aad
## Hal Mar Shubista Canshuurta Waqtiga Wareejinta Ama Lacag Helidda

1) Shakhsi kasta oo milkiyadda hanti ma guurta ah oo kutaalla Soomaaliya iska wareejinaaaya waa inuu sodon (30) maalmood gudahooda kadib marka uu dhaqan- galo heshiiska lagu wareejinayo milkiyadda hantidaas u gudbiyaa Wasaaradda warbixin muujinaysa qiyaasta lacageed ee lagu darayo xisaabinta dakhligiisa canshuurgalka ah ee kasoo galaya hantida uu gacantiisa-ka-saaray. Warbixinta qiyaasta waa inay loo qoraa habka iyo foomka ay Wasaaraddu tilmaamay. Haddii aysan Wasaaraddu ku qancin qiyaasta, dib ayay wax uga badali kartaa iyadoo cuskanaysa Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa).

2) Marka warbixinta qiyaasta lacagta ee ku cad faqradda 1-aad ee Qodobkan loo gudbinaayo Wasaaradda, waa in shakhsiga hantida iska wareejinaaya bixiyaa canshuur halmar la wada shubaayo oo la eg:

b) marka shakhsigu Dalka degaan kuyahay, boqolkiiba shan (5%) ee lacagta la qiyaasay inay ku darsoontay dakhliga canshuurgalka ah; ama

t) marka shakhsigu aan Dalka degaan ku ahayn, boqolkiiba shan (5%) ee kororka faa'ido ee la qiyaasay.

3) La-wareegaha hantida maguurtada ah waxa uu hal mar bixin karaa canshuurta isaga oo ka wakiil ah wareejiyaha, iyadoo qaddarta lacageed ee uu bixinaayo ay Wasaaraddu go'aaminayso. Qaddarta lacageed ee la sheegay waa in aysan ka badan boqolleyda lagu cayimay faqradda 2-aad ee Qodobkan oo lagu dhuftay boqolkiiba todobaatan (70%) ee lacagta hantida lagu iibiyay. Si arrinkaan loo dhaqangeliyo, la wareeguhu wuxuu canshuurta ka jari karaa lacagta hantida lagu iibiyay ee uu bixinaayo. Faqradaha 5-aad iyo 6-aad ee Qodobka 93 (dib lacag uga helida wareejiyaha) ayaa lagu dabaqaaya canshuur kasta ee uu bixiyo la-wareegaha hantida.

4) Wasaaraddu waa inay siisaa wareejiyaha hantida iyo la wareegahaba shahaado qoraal ah oo caddaynaysa inay u hoggaansameen faqraddaa 2-aad ama 3-aad ee Qodobkan. La-wareeguhu xaq uma lahaanaayo inuu isticmaalo hantida ma guurtada ah, halka milkiyaddiisa ku aadan hantida lagu wareejiyay aan la aqoonsanayn, walibana aan la diiwaan gelin karin iyada oo aan la soo saarin shahaadadaas. Canshuurta loo bixinayo si waafaqsan farqadda 2-aad waa rahan dulsaaran hantida ma guurtada ah si waafaqsan Qodobbada 64-aad, 65-aad iyo 66-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkood).

5) Haddii:

b) hantida ma guurtada ah ee la wareejinayo ay hoostagayso faqrad-hoosaadka (t)(ii) ee qeexitaanka "hanti ma guurto ah" ee ku xusan Qodobka 2-aad; walibana

t) xili ka mid ah labadii sano ee ka horeysay wareejinta uu wareejiyuhu (oo ay weheliyaan shakhsiyaad ay xiddid yihiin) lahaa boqolkiiba labaatan iyo shan (25%) ama in ka badan ee milkiyadda asaasiga ah ee hay'adda heysata

heshiis kiro macdan qodis, heshiiska wadaagga soo saarista shidaalka ama hanti ma guurta ah ee kutaalla Soomaaliya; hay'addaas waxa ay si wadajir ah iyo si kali ahba (jointly and severally) masuul ugula tahay wareejiyaha iyo la-wareegaha bixinta canshuurta iyo u hoggaansanaanta shuruudaha ku xusan faqraddaha 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee Qodobkan.

6) Haddii:

b) shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn ay lacag ka soo gasho ganacsiga hawlgelinta gaadiid dhulka, badda iyo cirka ama kiraynta gaadiidkaas;

t) qayb ganacsigaasi ka mid ahna aan lagu fulinin iyadoo la isticmaalaayo xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed ee shakhsigu leeyahay; sidoo kalena

j) lacag-bixintaas laga helay qaadidda iyo kiraynta ku xusan Qodobka 79(2)(s), Wasaaraddu waxa ku waajibin kartaa shakhsigaas inuu bixiyo canshuurta dakhliga oo u dhiganta boqolkiiba shan (5%) lacagaha uu qabtay ee guud (gross payments), isagoo usoo shubaaya canshuurta si halmar ah.

7) Baabuurka, markabka ama diyaaradda loo isticmaalay qaadista ama la kireeyay ee ku xusan faqradda 6-aad ee Qodobkan lagama saari karo goob furdo ah ilaa ay soo bandhigaan shahaado canshuureed oo ay soo saartay Wasaaraddu taas oo sheegaysa in canshuurtii ku waajibtay shakhsiga leh ganacsigaas la bixiyay ama wax canshuur bixin ah in aan laga rabin shakhsiga leh ganacsigaas.

8) Wareejiyaha milkiyadda hanti ma guurta ah ama shakhsiga aan Dalka deegan ku ahayn ee ka ganacsada hawlgelinta ama kiraynta gaadiid dhul, bad ama cir kaas oo ay ku waajibtay in uu halmar shubo canshuurta sida uu dhigayo Qodobkan waxa uu xaq u yeelanayaa u-tixgelin canshuureed (tax credit) oo u dhiganta canshuurta uu halkamar shubay ee sanad canshuureedka waajibaadkiisa canshuureed dhashay.

## QAYBTA IV
## CANSHUURTA LAGU BIXINAYO QIIMAYNTA
### Qodobka 101-aad
### Warbixinta Xisaab-canshuureedka Dakhliga

1) Canshuurbixiye kasta waa inuu u soo gudbiyaa Wasaaradda warbixinta

xisaab canshuureedka dakhliga (return of income) ee sanad canshuureedka. Guud ahaan, warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga waa in la soo gudbiyaa 31-da Maarso ee sanadka dhamaaday kadib. Haddii sanad canshuureedka canshuurbixiyuhu uu ku beegmi waayo dhamaadka sanadka kalandarka (Janaayo - Diseembar), waa in canshuurbixiyahaas uu soo gudbiyaa warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga maalinta 30-aad kadib dhamaadka sanad canshuureedkiisa. Qodobka 102-aad waxa uu dhigayaa wixii ka reebban faqraddan.

2) Warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga waa in:

b) loo qoraa qaabka iyo foomka ay Wasaaraddu go'aamiso, kuna caddahay:

i. dakhliga qiimeyngalka ah ee sanad canshuureed shakhsiga ka soo galaa shaqo, gacansi iyo/ama maalgashi kasta iyo isha dakhligaas;

ii. dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsiga ee sanadkaas iyo canshuurta ku waajibtay ee la xiriirta dakhligaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(b);

iii. canshuur kasta oo uu shakhsigu sanadkaas ku bixiyay nidaamyada ay kamidyihiin canshuur ka-jaris, qeyb-qeyb u-bixin ama qiimayn ku bixin taasoo ku heli karo u-tixgelin canshuur (tax credit) si waafaqsan Qodobbada 96-aad, 97- aad ama 100-aad ee Sharcigan ama Qodobka 49-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa);

iv. qadarta canshuureed ee sanadkaas aan weli la bixin oo loo xisaabinayo wadarta canshuurta lagu sheegay farqad-hoosaadka (ii) oo laga jaray canshuurtii hore loo bixiyay oo lagu sheegay faqrad-hoosaadka (iii); iyo

v. macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu go'aamiso; iyadoo

t) ay ku lifaaqanyihiin:

i. shahaado kasta oo canshuur ka-jaris ee la siiyey shakhsiga si waafaqsan Qodobka 94-aad oo la xiriirta lacagaha uu shakhsigu helay sanadkaas gudahiisa;

ii. bayaan kasta ee shakhsigu la siiyo ee ku cad Qodobka 40(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax-kabeddelkiisa); iyo

iii. macluumaad kasta oo kale ee ay Wasaaraddu go'aamiso.

## Qodobka 102-aad
## Shakhsiyaadka Aan Laga Rabin Soo Gudbinta Warbixinta Xisaab Canshuureedka Dakhliga

1) Haddii Wasaaraddu aysan si kale ogaysiis qoraal ah ugu go'aamin ama shakhsigu dooran inuu warbixin xisaab canshuureed dakhli soo gudbiyo, warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga ee sanad canshuureed lagama rabo:

b) shakhsi Dalka degaan ku ah:

i. oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadkaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(b); ama

ii. oo dakhligiisa canshuurgalka ee sanadka uu yahay oo keliya dakhli ka soo gala shaqo islamarkaasna canshuurta isha lacag-bixinta looga jaro si waafaqsan Qodobka 90-aad; ama

t) shakhsi aan Dalka degaan ku ahayn oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadkaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(a).

## Qodobka 103-aad
## Qiimaynta iyo Canshuur Bixinta

1) Marka la soo gudbiyo iyada oo loo hoggaansamaayo Qodobka 101-aad, warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga waxaa loo qadarinayaa is-qiimayn waafaqsan Qodobka 48-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax- kabeddelkiisa) waxaana dib wax uga badali kara Wasaaradda sida uu tilmaamay Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ee dhaqan-galka ah (ama wax- kabeddelkiisa).

2) Canshuurta ay tahay in la bixiyo ee ku cad is-qiimeynta lagu sheegay faqradda 1- aad ee Qodobkan waxa la bixinayaa taariikhda ay waajibka tahay in Wasaaradda loo soo gudbiyo warbixinta xisaab canshuureedka dakhliga (eeg Qodobbada 89(2)(j) iyo 101-aad).

# CUTUBKA X
# BURINTA, KALA GUURKA IYO DHAQAN GALKA SHARCIGAN

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## Qodobka 104-aad
## Iswaafajinta Wax Ka- Bedellada

1) Qodobbada, faqradaha iyo jadwallada shuruucda ku xusan Jadwalka Lixaad waa la baabi'iyay, la bedelay gebi ahaanba ama wax-ka-beddelid ayaa lagu sameeyey si loo xaqiijiyo dejinta iyo dhaqan-gelinta Sharcigan.

2) Xeer-nidaamiyeyaasha la xiriira qodobbada, faqradaha ama jadwallada lagu sheegay faqradda 1-aad ee Qodobkan ee dhaqangalka ah marka Sharcigan la ansixiyo waxay sii ahaanayan dhaqangal. Xeer-nidaamiyeyaashaas waxay usii shaqaynayaan sidii in loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ilaa lagu beddelayo ama lagu baabi'inaayo xeer-nidaamiyeyaal loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan. Hase yeeshee, waxaa la joojinaaya isticmaalka xeer-nidaamiyeyaasha aan waafaqsanayn Sharcigan. Qodobkan dhexdiisa, xeer-nidaamiyeyaal waxaa ka mid ah xeerarka, go'aannada, amarrada iyo ogeysiisyada.

## Qodobka 105-aad
## Xilliga Kalaguurka

1) Iyadda oo la raacayo Qodobkan, qodobbada, faqradaha iyo jadwallada shuruucda ku xusan Jadwalka Lixaad (oo halkaan kadib loogu yeerayo "sharcigii hore") waxay u sii shaqaynayaan sidii loo ansixiyay iyada oo aan waxba laga beddelin marka lagu dabaqaayo xilliyada iyo xaaladaha ka horeeyay taariikhda uu Sharcigani dhaqangalay.

2) Foomamka iyo dukumeentiyada kale ee loo isticmaali jiray sharcigii hore waxa loo sii isticmaali karaa Sharcigan. Tixraac kasta oo foomamkaas ah iyo dukumeentiyadaas ku xusan oo la xiriira qodobbo iyo faqrado katirsan sharcigii hore waxaa loo tixgelinayaa inay tixraacayaan qodobbada iyo faqradaha u dhigma ee ku qoran Sharcigan.

3) Sharcigii hore ayaa lagu sii dabaqayaa:

b) waajibaadka canshuureed ee la xiriira sanad canshuureedka dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan, oo ay kujiraan soo gudbinta warbixinta xisaab canshuureedka iyo xisaabinta canshuurta waajibtay; iyo sidoo kale

t) hawlaha iyo talaabooyinka maamul iyo sharci, oo ay kujiraan dacwadaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

maxkamadeed oo bilaawday ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

4) Canshuurta waajibtay ee la xiriirta sanad canshuureed kasta oo dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqangalka Sharcigan waxaa lagu soo uruurin karaa talaabooyin maamul iyo sharci oo cusub oo la bilaabay iyadoo la adeegsanaayo Sharcigan. Talaabooyinka maamul iyo sharci ee cusub oo loo bilaabay iyadoo la adeegsanaayo Sharcigan si loo soo uruuriyo canshuur baaqatay ma saamayn doonaan talaabooyinka maamul iyo sharci oo horay loo bilaabay oo lagu soo uruurinaayo canshuuraha baaqday.

5) Haddii xaaladda markaas jirta u baahato, marka Sharcigani tixraacayo "Sharcigan" ama qodobbo ama faqrado ka mid ah "Sharcigan," waxa loo fahmayaa inuu tixraacayo sharcigii hore ama qodobbo ama faqrado ka mid ah sharcigii hore.

6) Haddii kororka faa'ido ee laga helo gacan-ka-saarista hanti jirta taariikhda dhaqangalka Sharcigan aan la canshuuri laheyn haddii gacan-ka-saarista hantidaas ay dhici lahayd xilliga sharcigii hore uu dhaqangalka ahaa balse la canshuuraayo si waafaqsan Sharcigan, hantidaas waxaa loo nisbaynayaa kharash udhigma qiimaha suuqa ay ka joogto hantidaas taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

7) Xeer-nidaamiyeyaal loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan ayaa go'aamin kara tallaabooyin kalaguur oo dheeri ah oo la xiriira hirgelinta Sharcigan. Tallaabooyinkas waxaa ka mid noqon kara kuwa dib-u-dhigi kara ama wax-ka-beddelli kara habka dhaqan-gelinta qodobbo, faqrado ama jadwallo Sharcigan ka mid ah, balse tallaabooyinkaas kalaguur ah waxa ay jiri karaan oo keliya muddo aan ka badnayn shan (5) sanadood.

## Qodobka 106-aad
## Dhaqan Galka Sharciga

Sharcigaan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna Saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuhiyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## JADWALLADA
## JADWALKA KOWAAD: BOQOLLEYDA CANSHUURTA (TAX RATES)

### (Qodobka 9)

### Qodobka 1-aad

### Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shakhsiyaadka Dabiiciga (Rates of Income Tax for Individuals)

1) Iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda 2-aad ee Qodobkaan iyo Jadwalka Labaad ee Sharcigan, dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala shaksi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah waxa lagu canshuuraya boqolleyda ku xusan jaantuska socda:

| Lr. | Dakhliga Canshuur-galka ah (Sanadle) | Canshuurta Laga Bixinayo |
|---|---|---|
| 1. | Dakhliga aan ka badnayn $1,200 USD | Wax canshuur ah lagama rabo |
| 2. | Dakhliga u dhexeeya $1,201 USD ilaa $6,000 USD | Boqolkiiba lix (6%) |
| 3. | Dakhliga u dhexeeya $6,001 USD ilaa $18,000 USD | $288 USD oo lagu daray boqolkiiba laba iyo toban (12%) oo lagu dhuftay inta ka badan $6000 USD |
| 4. | Dakhliga ka badan $18,000 USD | $1,788 USD oo lagu daray boqolkiiba siddeed iyo toban (18%) oo lagu dhuftay inta ka badan $18.000 USD |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

2) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala shakhsi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah oo ay da'diisu ka-yar tahay siddeed iyo toban (18) sanno dhamaadka sanadka waxa lagu canshuurayaa boqolkiiba labaatan (20%) oo ah boqolleey siman, marka laga reebo markii Wasaaraddu:

b) ku qanacdo in dhammaan lacagaha xisaabta lagu darsaday (si toos ah ama si dadban) marka la xisaabinaayay dakhligaas ay yihiin kuwa u hoggaansan nidaamka eex la'aanta ah (arm's length standard) (eeg Qodobka 37-aad); walibana

t) ay qoraal ahaan ku xaqiijisay in shuruuda ku qoran farqad-hoosaadka (b) lasoo buuxiyay.

3) Marka dakhliga canshuur-galka ah ee sand canshuureed soo gala shakhsi dabiici ah ee Dalka degaan ku ah ay ku jiraan kororka faa'ido (gains) ee shakhsigu ka helay gacan-ka-saarista hanti maalgashi ee canshuur-gal ah ama lacag-bixin hawlgab oo halmar si duuduub ah looga helay sanduuqa hawlgab ee la aqoonsanyahay:

b) dakhliga canshuur-galka ah ee aan ka badnayn $18,000 USD waxaa lagu canshuurayaa boqoleyda ku xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan; iyadoo

b) dakhliga canshuur-galka ah ee ka badan $18,000 USD lagu canshuurayo:

i. boqolkiiba shan iyo toban (15%), iyada oo aysan ka badan karin cadadka dhabta ah ee kororka faa'ido (gain) ama lacag-bixinta hawlgab ee la helay; halka

ii. wixii dakhli ah ee intaas kabadan lagu canshuuraayo boqolkiiba siddeed iyo toban (18%).

4) Dakhliga canshuur-galka ah ee shakhsi dabiici ah ee aan Dalka degaan ku aheyn sanad canshuureed waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba siddeed iyo toban (18%) oo ah boqolleey siman.

## Qodobka 2-aad
## Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Ammaanooyinka (Rate of Income Tax for Trusts)

Dakhliga canshuur-galka ah ee Ammaanooyinka ee sanad canshuureed waxa lagu canshuuraya boqolkiiba labaatan iyo lix (26%) oo ah boqolleey

siman.

### Qodobka 3-aad
### Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Shirkadaha (Rate of Income Tax for Corporations)

Dakhliga canshuur-galka ah ee Shirkaddaha ee sanad canshuureedka waxa lagu canshuuraayaa boqolkiiba shan iyo toban (15%) oo ah boqolleey siman.

### Qodobka 4-aad
### Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Lagu Dabaqaayo Xarun Ganacsi oo Joogta ah ee Soomaaliyeed (Rates of Income Tax for Somali Permanent Establishments)

1) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed soo gala xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxaa lagu canshuuraya mid lamid ah boqolleeyda canshuurta dakhliga Shirkaddaha ee ku cad Qodobka 3-aad ee Jadwalkaan.

2) Dakhliga dibadda loo diray sanad canshuureed ee xarun ganacsi oo joogta ah ee Soomaaliyeed waxaa lagu canshuuraya boqolleeyda canshuureed ee ku cad faqradda (1)(t)(i) ee Qodobka 5-aad ee Jadwalkan.

### Qodobka 5-aad
### Boqolleeyda Canshuurta Isha Lacag-bixinta Lagu-jaro (Rates of Withholding Tax)

1) Boqolleyda canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro ee la xiriirta lacag-bixinnada ku xusan Qeybta II ee Cutubka IX ee Sharciga waa sidaan:

b) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 90-aad ee Sharciga (dakhliga shaqada):

i) haddii uu yahay canshuur-laga-jare (withholdee) Dalka degaan ku ah, waxaa lagu canshuurayaa boqolleeyda canshuurta dakhliga ee lagu dabaqo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu cadeeyay faqradda 1-aad ee Qodobka 1- aad ee Jadwalkaan; iyadoo

ii) haddii uu yahay canshuur-laga-jare (withholdee) aan Dalka degaan ku ahayn lagu dabaqaayo boqolleeyda canshuurta dakhliga ee lagu dabaqo shakhsiyaadka dabiiciga ah ee lagu cadeeyay faqradda 4-aad ee

Qodobka 1- aad ee Jadwalkaan.

t) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 91-aad (investment returns):

i. haddii ay tahay faa'idada saamiga (dividend), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%);

ii. haddii ay tahay faa'idada ka dhalata qaamaha (returns on debt claims), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%);

iii. haddii ay tahay kiro uu shakhsi Dalka degaan ku ah ka helo hanti maguurta ee Soomaaliya kutaala, waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%); iyo

iv. haddii ay tahay kiro nooc kale ah, waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%); sidoo kalana

v. hadii ay tahay khidmadda kheyraadka dabiiciga ah ama khidmadda xuquuqda milkiyadda (royalty), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan iyo toban (15%); iyadoo

j) lacag-bixinnada lagu dabaqaayo Qodobka 92-aad (service fees):

i. haddii ay tahay khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(b), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%);

ii. haddii ay tahay khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(t), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba toban (10%); sidoo kalana

iii. haddii ay tahay lacagaha lagu iibsado caymiska (premium) ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(t), waxaa lagu canshuurayaa boqolkiiba shan (5%).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

## JADWALKA LABAAD: CANSHUURAHA LA-FUDUDEEYEY (SIMPLIFIED TAXATION)

### (Faqradda 4-aad ee Qodobka 9-aad)

### Qodobka 1-aad

### Mabaadi'da Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay

1) Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in wax laga beddelo, iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, habraaca canshuurista shakhsiyaad Dalka deegaan ku ah ee u qalma, isagoo:

b) ogolaanaya in canshuur xisaabinteeda lagu saleeyay qiyaas dakhliyeed (presumptive tax -) lagu soo rogi karo shakhsiyaadka dakhligooda canshuur-galka ah uu ku jiro dakhli ka yimid noocyo ganacsi ee lagu cayimay xeer-nidaamiye; walibana sidoo kale

t) ogolaanaya in la dabaqo hab-xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay (modified cash basis) marka la xisaabinayo dakhliga ka soo xarooda ganacsiyadda lagu cayimay xeer-nidaamiye.

2) Marka ay jiraan meelo aan waxba laga beddelin iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan oo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan, xeerarka caadiga ah ee uu Sharcigani dejiyay ayaa la dabaqayaa.

### Qodobka 2-aad

### Xeer-nidaamiyaha Habraaca Canshuuraha La-fududayeyay

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan oo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo dejinaaya arrimo ay ka mid yihiin, balse aan ku ekayn:

b) shakhsiyaadka iyo ganacsiyada u qalma iyo kuwa aan u qalmin, shuruudaha daruuriga ah, iyo habraaca canshuuraha oo ay u hoggansaamayaan; iyo

t) shuruudaha ay tahay in loo hoggaansamo, wax-ka-beddellada la oggolyahay, iyo sida loogu dabaqayo hab-xisaabeedka caddaanka ah ee wax laga beddelay (modified cash basis) shakhsiyaadkaad ay ka midyihiin shakhsiyaadka Dalka deegaanka ku ah iyo shuraakooyinka.

## JADWALKA SADDEXAAD: DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY (EXEMPT AMOUNTS)

**(Qodobka 15)**

1) Dakhliga Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose, oo aysan kujirin dakhliga ay ka helaan howlaha si dadban ula xiriira shaqadooda Dowladeed.

2) Ilaa iyo inta uu waajibinaayo heshiiska caalami ah oo Soomaaliya looga baahanyahay inay u hoggaansanto:

b) dakhliga hay'adaha iyo ururada caalamiga ah;

t) mushaharka iyo gunooyinka kale ee wakiilada dublamaasiyadda iyo qunsuliyaddaha dawladaha shisheeye ku helaan hawlaha la xiriira shaqooyinkooda; iyo

j) mushaharka iyo gunooyinka saraakiisha iyo shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo hay'adaheeda gaarka ah iyo sidoo kale kuwa hay'adaha caalamiga ah ka helaan hawlaha la xiriirta shaqooyinkooda.

## JADWALKA AFARAAD: HANTIDA QIIMO-DHACDA (DEPRECIABLE ASSETS)

**(Qodobka 20**
**Qodobka 1-aad)**
**Ujeedooyinka Jadwalkan**

Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, uu si waadix ah u faah-faahiyo xeerarka canshuureed ee hagaya kala soocida, isu gaynta, iyo qiimo dhaca hantida loo isticmaalo ganacsiga.

## Qodobka 2-aad
## Xeer-nidaamiyaha Ku-aadan Sida Loola-dhaqmaayo Hantida Qiimo Dhacda

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo qeexi doona xeerarka la xiriira sida loola dhaqmaayo hantida qiimo dhacda. Xeer-nidaamiyahan ayaa nidaamin doona arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

b) kala soocidda iyo isu geynta hantida qiimo-dhacda (classifying assets);

t) xisaabinta iyo oggolaanshaha qaddarta qiimo dhaca loo ogol yahay (depreciation calculation);

j) go'aaminta qiimaha hoos u dhaca ee ee koox hanti ah oo isku nooca (depreciation basis); iyo

x) sida loola dhaqmaayo gacan-ka-saarista hantida qiimo-dhacda (asset disposal).

# JADWALKA SHANAAD: QIIMAYNTA DHEEFAHA (QUANTIFICATION OF BENEFITS)

## (Qodobka 32)
## Qodobka 1-aad
## Ujeedooyinka Jadwalkan

Jadwalkani waxa uu dejinayaa saldhiga Sharci ee ogolaanaya in xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan, uu si waadix ah u faah-faahiyo xeerarka canshuureed ee hagaya qiimaynta (quantification) dheefaha la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad, oo ay ku jiraan gaadiid, deymo, iyo hoy.

## Qodobka 2-aad
## Xeer-nidaamiyaha La-xiriira Sida Loo Qiimeeyo Dheefaha

1. Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan iyo dhaqan-gelinaaya ujeedooyinka Jadwalkaan ayaa lasoo saari doona, kaas oo qeexi doona xeerarka la xiriira sida loo qiimaynaayo (quantification) manfacyada/dheefaha



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad. Xeer-nidaamiyahan ayaa nidaamin doona arrimo muhiim ah oo ay ka mid yihiin:

b) qiimaynta dheefaha gaadiid ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad;

t) qiimaynta dheefaha daymeed ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad;

j) xisaabinta dheefta hoy ee la siiyo shaqaalaha ama xubnaha kale ee katirsan hay'ad; iyo

x) qeexidda shaqaalaha u qalmda dheefta hoy.

## JADWALKA LIXAAD: ISWAAFAJINTA WAX KA- BEDELLADA (CONFORMING AMENDMENTS)

### (QODOBKA 104)

### Qaybta I
### Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966)

Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966) dhamaantiis ayaa la nasakhay.

### Qaybta II
### Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27-ka Oktoobar 2019)

Faqradaha Qodobka 3-aad waxaa lagu bedelay kuwaan soo socda:

1) Shuruucda dakhliga waxaa loo maamulayaa si waafaqsan Sharcigan.

2) "Sharci dakhli" waxa loola jeeda:

a) shuruucda soo socda:

i) Sharcigan;

ii) Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Canshuuraha Furdooyinka (Sharci Lr. 21 ee 5-ta Febraayo 2020);

iii) Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

iv) Sharciga Canshuurta Wadomarista (Sharci Lr. 4 ee 28 December 1965);

v) Sharciga Canshuurta Stambada (Sharci Lr. 6 ee 6 Disembar 1966);

vi) Sharci Canshuurta Gadidda (Sharci Lr. 2 ee 7 Janaayo 1984);

vii) Sharci Canshuurta Canshuurta Wax Soo Saarka (Sharci Lr. 3 ee 23 May 1985);

viii) Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023); iyo

ix) Sharci kasta oo kale oo lagu daro liiska, iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye;

b) Hishiis kasta oo caalami ah oo lagu qeexay Qodobka 5-aad; iyo

c) Xeer-nidaamiye kasta oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 6-aad ee Sharcigan ama mid kamid ah shuruucda ku xusan xaraf (b) ee faqradaan.

**Farqadda 1(a) ee Jadwalka Labaad waxaa loo beddelay sidaan soo socota:**

a) marka ay timaado canshuurta dakhliga:

i) warbixinta canshuurta isha lacag-bixinta lagu jaro ee loo soo gudbiyo si waafaqsan Qodobka 93-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

ii) warbixinta qiyaasta dakhliga canshuur-galka ah ama warbixinta qiyaasta lacageed ee laga helay hantida gacanta-laga-saaray ee loo soo gudbiyo si waafaqsan Qodobbada 98-aad ama 100-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025; iyo

iii) warbixinta xisaab-canshuureedka dakhliga ee loo soo gudbiyo si

waafaqsan Qodobka 101-aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga ee 2025;

## Qaybta III
## Is-waafajinta Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023) iyo Sharciga Canshuuraha Dakhliga

Wasiirka Maaliyadda waxa halkaan awood loogu siiyay inuu soo saaro Xeer-nidaamiye faah-faahsan oo la'isku waafijinaayo Sharciga Cashuuraha Dakhliga iyo Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr. 10 ee 20-ka Maarso 2023) kadib marka la ansixiyo Sharciga Cashuuraha Dakhliga.

## Qaybta IV
## Sharciyada Kale

Qodobada ku jira sharci kasta oo kale oo ka hor imaanaya qodobada Sharcigani waa la baabi'yay.